# MAAHMAAHOOYINKII LA NASAKHAY (LA BADELAY) IYO MAAHMAAHO MAGAALEED

W. Q. DR. QAASIM XIRSI FAARAX

# HORDHAC

Dhab ahaantii marka si daqiiq ah loo daraasadeeyo qaab dhismeedka maahmaahooyinka Soomaalida waxaa la garan karaa in ay u kala cucuban yihiin laba qaabood oo la kala ah: Maahmaah iyo oraah. Qaabkani waxa uu la fal gali karaa marka laga eego xaga tixraaca werinta iyo dariiqadaha isticmaalka nidaamka Xadiiska iyo Atharka ee sunada diinta Islaamka. Waxaad kale oo arkaysaa in nidaamka ay ku socoto maahmaahdu uu yahay mid xiriir toosa ah (*mutawaatir*).

Laakiin ka soo horjeedka taas Oraahdu waxay ku kala gedisan tahay hadba gobolka iyo deegaanka laga isticmaalyo oo ay hadana ku go'ayso meelo dhaw dhaw (*mutasil*) ama uu hadalkeedu marba dhan ka go'ayaa (*munqadhic*). Teeda kale Oraah waa weero jumaladaysan oo ay baan tahay in wax laga badelo waxna lagu kordhiyo ama si kale loo qalloociyo sidaa awgeed Soomaalidu waxay tiraahdaa: "Oraah nina si u yiri, nina si uqaaday". Tani waxay ku tusinaysaa in aysan badelka Oraahdu ahayn wax la iskula yaabo, laakiin maahmaah marka aad wax ka badesho dadku si didsanaan ah ayey kuu wada eegayaan oo kugu eedaynayaan in aad qaldan tahay. Sidaa awgeed dhaqan ahaan ma banaana in la badelo maahmaah, balse heerka ay manta maraysaa waa mid banaynayaa in la jebiyo xeer hoosaadkaas maadaama ay dadkii dejistay ka tageen dunida oo kuwa iminka isticmaalayaa yihiin kuwa cusub oo la yimid dhaqan dhaqaaleed iyo aragtiyo cusub.

Waxa ugu muhiimsan ee kala saari kara maahmaah iyo oraah waa in ay Oraahdu taranto oo mar walba sii badanayso, laakiin maahmaahdu taran ma lahan ee waxay leedahay tayo. Teeda kale Oraahdu ma ahan wax aad loo tixgeliyo ee qaarkeed waxa loo sheegaa si loogu qoslo ama qaab maadaysi ah, laakiin maahmaahdu waa qodobo la xujaysto oo lagu kalsoonaan karo marka la maqlo.

Oraahda oo iyada badanaaba loo curiyo qaab ku salaysan xikmad laga qaatay oday bulshada deegaankaas ka tirsanaa (badanaaba mid dhintay) oo looga dambeeyey hadal murtiyeedka iyo xikmado keenista. Tusaale ahaan waxaad arkaysaa dad reer Muqdisho, gaar ahaan marka siyaasadda laga hadlayo oo mar walba tusaale usoo qaata kelmado xikmadeed ay sheegayaan in uu yiri oday la yiraahdo Faarax Gololeey isaga oo la sheekaysanaya ama la kaftamaya madaxweyne Maxamed S. Barre. Waxaa laga yaabaa in xikmadahaas wax ka jiraan, laakiin waxaad hadana dareemi kartaa in ay badankoodu yihiin wax la abuurtay marka aad ka eegto habka ay usuurtoobi karto. Sidoo kale waxaad arkaysaa in dadka jiilka hadda dhamaan raba ay markay wax fulinimo ku saabsan cadaynayaan ku hadal qabsadaan Cigaal Shidaad. Laakiin hadana waxaad caqligaaga ku dareemi kartaa in ay badanka sheekooyinkaasi been abuur yihiin. Sidaa si la mid ah ayaad beel kasta ka arkaysaa in ay kelmado badan ka soo xigtaan oday iyaga ka mid ahaa oo laga yaabo inuu 30% yiri inta loo saarinayo 70% qiyaastiina loogu buuxinayo.

## MAHAD CELIN, RAALLI GELIN IYO HIBAYN

**Mahada Koowaad**: Waajib ayey igu tahay in aan mahad naqa koowaad siiyo Allaha Awooda sare leh ee kashaha ii siiyey in aan ku fikiro qormada iyo dhamaystirka buugaan aan isaga oo kale horay loo arag loona maqal.

**Mahada Labaad**; Waxaan u naqayaa lamaanahayga aan jeclahay; **Muna Abukar Cabdulle** oo iyadu kaalmo hagar la'aan ah ka geysatay hirgelinta iyo soo saaritaanka buugaan. Fursada ay isiisay iyo u dul qaadashada waqtiga ee ay ii muujisay ka sokow, waxay ku darsatay fikrado wax ku ool ah oon soo ban dhigay. Sidoo kale waxaan ku qasbanahay in aan u mahad celiyo wiilashayda Cabdul-Fataax iyo Cabdul-Xaliim oo aan ka raalli gelinayo ka maqnaanshaha aan ka maqnaa xilliga aan buugan iyo kuwa kaleba qorayey.

**Mahada Kale**; Waxaan u hayaa **Prof. Shiikh; Xirsi Maxamed Hilowle** oo isagu ii fidiyey boga koowaad ee Website ka aan ku faafiyey buugaan iyo labaatameeyo buug oo kale. Intaa keliya ma ahane waxa uu Ustaad ku igu biiriyey fikrado iyo tabantaabooyin fara badan oo wax ku ool ah.

**Raalli gelin**: waxaan raali gelinayaa dhammaan dadweynaha Soomaaliyeed ee dhibsanaya ficilkan aan ku dhaqaaqay ee ah badelitaanka maahmaahooyinkii soo jireenka ahaa ee awoowayaasha laga soo gaaray. Waxan leeyahay "walaalayaal aniga ma ahan kan badelayaa ee waa xilliga".

***Hibo: Waxaan u hibeeyey Aabahay: Xirsi Duullaan jecel.***

# WAA MAXAY NASAKH MAXAANSE U DOORTAY KELMAD AHAAN?

Kelmadda Nasakh macnaheedu luuqad ahaan waa badelid iyo inta wax la masaxo wax kale badelkoodii laga muujiyo ama la dhigo. Hase ahaatee ma ahan kelmad luuqad ahaan si joogto ah loogu hadlo oo ka shaqaysa suuqyada iyo shekooyinka la isla dhex maro. Waxaa loo isticmaalaa oraah diineed la xiriirta macaamilka aayadaha iyo axaadiista diinta Islaamka. Sidaas darteed waa kelmad ku shaqaysa weji farsamo (*technical*) ee ma ahan kelmad caadi ah. Sidaa daraadeed marka loo qeexayo weji farsamo waxaa loo gartaa in ay u shaqayso macnaha iyo nuxurka aayadaha Qur'anka ah iyo Axaadiista oo la isku dhex badelayo, laakiin qormadeenaan waxan u isticmaalaynaa weji luuqad ahaaneed oo hadana ku salaysan isla wejiga ujeedada qormada oo ah in dhaqamo iyo xikmado duugoobay dib loo also ama dhayo. Taasina waa in la waafajiyo qarniyada iyo dhaqamada cusub si loo sii joogteeyo isticmaalkoodii guud ahaaneed iyaga oo hadana midabkii hore ka badelan oo weji casri ah leh.

Anaga oo Laakiin macanaheeda cilmi ahaan ama diini ahaan ka shidaal qaadanayna aan u ekaysiino qaybaha kala duwan ee aan qormadeenaan u kala saarayno nidaam u eg noocyada kala duwan ee uu u dhaco Nasakha ku dhaca Qur'anka iyo Axaadiista. Sidaa awgeed waxan u kala saarnay noocyada nasakh ee qormadeenaan sadex nooc oo kala ah:

1. Qormo la badelo lafteeda iyo ku dhaqankeeda ama isticmaalkeeda labadaba
2. Qormo la badelo ku dhaqankeeda laakiin lafteedii iska harto
3. Qormo la badelo lafteeda laakiin isticmaalkeedu soo haro. Waxaa kale oo laga yaabaa in ay wehliso qayb afraad oo iyadu ah Qormo ruxeeda iyo raqdeeda labada la waayey oo meeshaba laga tiro.

Haddaba anaga oo taas tixraacayna ayaan maahmaahooyinka u kala qaybinaynaa:

1. Qaar macnahooda oo qalad loo isticmaalayey la toosiyo oo la waafajiyo macanaha dhabta ahe uu nuxurkoodu leeyahay,
2. Qaar u baahan in badelkooda la keeno kuwa kale oo isla macna ahaana u dhaw kala dhigmana ah,
3. Qaar ay lama huraan tahay in gebi ahaanba meesha laga masaxo oo aan dib dambe loo maqal.

Sababaha aan u door isticmaalka kelmadda nasakh waxa ugu horeeya:

1. Waa kelmad toos u taabanaysa qasadka qoraalka oo ka tarjumaysaa macanaha dhabta ah een ula jeedno dib u habaynta iyo dib u qaramaynta maahmaahooyinka Soomaaliyeed.
2. Waa kelmad qira weyn oo uu Ilaahay ku isticmaalay Qur'ankiisa sidaa darteed ila qumanaatay in isticmaalkeeda lagu sii faafiyo wixii kale ee kheyr iyo wax wanajin loola jeedo.
3. *SHEEKHOW HADAAD GEF U DAREENTO ISTICMAALKA KELMADAN FADLAN IGU SOO BIIRI WIXII AAD DALIIL UGU HAYSO SI AAN DIB UGAGA FIIRSADO - MAHADSANID*.

## MAXAA IGU KALLIFAY QORAALKAN

Waan ka cudurdaaranayaa hadaan galay mawjad aan ahayn tii aan dabaalan jiray. Anigu kuma takhasusin cilmiga ku toosan in qormadaan oo kale laga sameeyo oo ah cilmiga luuqadaha iyo dhaqanka (*literature*). Laakiin ka dib markii aan mudo usugay bal in uu qofkii mawduuca lahaa aayadiisa qaato oo ku hagaajiyo tubta wanaagsan ayaan anigu isu xilqaamay hawsha aniga oo dareemaya in aysan iga fursanayn, maadaama uu mutakhasiskeedii gabay.

Inta aan qormadaan ku jiro waxaan iska dhawrayaa adeegsiga kelmadaha ka mid ah afafka qalaad sida kuwa Ingiriiska ama Laatinka kale ah. Hase ahaatee waxaan kelmadaha aan Af Soomaali qayaxan ku cabbiri waayo u isticmaalayaa Af

Carabi, maadaama uu yahay hooyadii Af Soomaaliga. Marka lagu eegayo cilmiga luuqadaha lama yiraado Af Soomaaliga iyo Af Carabigu waa isku bah oo keliya ee waxa la cadeeyaa in Af Soomaaligu yahay lahjad Carbeed oo fogatay sida dadkeeda. Sidaa awgeed ayuu dastuurkii Soomaaliyeed ee la dejiyey xilligii af Soomaaliga la qorayey qeexayaa in kelmadii laga waayo lahjadaha Soomaalida oo dhan loo raacayo Af Carabiga oo toos loo adeegsanayo.

Si kastaba arintu ha ahaatee waa anigaa maanta u bareeray inaan wax badan ka badelo maahmaahooyinkii Soomaalida. Haddaba maxay tahay sababta igu kalliftay arintan? Haddaan midaas sababeeyo waxay tahay sidatan:

1. In tan iyo dhamaadkii qarnigii la soo dhaafay ay dunidu ahayd mid xawli culus iku badbadelaysa oo ka guuraysa dhaqamadii jiray una raraysa dadka dhaqamo iyo caadooyin hor leh. Ha ahaadeen kuwa saxsan ama kuwa qaldane is badelka caado dhaqameedyadaas iyo hab nololeedkaasi waxay ubaahan yihiin xikmado iyo is af- garad ku munaasib ah oo loo isticmaalo.
2. Xikmado ka tarjumaya hab dhaqan-dhaqaaleedka iyo qalabyada ay dadku markaa adeegsadaan ayaa u baahan in loo isticmaalo hadba meesha ku toosan. Tusaale halka lagu safri jiray Faras maanta waxaa lagu safrayaa diyaaradaha Jet ka. Sidii loo safri jiray looma safro, sidii loo socon jiray looma socdo, sidii loo hadli jiray looma hadlo, sidii wax loo qiimayn jiray looma qiimeeyo. Sidoo kale wixii wanaag loo arki jiray maanta looma arko ee badawnimaa loo arkaa. Taa macnaheedu maahan in la xumaaday oo laga leexday dariiqii toosanaa, mana ahan in hada uun la wanaagsanaaday oo markii hore la habowsanaa. Laakiin dhab ahaantii xiliyadii horena waxna waa lagu saxsanaa waxna waa lagu qaldanaa. Sidaa si la mid ahna maanta waxna waa lagu saxsan yahay oo waa laga wanagsanaaday sidii hore waxna waa lagu xumaaday oo waa loo darsaday sidii hore. Haddaba waxaa lagama maarmaan ah in la helo xikmado iyo asluub waang lagula dhaqmo nolosha casriga ah, tiiyoo aan marnaba qalad lagu raacayn noloshii horena eed laga gelaynin. Tusaale ahaan bal intaad dhegaysato u kala gar qaad wiilka iyo

gabadha ku doodaya heesta ku caanka ahayd hoboladii dalka waayadii beri samaadkii oo ay eraydeeda ka midka ahaayeen:

Ninka: "Beri hore waxaa jiray Inan aad bil iyo labo baadi arag ku weydoo…., waxa badelay kuwii hore balo casarkii baxaysoo …. Waxa jiray beri hore Inan laga bixiyo boqol geela iyo boqon yaraha ari Buntuqana la raacshaa. … Waxa badelay kuwii hore balo aan…. Naa bi'ise dhaqankii sharcigii ka beydhoo, diintii burburisee Allow maad is bar qabataan?

Gabadha: "Boqolka geelaa iyo boqon yaraha ari diinteenu may farine.. Badwyohow dib ha u celin dadka soo baraarugay".

Dadkeen aqoontooda diiniga ah iyo tooda dunidu labaduba aad bay u liiteen wixii ka horeeyey dhamaadkii qarnigii labaatanaad ee hada naga tagey. Laakiin maanta (waa Allah mahadiiye) sidii waa la yara dhaamaa oo in badan baa heshay faham saxiix ah. Sidaa darteed waxaa loo hadli jiray afkaa furan laakiin maanta waa in la is dhawraa.

3. Berigii hore dadkeena noloshoodu waxay ku koobnayd aqal raaro/reeryo ka samaysan, dhawr neef oo xoolo ah, dhaan bishiiba mar biyo lagu keeno iyo colaad loo toog hayo. Laakiin maanta qoyska waxa ku furan boqolaal hawlo ah oo dhan walba nolosha uga hareeraysan. Sidaa darteed waxay dunidani u baahan tahay wejiyo cusub oo lagula dhaqmo dhan walba oo laga eego.
4. Berigii hore jifada Soomaaliyeed lama macaamili jirin wax ka fog jifada la deriska ah ee ku qoqoban oo col iyo nabadi kala dhexeeyaan. Sidaa awgeed waxaa loo hadli jiray oo xikmadaha lagu salayn jiray heer gobol, laakiin maanta heer caalami.
5. Ka dib markii aan diirad ku baaray waxaa ii soo baxday in inta badan maahmaahooyinka Soomaaliyeed ubaahan yihin dib u habayn iyo dib u qaramayn. Qaar baa ka soo hor jeeda rumaysadka diinta Islaamka, qaar baa dambi keena, qaar baa dulmi iyo gardarrooyin ku salaysan, qaar baa jaahilnimo iyo badawnimo ku qotoma, qaar baa cilmi qalad loo fahmay sawiraya, qaar baan loo dhihin si ka fiirsi iyo taxadar leh. Taasina waa mid

horeba looga maahmaahay markii la yiri: "hadal aan fiirsi loo oran iyo caano aan fiiqsi loo dhamin labaduba feerahay wax yeelaan".

6. Inkastoo horey loogu maahmaahay: " Soomaali been waa sheegtaa laakiin been ma maahmaahdo", hadana akhristow, iga qor maanta, hadalkaasi meel mar noqon waa. Waxaad ku garan doontaa markaad akhriso oo dhab iyo cadaalad ugu fiirsato inta maahmaah aan ciribta ku dhuftay adoo dhankaan wax ka eegayo inaad adna igala eegto isku deyaya.
7. Dunida aan maanta la saanqaadayno oo rabno in aan wax la qaybsano waxay kuwada tartamaysaa sidii ay qolo walba luuqadooda iyo dhaqankooda uga dhigi lahayd mid ka kobocsan kuwa kale isla markaana ka casrisan oo kala qabsan og isbadelka aadanaha ee socda. Sidaa darteed waxay ku sameeyaan dib u habayn iyo horumarin is daba joog ah. Markaas ayey ku dadaalaan inay ku soo jiitaan umado kale si ay u bartaan ilaa heer jaamacado dalal qalaad laga dhigo iyo ilaa heer laga dhigo luuqad caalami ah oo ay ku hadasho Qaramada Midoobay.
8. Ayaan darro anaga dadkeenu maanta heer ay luuqad ka hadlaan ma joogaan ee iyagii ayaa sida uubatada isu cunaya oo bar baa sanado gudahood ku dhamaaday.
9. Sababahaas iyo kuwa kale oo aanan halkaan ku soo koobi karin ayaa igu kallifay inaan diyaariyo buugan aan ku badelayo qaar ka mid ah maahmaahooyinka Soomalaiyeed, si ay u yaraato ruux intuu dami galo ama gef ku hadlo hadana qiil uga raadsada maahmaah ama xikmad iyaduba qaldan. Taasina dhab ahaantii waa qayb ka mid ah matoorada dhaqaajiya fidnooyinka iyo falfal xumooyinka aan caadaysanay.

## HADAL MURTIYEED

Waxaa kale oo jira erayo iyaguna si caam ah loo faafiyo oo marna u qorma si jumlo – weerayn ah marna u qorma qaab maahmaaheed, iyaga oo mar

kalena u qorma sida Oraahda. Erayadaan ama hadaladaan waxaa ka mid ah: "Dhurwaa baa lagu yiri kabo ha laguu tolo suuye haddii la iitolana Alxamdu lillaahi hadaan la ii tolina Rabbilcaalamiin", Dhurwaa baa yiri: "Xoolo naageed hadaan xoolaha ka aqaan ma cuneen", Dawaco ayaa tiri:"Wallee reer aan ogahay ma guuro", Dawaco ayaa tiri: Dheesha lug baan kula jiraa, haday fiicnaatana lugta kalaan la soo galayaa haday xumaatan tan iigu jirtaan kala baxayaa" iwm.
Haddaab erayada noocaan ah oo loo yaqaan halku dheg waxay si ahaan ula macno noqon karaan kelmadaha caruurta hadalka lagu qabadsiiyo ama lagu karsiiyo ee loo yaqaan "Carrab jalqin". Laakiin marka dhan kale laga eego waxay noqon karaan kuwo tusinaya waxun duruus iyo cibro ah oo loo isticmaali karo masala ahaan (parable). Nidaamkani waxa uu dhanka kale ka shabahayaa qaabka uu u waramo kitaabka muqadaaska u ah Masiixiyiinta e eloo yaqaan Baybalka oo isagu ku dheereeya isticmaalka (Parable).

Hadalada xikmadaysan ee Soomaalida waxaa loo kala ula duwaa qaababka kala ah: maahmaah, murti, madadaalo, maaweelo, sheeko xariir, carrab jalqin, caraatan, kaftan ama koofaar. Waxaase iyaguna kuwaas garab socda sida badana kaba madax sareeya xikamadaha lagu qeexo qaabka maanso sida gabayada, heesaha, dhaantada, jaanta, guurowga, geeraarka, buraanburka, cayaaraha batarka, IWM.

## MEEQAANKA MAAHMAAYADA

Hadduusan qofka Soomaaliga ihi wax uu ku maahmaaho aqoonin ama ugu yaraan cabbiri karin kuma dhaco in uu fagaaraha dadku ku sheekaystaan yimaado, hadduu yimaadana ka sheekeeyo. Wiilka haasaawaha (shukaansiga) isku deyayaa, xataa haduu yahay ciyaal zio- macna ma leh, waa in uu sahay u sii qaataa ugu yaraan dhawr maahmaaho oo uu horay usii diyaarsaday, haddii kale

waxa uu dareemayaa in uusan waajibaadkiisii shukaansi ka soo bixin. Dhanka kale gabadhu waa in ay sii baratаa dhawr maahmaaho oo la isaga radiyo ama lagu ansaxiyo xikmadaha uu ninka la hasaawayaa soo gemaayo. Haddaysan intaa awoodin oo shukaansigu kedis ku qabsado waxay ku ekaysanaysaa in ay qalka iyi labada daan is gashato oo iyada oo madax hoos u raaricinaysa wax walba ku jawaabto "waa yahay - hawraarsan". Laakiin kol dambe oo la isla aqal galay ayey dib u soo goconaysaa oo eed sheegad ahaan u leedahay anigu hadal ma aqoon markaa ayaad anoon ku rabin hadal badni iyo af tahanimo igu marsiisay iigana keensatay aqbal.

Waxaa intaa ka sii weyn in aysan sinaba suurta gal ku ahayn in uu nin weyni garqaado isaga oo ana cutubyo maahmaahooyin ah keyd ahaan u haysan. Waa in uu fikrad iyo hadal kasta raaciyaa waxaa la yiri:"….", waxaa dhacday: "…., iyo waxaa jiri jiray: "….".

Kol haday maahmaahdu martabadaas ka taagan tahay Soomaalida waxa la dareemi karaa raadka weyn ee ay kun leedahay, waxayna u egtahay in uusan raadkaasi fudeyd ku suuli karin si kasta oo loo magaaloobo. Haddaba miyeynan habooneyn in hab nololeedka cusub ee dadka loogu diyaariyo hab dhaqameed waafaqsan garaadkooda, fahamkooda, nolol maalmeedkooda, dantooda, duruuftooda, iyo diintooda.

Taas ka sokow, maahmaahdu waxay u ekaatay qodobo la cuskado marka la doodayo, marka wax la iska dhaadhicinayo, marka wax la xujaysanayo, IWM. Haddaba miyeynan waajib ahayn in iyada qudheeda la saxo oo lagu toosiyo tubta wanaagsan si aysan u cirbin diinta, dhaqandhaqaaleedka cusub, reer magaalnimada, IWM. Tani wa amid haboon waayo waxay kala badbaadinaysaa isla markaana wada shaqayn iyo is waafaq u keenaysaa dhaqanka iyo diinta, xaga kalena dhaqanka iyo nolosha casriga ah.

Waxaa qaldan in maahmaahda loo fahmo wax muqadas ah oo aan la taaban karin. Maahmaah waa caqliyo ay aruuriyeen jiilalkii naga horeeyey waxayna ku saleeyeen dabeecadii nololeed ee xilligoodii jirtay. Sidaa darteed waawax loo

baahan yahay in ana inaguna habaysano mar kasta oo ay nolosheenu is badesho waayo waxa ala rabaa in ay maahmaahdu la socoto xilligeeda iyo xawaareheeda.

## QAABKA QORAALKAAN

Qormadeenaan waxan uga hadli doonaa mid kasta oo ka mid ah noocyada war isgaarsiineed ee aan soo xusnay. Waxa kaliya ee aan qormadeenana ku xusaynaa noocyada maahmaaho ee u baahan in la badelo sababo la xiriira; waqtiga oo ay la qabsan waayeen awgeed, diinta oo ay ka soo horjeesteen awgeed, ilbaxnimada wanaagsan oo ay la qabsan waayeen awgeed, duruufaha jira oo ay la qabsna waayeen awgeed, iwm. Laakiin kuwii toosan ee aan intaaba ka hor imaanaynin waxba nagama saarna in aan qormadan ku soo qaadano ee sidooda ayey ku saxsan yihiin oo aan u dhaafaynaa. Nidaamka ay qormadu ku socoto waxan ka dhigaynaa sida soo socota:

Waxan marka hore qoraynaa ama akhrinaynaa Maahmaahdii Soomaaliyeed ee caadiga ahayd oo lagu calaamadeeyey xarfaha Alifbeetada oo wata lambaro si taxane. Ka dib waxan ku xijinaynaa Maahmaahda cusub ee lagu badelay oo ay dhinacyada uga jiraan laba kolmood sida gaashaan waardiyeynaya, isla markaana ku qoran xarfo la nuuriyey (**bold**). Intaa ka dib waxaa taxan sababihii loo nasakhay oo qodobaysan hadba intay gaaraan.

Waxan u kala dejin doonaa qaab ku dhisan xarfaha Alifbeetada. Nooca Alif beetada aan isticmaalaynaa waa mida Af Soomaaliga, maadaam aan isaga wax ku qorayno. Xarfaha Alif-beetada ee Af Soomaaliga waxay u kala baxaan Shibane iyo Shaqal. Shibana waa xarafka (B) ilaa iyo xarafka (Y), halka uu shaqalku yahay xarafka (A) ilaa xarafka (U). Taas awgeed waxaa gadaal xarafka (Y) inooga raaci doona xarfaha Shaqalada oo ka bilaabanaya (A).

Waxaa iyaguna qoraalka ku badan maahmaahooyinka aan ku taliyey ama u gacan qaaday in gebi ahaanba laga tir tiro qaamuuska xikmadaha iyo maahmaahooyinka Soomaaliyeed, cillado la xiriira fasahaad iyo macna la’aan

awgood. Kuwaas waxaa lagu garan karaa in ay hoosta ka xariiqan yihiin, mid kale oo lagu nasakhayna aanay ku hor qornayn.

***Waxaa Allifay, isku dubada riday, soona ban dhigay; Dr. Qaasim Xirsi Faarax, email; qasimhersi@yahoo.com***

# INTA KU SOO ARUURTAY XARAFKA (B)

**B1**. "Bahal ceeriin ma daayo, nina caadadii ma daayo". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Eey cad balaq ah ma daayo cilmi laawana caadadii ma daayo**". Sababta loo nasakhay wax kale ma ahan ee waa:

1. Marka aan dhahno ninna caadadii kama tago waxay u ekaanaysaa in la dhiiri gelinayo in qof walba uu caadadii ugu horaysay noloshiisa isku dhankixiyo oo ka goi waayo xataa haday si kaste u qaldan tahay. Taasina ay keento in uu qof dhaqan wanaagsan, awaamir diineed, ilbaxnimo casri ah oo suuban, horumar dhaqan dhaqaale, iwm u diido si uu u xifdisto caadadiisa oo laga yaabo inay qallafsan tahay ama gefsan tahay.
2. Marka aan qorno ninna waxay u ekaanaysaa in aan dadka dunida jira ka soo qaadnay rag oo keliya oo aan dumarka ka dhignay wax aan xusid mudnayn.
3. Kelmadda Bahal waxay u muuqataa in uu soo gabaabsi noqonayo isticmaalkeedu oo waxay ahayd mid ku soconaysa baadiyaha oo si wanaagsan Bahal iyo waxa uu yahay looga yaqaan. Laakiin xayawaanka magaalada laga isticmaalo ee hadana u qalma in maahmaahdaan lagu masliyo waa Eey.
4. Teeda kale maahmaahdu waxay ku jirtaa xerada falfalxumooyinka, Eeyna ceeriin iyo biseyl wax loo tuuray ma kala door bido ee waa kii usoo horma, halka ay Mukulaasha oo rabaayadnimada la wadaagta ka dhawrsato waxa aan si wanaagsan loo soo bisleyn ama loo nidaamin.
5. Si jaahilnimada loo dhaleeceeyo aqoontana loo dhiiri geliyo qormada dambe ee maahmaahda waxay tusinaysaa in jaahilkii lala garab dhigay Eey.
6. Qaabka dambe ee aan u qormaynay waa mid lagu qiimaynayo qofk aqoonta leh isla markaan alagu bahdalaynayo qofka aan aqoonta lahayn taasina waxay ka qayb qaadanaysaa Ol-olaha la dagaallanka jahliga.

**B2**. "Ballan badane waa been badane". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Ballan badani been bay leedahay**". Sababtuna waa:

1. Marka laga eego xagga qormada ama oraahda waxaa la garan karaa in maahmaahdaan lagu dejiyey si xanaaq ku salaysan. Taasina waxay meesha ka saaraysaa in uu jiro qof ballan badan oo hadana beenta iska dhawra isaga oo ballamadiisa iyo qorsheyaalkiisa kala nidaamsanaya. Halkaana waxay maahmaahdu ka noqonaysaa mid iyada qudheedu been sheegta oo laga yaabo inay qof wanaagsan eed uusan lahayn u xambaariso. Haddaba si loo asluubeeyo waxay ku haboon tahay in loo qaabeeyo: "**Ballan badani been bay leedahay**".

**B3**. "Baruur keliyahaa baruuro qurmisa". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Moos keliyahaa gacan moosa qurmiya"**. Sababtuna waa:

1. Baruur dunidaan casriga ah lagama cuno xataa baadiyaha way ka qiimo beeshay.
2. Baruur maadaama isticmaalkeedu yar yahay fahamkeeduna waa yar yahay
3. Maadaama ay dadkeenu maanta u sii badanayaan reer belad iyo beeraley, mooskuna uu ka mid yahay cuntadooda maalin laha ah iyo weliba quudka uu dalkeenu ku caanka yahay, waxa ay maahmaahdaas ku fahmi karaan ee u sahlani waa Moos.
4. Moosku haduu ku dhacaamo raxan ama gacan moos ah waxa uu sababaa in ay kooxdaas mooska ah oo dhami tuuris noqoto illeen way isku dhiintaye.
5. Sidaa awgeed waa in aan la soconaa dunida cusub ee ceebta iyo cunta xumaanta laga dhigay baruurtii aan qiimaha sare siin jirnay isla markaana qiimaynaa dalaga dalkeena een dibada u dhoofino.
6. Sidaa awgeed waa in aan maahmaahdana u badelnaa sida ah; ""**Moos keliyahaa gacan moosa qurmiya".**

**B4**. "Been fakatay runi ma gaarto". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Been fakatay run timaaday hakad gelisaa**". Sababtuna waa:

1. Hadaanu qorno "been fakatay runi ma gaarto" waxay noqonaysaa in been kaste oo la faafiyo aan laga daba hadlin iyada oo la cuskanayo daliisha ah in aan la gaari karin oo la soo sixi karin. Taasina waxay ka hor imaanaysa man-hajka rabbaaniga ah ee ku dhisan in waxa xun la reebo waxa wanaagsana la faro.
2. Waxay dhiiri gelinaysaa in beenta dhaqso loo faafiyo si aan looga daba tagin, iyada oo la is leeyahay mar haduu hadalku suuqa galo waa la wada qaadanayaa sax iyo qalad kuu ahaadaba.
3. Hase ahaatee, sidaan dambe ee aan u qormaynay waxay tusinaysaa in ay suurta gal tahay in ay beentii fakatay caqabad weyn ku noqoto marka ay runtu ka daba timaado, laakiin haddii runta lagu sii soofeeyo ay beentu masaxmayso daaqanadan ka baxayso iyada oo ceebaysan. Macanahaas oo kalena waxaa sheegaysa maahmaah kale oo oranaysa: "**Beentaada hore runtaada dambay u daran tahay**".
4. Qormadeena cusubi waxay ayidaysaa maahmaahda ama oraahda kale ee oranaysa: "**Beeni raad ma leh**". Sidaa darteed waxay daliil ka haysataa waaqica, maahmaahooyinka Soomaaliyeed ee kale, diinta, asluubta wanaagsan, sharciga Islaamka iyo Qaanuunka dad sameega ah intaba. Dhanka kalena mida aanu nasakhnay waxay ahayd mid ka hor imaanaysa maahmaahda ah: **"Beeni raad ma leh**".
5. Sidaa awgeed waxan garanay inaan maahmaahdaan u qormayno; "**Been fakatay run timaaday hakad gelisaa".**

B5. "Been sheeg oo been run u eg sheeg". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Runta sheeg dacarba ha ka qaraaraatee**". Sababtuna waa:

1. Haddii maahmaahdaan loo daayo sida loo yiri waxay noqonaysaa dambi, caasinimo, akhlaaq xumo, dadnimo xumo, iyo xumaan fidin.
2. Waxaa daliil been sheegid ka helaya dadka dulliga ah oo dhan, weliba waxay dhiiri gelinaysaa kuwa wanaagooda iyo xumahoodu dhexdhexaadka yahay.

3. Oraah kasta oo dhahaysa "Been sheeg" waa mid gef iyo baadil ah, sidaa awgeed waxaa haboon in la qormeeyo mid kale oo dhiiri gelinaysa ka soo horjeedka beenta oo ah run sheegnimo. Haddaba waxaan ku badeli karnaa: **"Runta sheeg dacarba ha ka qaraaraatee**".

B6. "Beer la wada leeyahay kan ugu tabarta badan bay ku hartaa". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Beer kii tacab bilaabaa iska leh**". Sababtuna waa:

1. Berigii hore ee qaraabsiga oo qofba qofka uu ka xoog badan yahay gumaysan jiray ama la isu baadi jiray sida loo kala xooga weyn yahay ayey maahmaahdani soo baxday. Laakiin maanta uma eka mid shaqaynaysa (inkasta oo ay si ku meel gaar iyo gef ah ayaamahan uga shaqaynayso Soomaaliya, hadana waa wax aan sii socon doonin). Maanta dunida waxaa ka jira meel kaste nidaam iyo kala dambayn (caddaalad daro waa meesheedee). Sidaa awgeed maahmaahdan waqtigeedii wuu dhamaaday.
2. Waa ceeb iyo fadiixo in qarnigaan 21 aad maahmaah noocan ah laga maqlo meel dunida ka mid ah oo walax bartood oo ilbaxnimo ah sheeganaysa, maadaama ay ka tarjumayso casrigii cawaanimada iyo jaahiliyada.
3. Waa dulmi iyo gef la dhiiri gelinayo haddii maahmaahda intaas oo dambi iyo xumaan ah la sii sheego, sidaa awgeed waxa la soo gaaray waqtigii lagu badeli lahaa mid kale oo kheyr iyo samo dadka ku hagta.
4. Maahmaahda cusub ee la hirgelinayo waxay si toos ah u waafaqsan tahay Xadiiska Nebiga (Nabad gelyo iyo Naxariis Korkiisa ha ahaatee – hadda ka dib NNKHA) ee uu ku yiri: **"Dhulka waxaa iska leh qofkii nooleystay**", (*Al-Ardu liman axyaahaa*). Taas oo macneheedu yahay; qofka iska qardaystay dhul hawd – juq ah, deedna beer ka fashay ama daar nafciyeed kale ka dhistay sida; guri, biya-xireen, berkad, IWM.
5. Mas'aladan oo ah mid aad u xasaasi ah siiba xilligaan oo ah mid loo wada heellan yahay beera qodashada, waxan nasakheeda ku eegaynaa dhanka sharciga. Sidaa awgeed haddaan dhihi lahayn: B. "beer kii tacbadaa iska leh",

waxay noqon lahayd in la banaynayo in dad beertood inta laga xoogo tacab laga gaarsiiyo deedna lagu doodo anaa tacbaday. Sidaa darteed waan ka feejignaaday qormada noocaas ah mana haboona in sidaa loo fasirto maadaama uu qoraalku isu dhaw yahay. T. haddaan u qori lahayn: "beer kii geed qaadaa iska leh", iyaduna waxay keeni lahayd isku dhac kale oo ah in qof walba intuu dhul kaymo qurux badani ku yaallaan yimaado dhirta ka xaalufiyo deedna sida uu kor uga waardiyeysanayo hadhow ku qabsada qofkii isku daya in uu dhulkaas wax ka samaysto, iyada oo ay ujeedadiisu tahay nidaamka boob ee beryahan laga wado dalkeena oo halku dhega looga dhigtay: "**ku qabso ku qadi mayside"**. Waxba yaanu ku dheeraan qodobkaas oo waxaa jira qodobo Shariicad Islaamka ah oo kala xukmiya: qofka dhul beereedka asal ahaan u leh iyo kan beerta dhulka, kan iska lahaa mira beereed ka iyo kan iska lahaa neefka daaqay, kuwa beeraha ama abuurkood ku shirkooba, iwm.

B7. "Beeso la tiriyey barako ma leh". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Ka taxadar kumiga Shilinku isagaa iska taxadarayee**". Sababtuna waa:

1. Tan la nasakhay waxay dhiiri gelinaysaa daryeel la'aanta ay dadka Soomaaliyeed lacagta oo isticmaalkeedu ku cusub yahay ku hayaan, taas oo salka ku haysa xoola mubadarnimo.
2. Dunida maanta waxay ku socotaa shilinba shilin gaarsii ee kama shaqayso in kurjad lacag ah miiska la iska saaro oo duuduub lagu qaato.
3. Waxa ugu weyne uu dhaqaalaha Soomaalidu u kocbi la'yahay waa in aysan qiimeyn lacagta teeda tirada yar oo ay weligood u hanqal taagayaan kiishad lacag ah oo ay dhaqso gacanta ku dhigaan. Taasina wa atan ku sababtay inay ku mashquulaan boob iyo dhac illeen kiish lacag ah shaqo caadi ah laguma heli karee.
4. Waxay maahmaahdii hore ku salaysan tahay nidaamka ma shaqaystenimada, lacag jacaylka, xoolo xaqirida, IWM.

5. Waxay kale oo ku fir leedahay dhaqanka dadka isticmaala mukhaadaraadka sida Qaadka, IWM. Oo iyagu kumanaan lacag ah saacado ku dhameeya. Ceebahaas aan xusnay awgood sow kuuma muuqato inay haboon tahay in maanta la nasakho maahmaahdaas oo lagu badelo mid ku lid ah.
6. Midda nasakhday waxay dhiiri gelinaysaa xisaabtan iyo xoolo tacbasho ku salaysan dhaqan dhaqaaleedka maanta dunida ka jira.

B8. "Balaayo ama guur ama guurso bay ku tiraahdaa". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Guuritaan iyo Guursi aan Allah lala talo saaran waa talo balaayo**". Sababtuna waa:

1. Haddaan maahmaahdaan sideeda ku dayno waxay himad jebinaysaa oo dareen baqdin gelinaysaa qofkii damacsanaa in uu raadsho guur xalaal ah iyo kii doonayey in uu dal doorsado oo u guuro meel noloshiisa ku haboon. Taasina waxay keeni kartaa in la xaaraantimeeyo wax Ilaahay xalaaleeyey.
2. Waa run oo guuritaanka iyo guursiga labaduba waa dhib iyo mushkilad marka lagu fiiriyo diirada dhaqan Soomaaliga ah, laakiin waxaa haboon in la is weydiiyo ma ficilka guuritaanka ama guursiga ayaan qaldan mise dhaqanka ay ku aroorayaan baa qaldan?. Waxay iigu muuqataa in qaladku ka imaanayo dhaqanka. (waxaa xusid mudan in aan qof ahaan Qoraa ahaan labada mas'alaba caawa la cawaynayo ooy igu hayaan dhib aan weligii isagoo kale isoo marin). Laakiin hadana waxaan dareemayaa in falka guuritaan ama guursi uusan dhib wadin ee dhaqanka lagu wadaa soo hoynayo balaayo maqnayd). Sidaa darteed ma haboona in falka xalaasha ah ee guuritaan iyo guursi la eedeeyo, waxaase haboon in la eedeeyo dhaqanka foosha xun iyo dulimga.
3. Waxay diintu ina faraysaa in markaan doonayno in aan arin sida guur ama guuritaan ku dhaqaaqnaba aan Allaha awooda sare leh la tashano inaga oo tukanayna Salaatul istikhaara. Sidaa awgeed waa in aan qabatinaa Allah talo saarashada marka ficilada loola jeedo Allaha daraadiis. Sidaa awgeed maanta

ka dib waxan isticmaalaynaa maahmaahda dambe ee aan ansixinay ee ah; "**Guuritaan iyo Guursi aan Allah lala talo saaran waa talo balaayo"**.

B9. "Biddana soor baa deeqda bilisna xurmaa deeqda". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: "**Xoolana xaab baa deeqa dadna xurmaa deeqda"**. Sababtuna waa:

1. Isticmaalka kelmadda Bidde waa gef iyo af lagaado loola jeedo qaaruun bulshada ka mid ah oo laga yaabo inay ka sharaf ama xurmo badan yihiin kuwa ku caaya biddenimo. Waxaa laga isticmaalaa gobolada Puntland waxaana loola jeedaa magaca dad la yasayo oo dhinacyo kalena looga yaqaano "Boon ama Midgaan". Ka soo horjeedak kelmadaas oo ah Bilis iyana waxaa loola jeedaa dadka sharfan ee xorta ah, dhinacyo kalena waxaa laga dhahaa " Aji".
2. Kelmadahaan waxay hadda u muuqdaan kuwa qarsoomi raba oo ku haraya casru jaahiligii aan soo dhaafnay, sidaa darteed maahmaahooyinkii laga dejiyey xilligoodiina waa inay la haraan oo la illobo.
3. Xataa hadaan siday rabaan u raacno dadka ay Bidde ku caayayaan ma ahan dad sida xayawaankii wax u cuna oo had iyo goor soor u taagan. Balse waa dad laga yaabo inay ka xurmo iyo xishood jecel yihiin kuwa caaya. Sidaa darteed xataa xilligeedii maahmaahdani way qaldanayd ee waxay ku shaqaynaysay si xoogsi iyo almurqaati ah
4. Si loogu digo qofka hamigiisa oo dhami soor iyo cunto raadis ku xiran yahay waxaa ila haboonaatay in aan xayawaan ku matalno qofka noocaas u dhaqma. Sidaa awgeed qormada maahmaahdu ay noqoto: "**Xoolana xaab baa deeqa dadna xurmaa deeqda"**. Sidaa marka aan u maahmaahno waxan ku gulaysanaynaa in aanan dad oo dhan kala saarin kuwa dhaqan xumada iyo hunguri xumada ku aqdaantana ku ceebayno ilaa aan xoolo ku masalno.

B10. "Bisinba nin xoog lahaa bi'iyey". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Nin xoog lehba Bisin baa xiray"**. Sababtuna waa:

1. Marka la isticmaalayo kelmadda Bisin waxaa loola jeedaa Sharciga Ilaahay. Hadalka maahmaahduna waxa uu u dhacayaa in kii xooga lahaa uu laad ku dhufan karo sharicgii Ilaahay oo aan xukunku qaban karin. Sidaa darteed waa ka noqosho.
2. Haddaan sideeda u dayno waxay noqonaysaa gef Allah laga galo oo waxan hoos u dhigaynaa awooda Bisinka taasina waxay u fasirmaysaa in awoodda Allaha sare la hoos dhigo awood uu sheeganayo ruux aadane ihi. Sidaa darteed hadalku waa gef in laga tawbad keneo la rabo.
3. Xoogu waxa uu shaqayn jiray waagii qawlaysatenimada iyo qaraabsiga ku dhisnaa maahmaahda aan iyadana nasakheeda usoo socono ee ah "Nin**kii xoog lahay xaajo u toostaa"**. Laakiin maanta nina sharciga kama weyna.
4. Si aan u waafaqno xaqiiqada dunida jirta iyo Sharciga Ilaahay waxa haboon in aan maahmaahdaan kala wareejino oo ka dhigno: "**Nin xoog lehba Bisinbaa xiray**" oo macneheedu noqonayo kii ku faanayey anigu xoogaygaan wax ku qaadayaa waxaa loogaga adkaanayaa in Sharciga loo bandhigo oo lagu xiro.

## INTA KU SOO AROORTAY XARAFKA (T)

T1. "Taladii xumaata iyo gudniinkii xumaada dib baa loogu noqdaa". Haamhaahdaan waxa alagu nasakhay: "**Taladii xumaata tab looga kabtaa la doonaa**". Sababtu waa:

1. Haday talo kaa xumaato wax dib loogu noqdo oo lagu soo celin karo wey adag tahay sida caadiga ah, laakiin waxaa sahlan in dib looga tabaabushaysto oo laga feejignaado kol dambe iyada oo tii hore cashar laga dhiganayo. Sidoo

kale waxaa suurta gal ah in la raadsho tabo farsamo oo wixii taladaas ku xumaaday loogu jeedin karo dariiq kale oo dib u saxa. Sidaa darteed lama oran karo markay talo xumaato ayaa dib loogu noqon si loo saxo.

2. Haddii sideeda loo daayo waxay maahmaahdani ka hor imaanaysaa oo mucaaradaysaa maahmaahda kale ee oranaysa: "**Talo waa mar aad garan weyday iyo mar aad gaari weyday**". Mana doonayno in ay maahmaahooyinka Soomaaliyeed is buriyaan oo abuuraan fawdo xikmadeed.
3. Qaybta dambe ee maahmaahda oo ah ". . . **Gudniin xumaada dib baa loogu noqdaa**" waxaan ku badelaynaa in ay ku salaysan tahay fal samayntiisu sii dhamaanayo oo ay adag tahay in uu dib usoo noqdo. Falkaasi waxa uu murtida uga muuqdaa in uu yahay qodbidda gabdhaha la qodbo oo ah gudniin fircooni (*Female Genital Mutilation* – FGM) laga soo waantoomayo beryahan. Sida adarteed in maahmaahyada arintan ka hadlaysaa ay sii shaqaysaa wax xikmad iyo macno ah soo kordhin mayso. Sidaa awgeed waxaa haboon in qaybtan gudniinka ka hadlaysa gebi ahaanba laga reebo maahmaahda maadaam aysan wax weyn usoo kordhinayn.
4. Sida aan hada u qormaynay maahmaahda waxay ayidaysaa caqliga saliimka ah, waaqica, danta, caqiidada, iyo guud ahaanba cilmiga nafsaaniga ah.
5. Sida aan iminka u romaynay waxay ayidaysaa ama garab buuxinaysa amaahmaahda kale ee ah "**Caano daatay dabadoodaa la qabtaa**" oo tusinaysa mar haday wax qaldamaan ama dhibaato dhacdo wax keliya ee la raadiyaa waa sidii lagu xallin lahaa mushkilada, laakiin wax farsamo ahaan dib loogu noqonayo nama tusayaan tijaabooyinka adduunku.

T2. "Talo dumar taag darro ayey u dhacdaa". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: "**Talo doqon taag darro ayey u dhacdaa**". Sababtuna waa:

1. Way beenowday inay dumarku ka tabar liitaan ragga gaar ahan markay joogto xaga talada. Taladii ugu muhiimsanayd ee ay Muslimiintu ku badbaadeen waxa keenatay qof dumar ah. Safiya (hooyadii Mu'miniinta) ayey ahayd oo kula talisay in uu Nebigu NNKHA bilaabo madax xiirasho si ay

asxaabtii oo ka amar diidaysay ugu daydaan oo u aqbalaan go'aanadii ka soo baxay heshiiskii Xudeybiya oo ahaa kii ugu horeeyey ee ay Musliminta iyo Gaaladu kala saxiixdaan. Bal dib u eeg wax qabadka siyaasadeed ee dumarka maanta iyagana.

2. Waxay maahmaahdani dhiiri gelinaysaa gardarro lagu sii joogteeyo dumarka iyada oo loola dagaalamayo qaab cilmi nafsi ahaan ah. Sidaa darteed Maahmaahdu waana been abuur waana gardarro iyo af lagaado.
3. Laakiin marka aan erayga doqon adeegsanay waxan jamcinay nooc kasta oo doqon ah, waxanan ka dhawrsanay in aan cid gaar ah wax u dhino.
4. Adeegsiga erayga doqon waxa uu dhiiri gelinayaa qof kasta oo jira ama fariid ha isu arko ama doqon ha isu arkee, waayo qof kasta waxa uu rabaa in uu ka feejignaado inay wax tarkiisa soo gasho calaamad doqonimo.
5. Maahmaahda cusubi waa mid runteeda la taaban karo oo ka dheer hadal qabsi iyo mala awaal.
6. Sidaa darteed kelmadii jinsi takoorka ahayd ee "Dumar" waxan ka dhignay mid taabanaysa ruuxa doqonimo lagu sugo jinsiguu ahaadaba, maahmaahdiina waxan u qormaynay; "**Talo doqon taag darro ayey u dhacdaa**".

T3. "Tabar ninkii leh baa talo la weydiiyaa". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Tijaabo ninkii soo maraa talo la weydiiyaa**", waayo:

J. Tabar ninkii leh baa talo la weydiistaa. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Aqoon iyo khibrad qofkii leh ba aTalo la weydiistaa**", waayo:

1. Waxay salk ku haysaa waayadii kaa xoog roonida ee qof waliba qofkuu ka xoog badan yahay uu cuni jiray sidoo kalena qoysba qoyskuu ka xoog badan yahay ama qolaba qolada kale,
2. Waxay ka tarjumaysaa in qofka xooga lihi uu awoodiisa oo gardaradiisa ku hawlgalaysa wax ku kala goyn karo,

3. Haddii tabarta laga wado " aqoon, khibrad, xogogaalnimo, xirfad, xiilad, IWM, way dhici kartaa in maahmahadaani run noqoto, laakiin markaana waxay u baahanaysaa in eray bixinta laga badelo illeen dadweynaha caamka ihi waxay u fahmi karaan in kii xoog leh keliya talo iyo tusaale la weydiisan karo,
4. Waa been laga daba tagay oo waxaaba la ogaaday inay dadku u badan yihiin in uu Allah ruuxna uhibeeyo tabar jismi ahaaneed dadna tabar cilmi ahaaneed, kuu Alle isugu darana waa mid guulaystay laakiin ma badna. Ilaah baa sheegay in uu Dhaaluut udoortay in uu Abaanduulaha ciidamada qalabka sida u noqdo qoonkii Ilmo Isra'il ahaa oo Ilaah waxa uu yiri: "Wuxuu ku yiri Nabigoodii; Ilaahay waxa uu idiin ku bixiyey Dhaaluut Malik ahaan (Abaanduulaha Ciidanka), waxayna dheheen side buu noogu noqon karaa anagaaba uga haboone xukunka, Xoolo badana muu lahane (oo Ilaahba ma siine), Suuye; Ilaahay baa u doortay korkiina Wuxuuna u kordhiyey waasacnimo cilmi iyo jidh (Tacliin iyo Xoog), Allahna waxa uu siiyaa xukunkiisa cidduu doono, Allahna waa deeq badane og" (Qur'an: Al-Baqarah: 247),
5. Adeegsiga Nin ayaa isna u muuqday mid abuuri kara eex iyo qiimo jabin dumarka lagu hayo, sidaa awgeed waxan garanay in ujeedka maahmaahdu uu wada taabto nin iyo naag,
6. Qusayntii Tabar laha waxan u badelnay Tacliin iyo khibrad le,
7. Sidaa darteed waxan Maahmaahda u qormayn karnaa wixi hadda ka dambeeya: **"Aqoon iyo khibrad qofkii leh ayaa Talo la weydiistaa"**

## XARAFKA (X)

b. "**Xamarna xeer baa lagu degay, Xarardheerana Xoog baa lagu degay"**. Maahmaadaan ka hadalkeeda dib ayaa loo dhigay ilaa muddo (*suspension*), waayo:

1. Waxaa ka daba yimid oo badelay taariikhda oo waxay u wareegtay dhanka kale (*the other way round*).
2. Qisooyinka Xamar ka dhacay waxay baabi'iyeen maahmaahooyin fara badan oo ay ka mid tahay: **"Beesadayda isii iyo buulkayga iiga bax meel loo dhaafo ma lahan",**
3. Wax muhimad ah ma lahaanayso hadaan u dayno sideeda si loogu isticmaalo tusaale meelo kale, illeen qalbiga qofka kama degaysee,
4. Mas'aladeedu waxay igu adkaatay ee waxan ku soo dhaweynayaa cilmi baarayaasha kale in ay ka hadlaan,
5. Haddaba waxaan ku talin lahaa bal ha loo kaadiyo isticmaalkeeda inta ay arinta Xamar dhan u dhacayso.

T1. Xagalo geel wax gunti la geliyo ka weyn. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay. "**Shaag baabuur wax jeeb la geliyo ka weyn**". Sababtuna waa:
1.

**XARAFKA ®**

B. "Rabbi ka cabso iyo rag iska celi meel ma wada galaan"**.** Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Rag iska dhici Rabbi ka cabsise kaasho**", waayo:

1. Waa gaalnimo iska cad in sidaa loo isticmaalo xikmad maahmaaheed oo u dhaqan gelaysa qaab xeer bulsho (*binding customary law*),
2. Waa Axmaqnimo io dullinimo lugta lagu raadsanayo in la tartansiiyo ciil saacad la dareemay oo weliba laga yaabon in aan gartiisa la caddayn iyo

cabsashada Allaha awoodda sare iska leh, waxaase hoog iyo ba' weyn ah in ciilkii yaraa laga doorbido Allaah ka cabsigii,

3. Malaha jaahilnimo awged ayey kuwii dejiyey maahmaahdu la garan waayeen in rag gardaran la iska celin karo iyada oo Allahana laga cabsanayo oo aan marnaba lagu xad gudbayn seerooyinkiisa u go'an (*maxaarim*),
4. Markii aan isla barbardhigay in la baabi'iyo maahmaahda iyo in la badelo waxaa guulaysatay in la badelo oo badelkeeda la dhigo mid wacdi ah, sidaa awgeed waxaan guubaabiyey in Allaha looga cabsado wax kaste iyo xaalad kaste koley dadka aad la dagaalayso ku tahayna,
5. Haddaba wan maahmaahdaan badelnay iyada oo laga sii digayo in mar dambe qof tan akhriyey uu ku soo celiyo isticmaalkeeda illeen waxa aka ratibmaya dambi culus oo sii soconaya inta uu qof kale oo kaa maqlay xataa sii isticmaalayo,
6. Waxaana laga dhigay sidatan: **"Rag iska dhici Rabbi ka cabsise kaasho**".

T. "Rag ciilkiis cadaab ka doorsay". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Dad waxaa u hoog badan ciil cadaab ka doorde"**, waayo:

1. Waa dambi loo bareero kan ugu khatarsan illeen waa qof go'aansaday in uu intii qof kale ciili lahaa Ilaahay cadaabo, kolley cadaab aqoon la'aan baa u geynaysee,
2. Waa axmaqnimo iyo baacnimo in la hirgeliyo maahmaah ku qotonto halaag iyo cadaab loo bareero,
3. Waa sawir qeexaya dabeecadii jaahilnimada ahayd e ereer baadiyenimo,
4. Qaabka cusub een u dhignay waxay u ektahay sidii wacdi dadban,
5. Waxayna reebaysaa in qof ciil uu maalin qaaday ku illoobo aakhiradiisa oo dambi cadaab usoo jiida u galo,

6. Hadda waxan dadweynaha ka didinayna ain ay is ciil kaamibiga ku fogaadaan ilaa ay dambi aakhiro ku mutaystaan,
7. Waxay tan dambe baraysaa ummada maslaxo, dabeecad qaboobi, iyo dabci wanaag ka bilaabanaya ciil is kaabin la'aanta,
8. Si ujeedada loo wada siiyo dhammaan noocyada daka ee kala duwan waxan garanay in halkii Rag ka dhigno Dad,
9. Haddaba waxaan hadda ka dib ogaanaynaa in maahmaahdan loo badelay: "**"Dad waxaa u hoog badan ciil cadaab ka doorde".**

J. "Rag talo kama dhamaato". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"kurbo waa tii talo kuu diida"**, waayo:

1. Waxan qiyaasayaa in kuwii maahmaahdan dejiyey aysan weli arag dhibaato aad u wayn oo xayiraad gelisa fursada fikirkooda iyo talo doonkooda,
2. Waxan ugu dhiiraday isku badelka labadan oraahood ee maahmaaheed, in aan aniga qof ahaan ila soo gudboonaatay inaan taladii iyo hadal gabo naxdin iyo kurbo i haystay awgeed,
3. waxan ka dib cilmiga nafsaaniga ku ogaaday inay jirto heer uu qofka aadanaha ihi ka hawlgabayo talo iyo fakir.
4. sidaa awgeed waxan maahmaahdan u badelnay ka soo horjeedka siday ahayd oo ah: **"kurbo waa tii talo kuu diida".**

X. Rag waa raggii hore hadalna waa intuu yiri. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Qarni waliba qawlkiisa qorrixiba dharaateeda"**, waayo:

1. Ragu ragii hore ma ahan hadalna kay yiraahden ma ahan ee maammaah ku sheegaan waxaa bixiyey kuwa iyagu nolosha ku fashilmay oo wax cusub ku soo biirin waayey,
2. Ragii hore waxaa ka wax tar iyo wax garasho badan kara raga maanta jira, waase hadaysan is yeelyeelayn. Waxaa la yiri: "Waayeel waa kuma? Saa la yeh; waa inaga oon is yeelyeelayn".
3. Raggii hore badankoodu wax ma akhrin jirin waxna ma qori jirin, sida kuwa maanta u badan yihiin,
4. Ragii hore dunida kumay soo wareegin illeen diyaaradaba ma jirine, laakiin kuwa maantu maalin gudaheed bay caalamka oo dhan dul heehaabi karaan oo cilmi baaris samayn karaan,
5. Raggii hore dood cilmiyeed dunida oo dhami isugu timaado may ka qayb gali jirin, lagase yaabee mid heer gobol ah, kuwa maantuse iyaga oo nin walba gurigiisa fadhiyo ayey shir iska soo horjeed ah isugu imaan karaan oo kuwada shekaysan karaan Video-Conference, Telconference, ama Internet Forum, haday doonaana maalin gudaheed bay isaga imaan karaan meel walba,
6. Raggii hore akhbaaraha dunida ka dhaca dhaqso may heli jirnj illeen TV iyo Internet maysan haysane, kuwa maantuse waxay ka heli ogyihiin qofka dhacdada riday kii la taagnaa,
7. Raggii hore garasgadoodu waxay ku koobnaan jirtay heer degmo ama gobol, hadday fogaatana heer qaaradeed, laakiin kuwa maantu waxay kuwada noolyihiin caalam loo bixiyey "*Global village*" oo waxay ka dhigan yihiin dad isku qol ku jira,
8. Raggii hore intay noolaayeen dunida waxyaalhii ka dhacay wax ka sii badsan baa ka dibtood ka dhacay. Laakiin kuwa maanta jira waxay ogaan karaan (kii isagu iska diida mooyee) wixii dunida waaydaii hore ee kuwasi jireen iyo ka sii horba ka dhacay, waxa maanta jira, ka dibna waxay cilmi baaris ku odorsi karaan qiyaaso ku saabsan waxa is badelaya.

9. Raggii hore waxay u badnaayeen inay ku takhasusaan dhaqan, luuqad, iyo cilmi gooni ah, laakiin maanta halkii qof ayaa isku wada baran kara tobaneeyo cilmi, dhaqan, luuqado iyo waxyaalo kale oo kala duwan,
10. Ragga maanta xikmado fara badan way sheegaan ee dadkii ayaa wlei ku sii dhegan kuwii hore,
11. Sidaa awgeed ma dhihi karno Raggii hore iyo hadalkay sheegeen ayey xikmad iyo raganimo ku dhamaatay.
12. Waxaase haboon si aan dooda isu waafajino in ana uqormayno maahmaahda: **"Qarni waliba qawlkiisa qorrixiba dharaateeda".**

Kh. "Rag waran baa walaaleeya". Maahmaahdaan waxaa lgu nasakhay: **"Rag waxaad walaalow kaga weyday waran ugama heshid"**, waayo:

1. Waxay ku abtirsanaysaa carujaahiligii dagaalka iyo waranka lagu wada sheekaysan jiray,
2. Waa been oo nina tumaati la gaarsiiyey ma illawayo lagumana dirqin karo wax uusan raalli ka ahayn. Horaan u niri: "qoolleey qoor qabad biyo kuma cabto",
3. Marka aan ka eegno xaga warinta ama sida ay ku baxday iyo weliba isticmaalkeeda waxaa ka xoog badan oo lagaga kalsooni badan yahay maahmaahda kale ee ay ka hor imaanayso oo ah isla midda aan hadana ka door bidnay oo ku nasakhnay,
4. waxa xusid mudan inaan halkaan ku amaano Wiil waal oo ahaa ninki dejiyey maahmaahda qaabkeeda dambe een hada dooranay, ka dib markii uu soo taabtay xaqiiqada. Siduu rag u ciqaabayey ayuu kolkii dambe ku dhawaaqay " Rag hooyadiina ugeeyoo wax uu walaalow ku dhaamo waayey",
5. Sidaa awgeed maahmaahdaan way kuftay oo waxaa halkeeda mar walba la isticmaalaya amidaan uu wiilwaal lugtiisa ku soo tijaabiyey ee ah **"Rag waxaad walaalow kaga weyday waran ugama heshid".**

D. Run sheeg waa ceeb sheeg. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Run sheeg Xaq sheeg waaye**", waayo:

1. Waxay kordhinaysaa fasahaadka iyo been faafiska hadaan sideeda ku dhaafno,
2. Waxay dhiir gelinaysaa been sheega iyo isu munaafaqaynta ama mujaamalada,
3. Waxay ka soo horjeeda tacliinta Diinta Islaamka oo ku qotonta run sheegnimo iyo been ka dheeraasho,
4. Haddii waxa la sheegayo ay noqon karaan wax ceeb ama fidno kale abuuri kara waxaa haboon in laga aamuso ee marnaba ma banana in been la sheego,
5. Sida dambe waxay taabanaysaa dhabta oo ah in hadada runta sheegto aad xaqii shegtay hadaad doonto haba u aabbayeelin wax aka dhalanayee,
6. sidaa awgeed waxan u qormaynay: **"Run sheeg Xaq sheeg waaye".**

**XARAFKA (S)**

B. "Saaxiibkaa maantay waa cadawgaaga burrito". Maahmaahdaan waxaa lgu nasakhay: **" Saaxiibkaaga maanta ama sahankaaga berri noqoy ama sababtaada noqoy"**, waayo:

1. Waxay u ektahay in maahmaahdana la sameeyey iyada oo ana laga fiirsan oo markaa la isku qaaday guud ahaanba saaxiibada mid wanaagsan iyo mid xun intaba,

2. Way dhacda ain saaxiib intuu xumaado cadaw isu badelo, laakiin markaa xataa waxaa lagama maarmaan ah in la hubiyo inuu saxiibkaasi gardaran yahay iyo in kan la saaxiibka haa uu gardaro la yimid,
3. Sida dambe eemn u qormaynay waxay sawiraysa aqaab caddaalad dhexdhexaad ah oo marba is ka dhigaysa saaxiibka,
4. Waxay sida dambe tusniaysaa in uu saaxibku yahay marba kan aad doorato oo hadduu mid xun yahay aad berri ka shallaayeyso ayna dhici karto in uu sabab u noqdo dullowgaa, daqarkaa, ama xataa dilkaa,
5. Dhanka kale waxay ku tusinaysaa in hadaad saxiib wanaagsan maanta doorato uu berri kuu noqon karo ku samaha iyo wanaagga kuu sahmiya oo kuu horseeda kuna gaarsiiya nolol barwaaqo iyo bashbash,
6. Sidaa awgeed ayaan badelka maahmaahda ku astaynay: **"Saaxiibkaaga maanta ama sahankaaga berri noqoy ama sababtaada noqoy".**

T. **"Sagaaro miyirkeeda qabta Masaajid Eeyle aadi mayso**". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "

J. "**Saqiir naageed sir la'aan ma dhinto"**. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Waa been iyuo dulmi in ilmo saqiir ah tuhmo been abuur ah la saaro
2. Waxay ka soo horjeedaa intii maahmaah aan kor ku soo xusnay ee ka wada duulayey in ay dumarku caaqiin aan wax garan yihiin sida tan oranaysa: " naagi waa caruur raad weyn", IWM.,
3. Waxay ka soo horjeedaa Diinta Islaamka iyo caqliga fayow,
4. Sidaa awgeed maahmaahdaan waxay ku haboon tahay in laga takhaluso gebigeedaba oon dib loo maqal.

X. Sirtaada dabaysha ku asturo intaad Naagtaada ku asturan lahayd. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Xaaskaagu waa sanduuqii sirtaada"**, waayo:

1. Waxay ka soo horjeedaa Diinta Islaamka iyo dhaqanka Muslimiinta,
2. Waxay ka soo jeedaa caadadii xumayd ee haween gumaysiga oon ka soo boodayno,
3. Waxay inkiraysaa xaqiiqada dhabta ah ee jirta oo ah in nin iyo naagtiis aysan sinaba ukala sir qarsan Karin,
4. Waxay sabaysaa jahli gaarsiisan herka cawaanimda iyo wuxuushnimada,
5. Sida aan dib ugu qormaynay waxay tafsiiraysaa Aayadda Qur'anka ee uu Ilaahayku leeyahay: "Waxaa laydiin baneeyey habeenka soonka inaad Haweenkiina u galmootaan, Iyagu waxay idiin yihiin dhar idinkuna waxaad utihin dhar (ceebtiinaad isku asturanaysaan), Ilaahay waxa uu ogaaday in aad khayaanaysaan naftiina, wuuna idinka Tawbad aqbalay idina cafiyey ee hadda ku Baashaala Haweenkiina kana doona wixii Ilaahay idiinku qoray" (Qur'an: Al-Baqarah: 187).
6. Sidaa si la mid ahna waxay waafaqaysa dhaqanki Nabiga NNKHA tee iyo asxaabtiisii iyo guud ahaanba Muslimiintii wanaaga badnayd oo dhan,
7. Waxay sida dambe ka tarjumaysa ailbaxnimada dhabta ah, waase in xaaskana laga helaa kalsooni, haddii kale ujeedadu xaas ahaan way ka baxaysaa oo dan kale ayun bay galaysaa,
8. Taas ayaa keentay inaan maahmaahda u qormayno: **"Xaaskaagu waa sanduuqii sirtaada"**

Kh. **"Soomaalidu been waa sheegtaa beense ma maahmaahdo"**.. Maahmaah kusheegaan waa la baabi'iyey, waayo waxaa lagu beeniyey kun ku dhawaadka maahmaahood oo ana halkaan ku saxnay waxay isugu jiraan qaar been ah, qaar marinkoodii laga weeciyey, qaar fidno ku keenya shacabka, qaar

dib u celinaya dadka soo baraarugay, IWM. Sidaa awgeed waa ceeb iyo dambi in kol dambe la maqlo waxas oo lagu maahmaahayo.

C. "Silic ku nool soddon guursataa dhaanta". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **" Soddon guursato iyadaa silic is baday**", waayo:

1. waxay guubaabiinaysaa furriinka badan oo ay dumarku dalbadaan,
2. waxay nuxur been iyo dhalnteed ah uyeelaysaa Garoobnimada oo hoog allaha laga magangalo ah,
3. waxay dhiiri gelinaysaa muramada iyo is maqiiqnimada joogtada ah ee ay dumarku kula kacaan nimanka qaba si ay ius muujiyaan,
4. waxay ka dhigaysaa guurka mid ka sii xun dhaqanka tumashada iyo dhaqlaynta hallaasigan ah,
5. Ma ahanmaah maah horay ujirtay ee waa mid ay dhawanahan samaysteen haweenka Soomaaliyeed ee caadaystay dhaqanka garoobnimada si ay isugu difaacaan,
6. Waxay ka soo hor jeedaa nuxurka Diinta Islaamka iyo ujeedada uu Allaha ugu tala galay guurka,
7. Waxay midaynaysaa nooc guursi oo horay loo mamnuucay oo ahaa nikaax iska raaxaysi ah (*Nikaaxul mutca*),
8. waxay meesha ka saaraysaa degenaansho qoys iyo awlaad korin,
9. Waxay ka soo horjeedaa nolosha dhabta ah ee dunida ka jirta iyo macanaha ilbaxnimada casriga ah,
10. Sida dambe een u qormaynay waxay tusinaysaa xaqiiqada silica ah ee ay gacanteeda isugu kenmayso naaga furrinka caadaysataa, si ay uniyadjebiso dhaqamada foosha xun ee beryahan caadiga laga dhigtay,

11. tan dambe waxay ugu baaqaysaa dadka furrinka ku degdega in ay dib ugu laabtaan nolosha dhabta ahee guur ku adkaysashada iyo joogtaynta qoyska,
12. Sidaa awgeed ayaan maahmahda u qormaynay: "**Soddon guursato iyadaa silic is baday".**

## INTA KU SOO AROORTAY XARAFKA (D)

D1. Doofaar ficil la'aan baa loo cadaabaa. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "G**aal kal-kaal ficil la'aan baa loo cadaabaa**". Sababtuna waa;

1. Maahmaahdani waxay u qaldan tahay macno ahaan iyo kelmado ahaan. Waayo Doofaar lama cadaabo oo waa xayawaan aan horeba Ilaahay u siin caqli uu Aakhiro kagala xisaabtamo. Hadday xataa dhici lahayd in Doofaar la cadaabayo ma ahan wax xikmad ahaan iyo waano ahaan toona loogu soo qaadan karo aadanaha waayo waxay kala yihiin laba noole oo kala duwan kalana nidaam ah.
2. Ka soo qaad in macanaha cadaab halkaan laga wado dhibaateyn iyo ciqaabid lagu sameeyo Doofaar. Hadaan tass u qaadano waa mid aan dhicin oo aan wleigeed la maqal lana arag. Sidaa awgeed maahmaahdu waa hadal la iska yiri ee ma ahan wax la taaban karo ee maqluhu uu dhab u dareemi karo. Noocan oo kale Soomaalidu waxay tiraahdaa waa "hadal wedkii galay" oo loola jeedo kelmado iska baxay asaan wax macno ah soo kordhin.
3. Maahmaahdu ma ahan mid ay dadka caadiga ah (*lay-man*) fahmi karaan xataa erayada ay ku qoran tahay, siiba dhallinyarada waxa laga yaabaa in ay iska maqlaan oo hadana isaga dhawaaqaan iyaga oon fahmin ujeedka.
4. Sida aan dib ugu qormaynay waa qaab uu qof walba oo bulshada ka mid ihi wax ku fahmi karo oo bayaansan.

5. Sida aan dib ugu qormaynay waa mid toos uga tarjumaya aayado Qur'an ah iyo Axaadiis oo ku salaysan awaamir iyo talooyin diini ah. Waxa ay maahmaahdan cusubi xaaraantimaynaysaa in qof Muslim ihi uu qolo gaalo ah ugu kaalmeeyo wax lagu dhibaataynayo dad Muslimiin ah, ama in uu Muslimku gaalada talo saarto oo isu dhiibo. Allah waxa uu yiri: "War hooy kuwa rumeeyow ha ka dhiganina colka Allah iyo colkiina sokeeye aad jacayl u gudbinaysaan" (Quranka: Mumtaxinah: 1).
6. Maahmaahda cusubi waxay baraarujin iyo xusuusin u noqonaysaa dadka aan maalin walba ku xirnayn goobaha wax barashada diinigi ah. Sidoo kale dhallinyarada soo koraysa oo ay ka ilaalinayso marin habowga iyo fasahaadka.
7. Maahmaahda cusubi waxay xusuusin iyo caqli celin u noqonaysaa siyaasiyiinta uu qalbigoodu ku xiran yahay gaalada iyo shisheeyaha say ugu isticmaalaan meel marinta hadafkooda siyaasadeed.
8. Intaa oo sababood awgood ayaan gartay in maahmaahdaan dib loogu qormeeyo sidatan; "G**aal kal-kaal ficil la'aan baa loo cadaabaa".**

T. "Dabkaad kulkiisa aragto danabkiisaa laga leexdaa". Maahmaahdaan waxaa lagu badelay: **"Qofkii maraq ku gubtaa Jallaataduu ka baqaa**", waayo:

1. Inkastoo aysan maahmaahdu sideeda wax qalad ah oo la taaban karo ku tusinayn hadana waxaa ka muuqata duqnimo iyo qaab farsamo oo u dhadhamaysa weji cilmi saynis ah.
2.

J. Dad waa dadkii hore hadalna waa intuu yiri. Maahmaahdaan waxa alagu nasakhay: "Dad waa kuwa kula nool hadalna waa kay ku yiraahdaan", waayo:

X. Dad waa xan kun nool. Ama "Dad waa xan daaq, duunyana waa xaabo daaq". Maahmaahdaan waxaa labadeeda weji ee ay ku kala socoto lagu kala nasakhay: "Dad waa xog ku nool", ama "Dad waa Xog daaq, duunyana waa xaabo daaq", waayo:

KH. Dameer intuu rar ka dhuuntuu rar u dhuuntaa. Maahmaahdaan waxa alagu nasakhay: " Gabari intay guur ka dhuumatay guur u dhuumataa", waayo:

D. Dumar waa dabin Sheydaan. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey gebi ahaanba, waayo:

R. Dumar iyo Caruurba la isma cayaar baro. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: " Dumar iyo Caruurba waa la is cayaar baraa", waayo:

S. Dumaali diidid ma leh, doorashana ma leh". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "Dumaal dambi ku dhan", waayo:

SH. Duqu waa cirbadii dadka isku tolaysay, duqduna waa mindidii kala goynaysay. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey gebi ahaanba, waayo:

Deriskii dagaalkaaga rabo doradaada iga ceshuu ku dhahaa.
Dooradaada iga cesho daan daansi dagaal waaye.
Ninki Albaabkaaga jug siiyo aduu jawaab kaa sugaa.

## XARAFKA (C )

C1. "Caado la gooyaa cara Allay leedahay". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: "**Caado xun goynteedu waa Allah cibaadadii**". Sababtuna waa:

1. Maahmaahdani waa mida ugu qaladka weyn ee hadana ugu siticmaalka badan. Ma ahan in ay Qaladan tahay oo keliya balse waa dambi aad u weyn.
2. Diinta Islaamka sababta ay usoo degtay wax kale ma ahan ee waa in ay badesho dhammaan caadooyinka xun xun oo ay ugu horayso in Ilaahay cibaadadiisa wax kale lala wadaajiyo – shirki.
3. Waxaa la qiyaasi karaa in caadooyinkii hore badankoodu qaldanaayeen ama ugu yaraan lug gooyo ahaayeen. Haddaba haddii lagu sii dhegenaado waa in laga quustaa ka qayb galka hawlaha dunida.
4. Caadooyinkii hore badankoodu waa kuwa maanta laga xishoodo oo aan la soo bandhigi karin, laakiin haddii xujo loogu sameeyo inay caro Alle leedahay waxay abuuri kartaa in dadku ay xataa wax kasta oo xagga Allah ka soo yeera dheg u jalaq siin waayaan iyaga oo u haysta in awaamirtaasi ay yihiin kuwa ku dirqinaya wax aysan jeclayn.
5. Waa dambi iyo Allah ku been abuurasho in wixii la doono lagu sheego in uu Allah ka caroonayo, tiiyoo wixii uu dhab ahaan uga caroonayey laga aamusayo,
6. Si aan maahmaahda u waafajino diinta iyo miyirka waa in aan kala qayaxnaa noocada caado ee haddii laga tago caro Allah imaanayso iyo noocada caado ee haddii lag tago ay raali ahaansho Allah iyo ajirkiisu imaanayaan. Sidaa awgeed waxan maahmaahda u qormayn karnaa: "**Caado xun goynteedu waa Allah cibaadadii".**

**C3. "**Carabi intay ku nabtay Nebigiina kaaga hormartaa". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: **"Carabi Nebigii ka dhashay cidna kama xigto".** Sabatuna waa:

1. Siday u qornayd waxay ku qotontay jaahilnimo iyo diin yaraan khatar ah, waayo wax kale ma ahayn ee waxay ahayd hadal wedkii galay oo meel uu ujeedo iyo meel uu ka jeedo toona aan la garanayn.
2. Waa been iska hadal ah bal u fiirso kelmada ah "nabid" waa in qof wax uusan qabin ama sheegin lagu eedeeyo si hagag ah. Balse si uu qof Carab ihi maanta qof kale ku nabo oo wax isaga eedeeyo ma hayno. Sidoo kale kelmada ah "kaaga hor maraa" waxay tusinaysaa laba ruux oo intay qof ama meel u wada qasdeen uu midkood ku sii hor maray. Laakiin su'aashu waxay tahay xagee buu joogaa Nebigii oo loogu kala hormarayaa. Waxan wada ognahay in uu Nebigii dhintay mar hore. Sidoo kale Nebiyadii ka si horeeyey marka laga reebo Ciise nabadi ha gaadhee. Sidaa awgeed ma jiro maanta Nebi dadka dhex jooga oo ay u kala tartamaan ama gar u geystaan.
3. Sideedan maahmaahdu waxay tusinaysaa masawir ah in ay Carabi Nebiga dadka intiisa kale ka xigto oo ay weliba cilaaqaad gooni ah la leeyihiin.
4. Si aan dadka uga dhaadhicino in aan Nebigii la kala xigin adduun iyo aakhiraba oo maskaxdooda uga saaro qalada ku jirta ayaan maahmaahdaan u badelnay sidatan: "**Carabi Nebigii ka dhashay cidna kama xigto".**

**C4.** "Calool adayg waa Ilaah wehelkii". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Calool adayg waa geesi wehelkii**". Sababtuna waa:

1. Sida ay oraahdu u dhacayso waxa laga dhigay Ilaahay mid u baahan in uu wax weheshado ama wax kaalmaysto marka uu wax qabanayo. kaba sii fool xune in uu u baahan yahay inuu kaashado calool adayg – ha ahaado dad calool adaygii ama isla isaga calool adaygiiye. Taasina waa dambi iyo af xumo aan geed loogu soo gaban oo weliba Ilaahay loola soo bareeray.
2. Hadaan dhanka kale u fasirno in loola jeedo in uu Ilaahay kaalmaynayo marka uu qofku calool adayg isticmaalana wax daliil ah oo ana warkaas ku xoojino ma hayno. Sidaa awgeed kuam dhiiranana kaarno in ana iska dhahno ha la adeegsado calool adayg Ilaah baa kugu sii wehlinayee.

3. Laga yaabee haddii laga wado in uu Ilaah kula garab gelayo marka aad ku calool adaygto wax wanaagsan oo kheyr ku jiro inay maahmaahdu sax tahay. Laakiin xataa haday sidaa tahay waxay u baahan tahay in dib loo qormeeyo oo mar labaad la jumleeyo (*rephrasing*).
4. Waxaa jirta in qofka geesiga ah uu badanaaba ku guulaysto wax uu ku haminayo haduu guntiga dhiisha isaga dhigo oo calool adayg yeesho. Sidaa darteed isaga ayaan maahmaahda ku qormaynay.
5. Haddaba si aan u saxno maahmaahda waxan u qormaynay sidatan: **"Calool adayg waa geesi wehelkii**"

**C5. "**Ceebi waa laba af tuur". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: **" Ceebi qofkeeday raacdaa".** Sababtuna waa:

1. Siday u tiilay waxay ahayd mid dhiiri gelinaysa inaan wax ceeb la yiraahdaba laga xishoonin ee xumaanaha la iska walaaqdo, waayo qof ka ceeb sameeyaha ihi wax uu ku fikiri karaa; Alleylehe ha u bixin ceebtu koley waa dhawrka cisho ee ugu horaysee iska dabaalo xumaanta.
2. Waxaa jirta in waxa uu qof ceeb u yaqaan ay qof kale camalkii tahay. Sidaa awgeed waxaa lama huraan ah in nooca ceebta la sheegayo la qeexo intaan shaambad kale la saarin. Haddaba si aan taas u muujino waxan saarnay ceebta qofka lagu asteeyo inuu ceeb fale yahay.
3. Si aan ceebta loogu dhiiranaan waxan u muujinay mid qofka sameeya raacaysa oo aan laba aftuur keliya ku harayn. Sidaa awgeed waxan maahmaahda u qormaynay: "**Ceebi qofkeeday raacdaa"**

C6. "Cilmi waa caqli la aruurshay". Maahmaahdan waxaa lagu kordhiyey kelmad kale oo waxaa loo qorayaa: "**Cilmi waa caqli iyo caqiido la aruurshay"**, waayo;

1. Cilmigu waa noocyo badan yahay, haddaanse ka soo qaadno kan la xiriira umuuraha diiniga ah ama cibaadaysiga isagu kuma eka caqliyo aruuray ee waa waxyi iyo awaamir ka timid xagga Allaha. Hadiise laga hadlayo cilmiyada

kale ee dunyawiga ah ee lagu soo aruuriyey tijaabooyin iyo daraasado la sameeyey waan oran karnaa waa caqli la aruuriyey.

2. Waa lagama maarmaan in caqligu shaqeeyo kol haddii la rabo in cilmi shaqeeyo waxaa lagu heesay: "cilmiga ha laguu dhigee caqliga kaasho baa la yiri", waxaase iyana lama huraan ah in cilmiga lala kaashado waxyiga Allah si loo sugo. Sidaa awgeed waxan maahmaahdaan ku soo kordhin lahaa in diinta lagu daro oo loo qormeeyo: "**Cilmi waa caqli iyo caqiido la aruurshay"**.

C7. "Cir baa hagar leh ee dhul hagar ma yaqaan". Halhayskaan waxaa lagu nasakhay: "
**Cir iyo dhul Allaah baa isu godlay"**, waayo:

1. Waa gef iyo dambi Ilaah laga gelayo, illeen cirka iyo dhulka midkoodna isagu wax uu hagrado ama ku deeqo ma haysto ee Ilaahay baa markuu rabo wax ka dhiijiya.
2. Waxay koley maahmaahdu soo baxday waayadii ari raacadka oo ay dadku had iyo goor cirka wax roob ah ka eegayeen oo sugayeen inay mar uun daruuri u da'do deedna dhulku nabad usoo saaro. Markaa ayey aaminsanaayeen in marba haddu cirku roob soo daayo ay daaqa iyo miraha dhulka ka soo baxaa isku hubaal yihiin. Laakin maanta dadkii way ka soo cargedisteen baadiyhiin iyo ari raacii oo in badanba kama hadlaan roob iyo cagaar toona.
3. Si dadka looga qabto gef iyo dambi ay ku sii jiraan waxaa haboon in kelmada sida ay ugu saxsan tahay loogu hago. Sidaa awgeed waxa loogu badelay maamaahdii dambiga ahayd mid kale oo ajir laga helayo oo waa: "**Cir iyo dhul Allah baa isu godlay**".

C8. "Cisha iyo Naag xunba waa la iska dedejiyaa". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: **"Cisha iyo cawaysin xaasba waa loo casheeyaa"**. Sababtuna waa:

1. Marka hore maahmaah ku sheegani waxay u egtahay mid ku timid dhaqan ku salaysan saqajaanimo oo naag xun waxaa loola naag laga sinaysanayo oo la rabo in la is dhaafiyo intaan waqti ku imaan. Waxaa kale oo dhiic jirtay in dhalinyarada kuwooda ay ku dambayso walax bartood oo caymo ihi ay cawadii cisha tukashada dhib ku qabeen iyaga uga mashquulaya shukaansi laga yaabo inuu dhaliyo qubays ama ugu yaraan qubays. Sidaa awgeed ay ku dadaali jireen in ay marka hore salaada cishaha is dhaafiyaan ka dibna u madax banaanaadaan shukaansigooda.
2. Waxaa kale oo af lagaado u muuqda in naag xun iyo salaad cisha isku miis la saaro, sidaa awgeed waxaan ubaahanahay inaan oraahda sideeda ku asluubayno oo weji kale u yeelno.
3. Si aan wax wanaagsan oo diinta iyo caqliga waafaqsan gu maahmaahno waxan ka dhigaynaa maahmaahda mid ku qotonta Axaadiista Nebiga NNKHA iyo weliba caqliga saliimka ah iyo cilmiga caafimaad ka, waana sidatan: **"Cisha iyo cawaysin xaasba waa loo casheeyaa**"

C9. "Col iyo dhaanba halka laga eegayey ka yimaadaan". Maahmaahdaan waxaa lagu badelay: "**Col iyo sahankii isma mooga**". Sababtuna waa:

1. Inkastoo adeegsiga col ama colaad uusan saa u habooneyn hadana bal aan tan ku gaabino, laakin asluubayno
2. Adeegsiga kelmada Dhaan looma baahna mana joogno xilligeedii oo maanta cidaha dhaan sugaya iyo kuwa aan macnihiisab agaranayn waxaa badan kuwa aan garan. Sidaa awgeed waa in iyada meesha laga saraa asalba.
3. Waxaa beenowday fikrada ah in col halka laga eegayo uu ka yimaado, oo maanta waxay col wadayaashu aad u isticmaalaan waxa loo yaqaan "dhabar jebin", taas oo ah in laga soo galo cadawga ama dhibanayaasha la iska weeraryo meel aysan ka filanayn, siiba dhabarkooda dambe.
4. Hadaba si aan oraahda isku biya dhac ugu ridno waxan u badelnay: **"Col iyo sahankii isma mooga**".

XARAFKA (G)

B. Gabari gob maahee Aabaheed baa gob ah.

T. Gabadha dheg Dameer baa Habeen walba ku darsanta wiilka tin wax la eg.

X. Gabari waa xoolo guneed.

Kh. Geesi Alle ma cadaabo (xilo/ciilo, ).

D. Guu guulaha ciyayaa Gu' buu sheegayaa.

XARAFKA (F)

B. Faqiih tolkii kama jano tago. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "Faqiih tolkii Jana u jiid", waayo:

T. Ficil Habartaana waa kuu geeyaa. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

## INTA KU SOO AROORTAY XARAFKA (Q)

B. "Qabri qori saarid mooyee qori ka qaadis ma leh". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Qori Qabri la saaray kii qiiqsan lahaana dhaaf kii Qiyaamaha jirayna Quud iyo qurbaan toona u noqon waa**", waayo:

1. Waxay si toos ah uga soo horjeedaa Diinta Islaamka ee Qur'anka iyo Sunnaha in Qabriga la dhiso ama la qori saaro,
2. Waxay si toos ah uga soo hor jeedaa caqli fayow ee wax kala garta, illeen waan garan karnaa in qof dhintay uusan qorigaasi waxba u tarayne,
3. Waxay si toos ah uga soo horjeedaa ilbaxnimada casriga ah ee socota,
4. Waxay si toos ah uga soo horjeedaa danta iyo duruufaha Aadanaha, illeen maanta dadkii dunida waa isku batay oo lama hayo dhul loo gooyo kuwa aakhira jira. Bal eeg dunida ma sheegi kartaa meel ay ka go'do hal tallaabo oo la dayaco,
5. Waxay u muuqataa talo iyo ficil ku salaysan axmaqnimo iyo dabbaalnimo illeen marka aad qof dhintay qabrigiisa qoryo ku rarto eed ku dhisto waxaa loo garan karaa inaad leedahay "maydoow aniguba dhulka dunidaan boos kaaga cabiraye adiguna aakhiro Jannada boos iiga sii qabo", taasina waa caqliyadii Mushrikiintii hore ee xayawaanka la midka ahayd,
6. Marka aan eegno fikirka ah "Qabri qori saar" waxay ka soo jeedaa waagii hore ee dadku tira yaraa oo cid dhirta anfacaadsata ay yarayd oo meel walba ay iska yaalleen qoryo qalalay oo jab jabay, deedna inta la soo qaado Qabri meelaha ka dhaw la iska saaro si ay usii dhisto iyada oo ay dadkii Jaahilnimadu haysay u malaynayeen inay ajir iyo xasanaad ka helayaan. Laakiin maanta qori geed ka soo jabay waa qaali oo lamaba helo waayo dhirtii waa la dhamaysan rabaa dhawaan oo lacag baa laga raadiyaa jaritaanka iyo gubitaanka dhirta,
7. Sida aan haatan u qormaynay waa ka soo horjeedka sidii hore oo tii horena waxay dadka ugu yeeraysay Mushriknimo iyo Jaahilnimo tan

dambena waxay dadweynaha ugu yeeraysaa Muslinimo iyo ilbaxnimo ay dantooda gaarka ihina ku jirto,

8. Sida dambe waxay ka tarjuumaysaa tawjiihinta Islaamiga ah oo tusinaysa in aysan qabri dhisidi waxba u kordhinayn qofka ku aasan halkaas,
9. Sida dambe waxay dadweynaha wax utusinaysaa si caqli dhiraandhirin ah iyada oo sheegaysa in uusan qorigaasi quud siin nafaqo ah iyo qurbaan loogu duceeyo toona u noqon doonin qofka qabrigaas ku aasan,
10. Sidaa awgeed waxaan hadda ka dib maahmaahdaas u akhrin doonaa sidatan: **"Qori Qabri la saaray kii qiiqsan lahaana dhaaf kii Qiyaamaha jirayna Quud iyo Qurbaan toona u noqon waa".**

T. **"Qandi uu ku rito iyo qiil uu ku banaysto wadaad baa leh"**. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Wadaadadii hore ayey ku soo baxday ee kuwa maanta jira caynkaa ma ahan,
2. Kuwii ay ku soo baxday ee hore ma ahayn wadaado dhab ah ee waxay ahayeen kuwii uu Maxamed Siyad Barre u bixiyey "Wadaad xume", waxayna ahaayeen calooshood u shaqaystayaal ku qaraabta Diinta oo waayey cid ka dhacsata, waxayna ka faaiidaysteen xilligii jaahiliyadda indha la'aanta ihi socotay,
3. Wadaada maanta jira iyaga ayaa wax bixiya oo dadka dhaqaalahooda ku soo jiita si ay xaqa u fahamsiiyaan oo ajir Aakhira uga helaan,
4. Waxay ka soo horjeeda tacaaliinta iyo mabaadi'da Diinta Islaamka,
5. Waxay ka soo horjeedaa caqliga fayow iyo xishoodka bani aadaminimada oo ku burbura tuugsiga iyo turufaysiga,
6. Waxay ka soo horjeedaa ilbaxnimada iyo reer magaalnimada dhabta ah,
7. Haddaba hadaad aragtaan wadaad xoolo ku doonaya magaca ama ujeedada Diinta iska ilaaliya waa turifatoore ee wadaad ma ahane, xataa hadduu ka mid yahay kuwa casriga ah ee jira,

8. Si taas loo adkeeyo waxaa habboon in asal ahaanba maahmaahdaan la cirib gooyo oo jiridda laga jaro geedka ay harsanayso oo jaahilnimada ah,
9. Taas ayaa soo jiiday in aan masaxno Maahmaahdaan ku baxday qoonkii naga horeeyey oo iminka dhacday.

X. "Quruxdu dunida waa ka bar". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Quruxdu qofka sheegay indhihiisay saaran tahay",** waayo:

1. Waa qalad iyo been aan sal ku taagnayn,
2. Waa hadal loo yiri ka fiirsi la'aan waana tii horey loogu maahmaahay "**Hadal aan ka fiirsi loo oran iyo caano aan fiiqsi loo dhaminba feerahay wax yeelaan**",
3. Kuma abtirsan karto wax cilmi iyo tijaabo ah noocay doontaba ha ahaatee,
4. Waxay u egtahay in uu iskala booday qof jacayl galay oo marqaansan, laakin uma eka in ay tahay mid ay odayaal ama culimo inta ka fiirsadeen dejiyeen,
5. Haddaan raacno in ay maahmaahdu tahay mid uu samayeeyey qof dhibane u ahaa Caashaq galay, hadana waxaa habboon in aan ogaano in qofkaasi qofka uu quruxda u qiray ee caashaqay ay kuwa kale u haystaan qofka dunida ugu foosha xun, waana tii mar hore lagu maahmaahay **"Nin waliba tuu caashaqo waa u Cambaro Luul"** oo loola jeedo qofba wixii u caashaqaa u qaali ah,
6. Waxay cilmi baarisyada maadada Jacaylka daba galay ku soo gebangebeeyeen in ay Quruxi tahay hadba sida uu qofku u arko ooy la tahay isaga. Sidaa awgeed reer Galbeedka ayaa iyaguna ku maahmaaha: (***beauty is on the eyes of the beholder***),
7. Haddii aan hubno in ay maahmaahdu qeexayso quruxda dhabta ah oo la yiraahdo waa midda qofka nuxurkiisa ku jirta ee aan ahayn dhaldhalaaka

jidhka oo ay reer Galbeedku yiraahdaan: (***beauty is deep heart***) waxaan saari lahayn sharax kale oo ku haboon, laakin hadda waxaan hubnaa in loola jeedo mida haraga qofka ka muuqata oo keliya. Taas iyada ahna waxay reer Galbeedku uga maahmaaheen: (***all that glatering is not a Gold***),

8. Sida aan hada soo jeedinay waxay waafqaysaa ujeedada maahmaahda reer Galbeedka een kor ku xusnay iyo caqliga dhab ahaana ugu shaqeeya qaab cilmiyeed iyo qaba khibradeed,
9. Haddaba waxaa maanta ka dib maahmaahdaas badelkeedii galay tan ah: "**Quruxdu qofka sheegay indhihiisay saaran tahay".**

## XARAFKA (K)

B."Kabahaaga iyo tolkaaga lagama dhex baxo". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Kabahaaga iyo saaxibkaaga wanaagsan midna lagama dhex baxo**". Waayo:

1. Tolka halkaan loola jeedaa waa dhaqan laga waanagsan yahay oo ay Soomaalidu u istcimaali jirtay ama weliba usii istcimaasho nidaamkooda is difaaca iyo weerarada gardarro. Laakiin hadda waxaa la wada gartay in uu yahay kan koowaad ee lagu cuuryaamo, lagu cilloobo, lagu dib dhaco, lagu faqriyo, lagu dad beelo, lagu doqonoobo, iwm. Uuna yahay cillad xun oo waayo la wad wadi jiray. Sidaa awgeed waa in wixii maahmaah ku soo aroortay taageeradiisa iyo qiimayntiisa laga takhalusaa illeen waa ceebe,
2. Dan ahaan intaad tolkaaga ku xaniban tahay waa intaad dunida ka qafilan tahay oo dib uga dhacsan tahay ilbaxnimada iyo horumarka dunida cusub,
3. Waxay abuuri kartaa in qof walba uu tolkiisa uun is xijiyo oo dadka intiisa kale ka xayirnaado, deedna uu la hayste u ahaado koox yar,

4. Waxay dhiiri gelinaysaa qalad u fahamka tacaaliimta Islaamka ee la xiriirta qaraabo xiriirinta iyo is qaraabaysiga oo iyadu ubaahan in uu akhristuhu qoraalada kale ee khuseeya ka soo fahmo maceneheeda si uu uga xoroobo aragtiyada ku tiri ku teenta ah ee ay Soomaalidu isla dhex wareegaan,
5. Waxay kobcinaysaa ama sii nafaqaynaysaa dhaqanka foosha xun ee maanta Soomaali kala reebay ee ah is tolaysiga iyo tol jacaylka oo ugu dambaysta ku dhamaada hawo iyo haab haabad aan jirin,
6. Waxaa casrigaan dunida qiimo weyn ka yeeshay xiriirka iyo is jecalyka saaxiibada oo gaarsiisan heer ay dunida reer Galbeedku isu keenaan labada saaxibada ah (*sponsorship for friends*) ee kala maqan iyada oo loo qiimaynaya sida labada is qabta ama is dhashay (*family reunion*),
7. Waxaa dhab noqotay in dunidu ay ku hormari karto is wadaaysiga saaxiibada halka ay kaga dib dhacayso is tolaysiga. Sidaa awgeed inta badan maanta dunidan aan joogno xiriirka tolnimada waxaa laga hormariyaa kan saaxiibtinimada iyo derisnimada,
8. Hadaan sideeda udayno waxay ka hor imaanaysaa maahmaahda kale ee dhahaysa: "**Oodi ab ka dhaw**", laakiin qaabka dambe ee aan maahmaahda u qormaynay waxay waafaqaysaa "**Oodi abka dhaw**",
9. Qaabka dambe ee aan u qoray maahmaahda waxay ka qayb qaadanaysaa is dhex galka iyo is walaalaysiga dad weynaha,
10. Siday horay ugu qornayd maahmaahdu ma dhadhamaynin oo waxaa ka maqnaa kelmad caawin lahayd, sida fal gargaaraha, habsami usocodka iyo fahmitaanka hadalka oo aan hada ku darnay ee ah " midna",
11. Waxaan maahmaahdaan cusub ku xusaynaa oo ku amaanaynaa Suldaan tima Cadde oo ku gabyey: **"Dugsi ma leh qabyaaladi waxay dumisa mooyee. . .**"
12. Si looga saaro Soomaalida kala qoqobnaanta iyo tolnimada lagu jiha wareeray waxaa haboon in maahmaahdaas aan soo xusnay lagu badelo:

"**kabahaaga iyo saaxibkaaga wanaagsan midna lagama dhex baxo".**

T. "Kama dare Dagaal dheh". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Dagaal waa ka dare**", sababtu waa;

1. Waxay ila tahay in aanan sababta loo badelayo maahmaahdaan maanta is weydiinayn ee aan wada dareensanahay markaan dib uxusuusano tuu ina gaarsiiyey dagaalku,
2. Waxaan ku xusaynaa oo ku amaanaynaa dejinta maahmaahda nooceeda dambe ee aan hada ka dib raacayno Madaxweyne Maxamed Siyad Barre oo ku cataabay kolkii afarta gees dagaal looga keenay: "**War hooy, dagaal waa ka dare, waar hooy dagaal wiil baa ku dhintee wiil kuma dhasho**", Allow noo haboonaydaa in aan maalinkaa taladaas qaadano,
3. Waxay maahmaahdii hore ku salaysnayd dhaqan baadiyood ku abtirsanayey jaahilnimo iyo cawaanimo oo aysan dadku kala garanayn waxa u roon iyo waxa u daran, balse ay hadaladoodu mar walba ka tarjumayeen noloshii qallafsanayd ee ay ku jireen oo ahayd col iyo weerar joogto ah,
4. Maanta oo la joogo waxay maahmaahdu ku shaqayn kartaa in la yiraahdo: " **Dagaal waa ka Dare**"

J. "Kas dumar oo kadaloob rag kaaga dambeeyey kaad ku ogeyd maaha". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Kas Siyaasi oo kadaloob rag kaaga dambeeyey kaad ku ogeyd maahan"**. Sababtuna waa:

1. Waxaa xusid mudan in ay maahmaahdani tahay tii 4 aad ee igu kalliftay inaan diyaariyo qoraalkaan aan ku badelayo inta badan maahmaahooyinkii Soomaalida. Waxanan ku xaqiijiyey halgankii siyaasadeed ee 3 da sano

magaca "shirka dib u heshiisiinta Soomaaliyeed" uga socday Kenya, sanadihii 2002-2005. xilligaa oo siyaasiyiinta waa weyn ay kala shukaansanayeen siyaasiyiinta yar yar, iyaguna ay marba kii u dambeeya ama ujeeb buuxin bata iska raacayeen,

2. Waxay ku salaysnayd caddaalad xumo iyo tixgelin la'aan aragtida iyo dareenka qofka kale, waayo gabadhu waxay rag ka xulanaysay kii nolosheeda anfaci lahaa ee ay ku qanci lahayd, taasina waxay qasab ka dhigaysaa mar walba in ay kala haadiso kuwa la wada haasaawaya oo laga yaabo in ay kii ugu dambeeyey kala baxdo ka dib markuu cajabiyo oo buundo ku dhaafo intii ka horaysay oo dhan. Haddaba ninka maahmaahda dejiyey waxaa ka maqnayd in uu qiimeeyo dareenka qofka dumarka ah sida uu kiisaba u qiimeeyey,
3. Maahmaahdu way dhacday oo xilligaan gabdhuhu ma ahan kuwii hore ee shukaansiga intay la xishoodaan aamusnaan go'aanka ku gaari jiray ee waxay noqdeen kuwa horror ah oo kugula gorgortamaya "war hebel baan taa iyo taa ku raacayaaye, maxaad adigu isku haysaa"?,
4. Maahmaahdu waxay ka hor imaanaysaa mid kale oo sheegaysa **"Gabar kun baa koolisa kowna way kala baxdaa",** hadde inay maahmaahyadu is buriyaana kuma jirin xisaabtankeena, sidoo kalena in aan marna tan dambe ku maahmaahno marna tan hore nooma ahan daw iyo gar toona.
5. Waxaa qalad ah in ay maahmaahdu si qarsoon ugu adeegayso nooc keliya oo ah " haasaawaha – shukaansiga" halkii laga rabay in ay u adeegsami karto dhinacyo fara badan. Sidaa awgeed waxan ku kordhinay in loo isticmaali karo jiha walba oo ay ku haboon tahay.
6. Haddaba iyada oo taabanaysa dhedig iyo laboodba loona isticmaalayo dhinacyada kala duwan ee siyaasada, dhaqaalaha, bulshada, iwm. Ayaan gartay in loo qoro: **"Kas Siyaasi oo kadaloob rag kaaga dambeeyey kaad ku ogeyd maahan"**

X. “Kas waayeel kabbo isma dheera”. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: “**Kas waayeel intuu korriimadii ku kasbaduu is dheer yahay**”, waayo:

1. Maahmaahdu waa been, illeen hadaanaan is yeelyeelayn waan arkaynaa inay dadka waaweyni aad ugu kala duwna yihiin garaadka iyo kasmada,
2. Waxaa maahmaahdaan lala bar bar dhigi karaa oraah ah: “**waxaa la yiri waayeel waa kuma? Saa la yeh; waa anaga oon is yeelyeelayn**”, laakiin marka aan labadooda isu keeno oo wada akhrino waxay diiradda tafsiirku qabanaysaa in ay midood ka tarjumayso sida ay dadku wanaaga asaasiga ah u wada garan karaan hadaysan is yeelyeelayn, halka ay tan kale u fasirmayso in ay dadka waa weyni wada caaqil noqdaan kolkey da’ gaaraan,
3. Waxaa jirta xikmad ay Carabtu isticmaasho oo ah “Qofkii shey ku dhallinyarooba wuu ku duqoobaa” (***man shabba callaa shey’in shaaba calayhi***)
4. Waxay niyad jebinaysaa waayeelkii yaraantiisii ku soo kasbaday tacliinta iyo indheer garadnimada oo la duqoobaya xikmad iyo waaya aragnimo,
5. Dhanka kale waxay qiimo u yeelaysaa waayeelka noloshiisu iska ahaan jirtay shibanaan iyo fadhiidnimo ama ku soo dhamaystay taariikhdiisii falfalxumo iyo falaad iyo loofranimo aan faa’iido lahayn, taasina waa xaq darro laga gelayo xikmadaha,
6. Xagga kaska iyo garaadka waxaa lagu helaa laba dariiqo oo kala ah kasbasho iyo ku dhalasho, haddaba kii lagu dhashay waxaa badanaaba hareeya oo daboola marka la sii weynadaba kii la kasbaday. Sidaa awgeed waxaa ila qumanaatay in aan maahmaahda ka dhigno: “**Kas waayeel intuu korriimadii ku kasbaduu is dheer yahay”.**

KH. "Kheyr ha falin shar kuuma timaadee". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Khey fal shartuna kheyr ha kuu noqotee"**, waayo:

1. Waa maahmaah ku dhisan baas abuurnimo iyo burjuwaasinimo,
2. Waxay hirgelinaysaa xumaano iyo isu arxan la'aan dhex mara dadweynaha oo ugu dambaysta keena colaado iyo is gumaad, illeen markii kheyr samayn la waayo waxaa albaabka ka soo gelaya fidnadii oo geeso lehe,
3. Waxay ka soo hor jeedaa guud ahaanba tilmaamaha iyo tusaalooyinka diinta Islaamka oo ku dhisan Kheyr samayn/farid iyo shar reebid/joojin,
4. Marka aad kheyr fasho kii sharta kuu hayey ayaa qalbigiisu dhaqso ugu badelmayaa in uu isna shartii kaa weeciyo oo kheyr kuu sameeyo, waa tuu Allaha awooda sare lihi Qur'anka ku leeyahay: "Yaa ka hadal fiican midka dadka ugu yeera xariga Allah oo hawl wanaagsan uun fala, oo yiraahda Anigu waxaan ka mid ahay Muslimiinta. (ogow) Mana sina Xumaha iyo Samuhu ee fuli tan wanaagsan, markaas ayaa kii colaadu kaala dhexaysay kuu noqonayaa sokeeye iyo saaxiib ku jecele" (Qur'an: Fusilat: 33 – 34),
5. Waxa kale oo isla tabtaas wanaag falida u dhiiri gelinaya kutubtii hore ee Ilaahay soo dejiyey oo ilaa maanta ayey sidaa oo kale ku qoran tahay Baybalka,
6. Fikradaan dambe waxay aad u taageeraysaa aragtiyada cilmiga nafsaaniga ah ee ay cadeeyeen culimada aan Muslimiinta ahayni sida; Deel Kaarnaji, Aristootal, Suqraad, iyo kuwa kale oo badan,
7. Si looga hor tago cadawnimo iyo is reeb ku salaysan xaasidnimo loona dhaqna geliyo isu kheyr samayn iyo is xiriirin waxaan ka dhigaynaa maahmaahda sida ah: **"Kheyr fal shartuna kheyr ha kuu noqotee"**

D. Kibir Rag iyo Korriimo naagoodba waa lagu jabaa. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Kibir waayeel waa lagu kufaa korriimo caruurna waa lala kufaa**", waayo:

1. Waxay maahmaahdu ka tarjumaysaa casrigii jaahiliyada iyo cawaanimada,
2. Waxay salka ku haysaa faduul iyo garadarro ka sii xeel dheer xaqdarooyinka lagu hayo dumarka. Marka ay naagi korta macneheedu ma ahan in la jabay ee waa in la baraaray sida korriimada raggaba loogu baraaro, laakiin marka raga ama dumarkuba ay kibir awgii wax ku halleeyaan waa la jabay. Sidaa darteed korriimana loo siman kibirna loo siman ee yaan lab iyo dhedig loo kala qorsheyn,
3. Waxay si toos ah uga hor imaanaysaa aayadaha Qur'anka ee ay ka mid yihiin: "Marka loogu bishaareeyo midkood waxa uu Allaha Raxmaanka ah u masalayo (gabadh/hablo) wejigiisa unbaa madow qarin isaga oo walbahaarsan" (Qur'an: Jaathiyah: 17),
4. Jaahiliintii hore waxay ka welweli jireen in ay gurigooda gabari ku korto oo ay markaa xarun u noqdaan raga naaga doonka ah iyo kuwa naagaha waxyaalo xumaan ah ka sheega, sidaa awgeed ay u ban baxaan cawro socota. Laakiin Illaahay oo arintaa si kulul uga canaananaya ayaa Qura'nkiisa ku leh: "Marka loogu bishaareeyo midkood dhedig wuxuu noqdaa wejigiisu madow isaga oo walbahaaraya. Waxa uu iska qariyaa dadka xumida waxa loogu bishaareeyey awgeed. Suu (is leeyahay) ma isaga haystaa Dullinimo, mise ciidda ayuu dalaq ku siiyaa (aasaa), Alleylehe waxaa xumaaday waxay xukminayaan"; (Qaur'an: Al-Naxli: 58-59),
5. Waa in laga saaraa maahmaahda jinsi takoorka ka dhanka ah xuquuqda aadanaha oo la wadaajiyaa dhedig iyo laboodba in kibirkooda lagu jabayo oo laga dhaxlayo halaag,

6. Si maahmaahda loo kobciyo oo wax tar looga dhigo waa in dhanka caruurtana lagu xusaa laakiin wax u qalma lagu sheegaa, sidaa awgeed korriimadii dumarka looga hadlay wxaa ku haboon in looga hadlo caruurta oo lagu xusayo wixii dhib lagala kulmo korriimadooda, dhibkaasina waa in ay caruurtu kacaan kufaan oo keliya si ay ugu tababartaan socod,
7. Sidaa awgeed maahmaahdu waxay ku socon kartaa in loo qormeeyo: "**"Kibir waayeel waa lagu kufaa korriimo caruurna waa lala kufaa**".

K1. Kabo tolahaad kabo ka tolanayso kabihiisaa la fiirshaa. Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay. "**Misbaax minankeeda mugdi yahay minan dadow ma nuuriyo**"

R. "Kolba carradii la joogo camalkeeda ayaa la yeeshaa". Maahmaahdaan waxaa lagu badelay: **"Kolba carradii la joogo camalkaaga wanaagsan ayaa lagu soo bandhigaa**", waayo:

1. Waxay ku qotontaa maahmaahooyinka reer Galbeedka oo iyaguna ka shidaal qaadanaya munaafaqnimo iyo danaysi qof ahaaneed,
2. Waxay wax u dhimaysaa ujeedada Islaamka oo ah in meel kaste wanaag lagu muujiyo ee aan lagu raacin camalkii xun, balse lagu dadaalo sidii camalladooda xun wax looga badeli lahaa hadba intii karaanka ah,
3. Wuxuu Nabigu (NNKHA) yiri: "Ha noqonina iska hogaansamayaal -dameeri dhaan raacday (*laa takuunuu Amicaa*)". Sidaa awgeed ma haboona in hadaad tagto meel il laga wada la'yahay aad adiguna il iska rido sida ay sheegayso maahmaah kale oo qaldan oo iyadana aan isla qoraalkaan ku saxayno,
4. Waxay muujinaysaa doqonimo iyo naf xaqirid marka uu qofku halkuu tagaba isu dhiibo oo iska raaco isaga oon u kala aabayeelin sax iyo qalad toona,

5. Waxay boorrinaysaa fulinimo iyo isku kalsooni la'aan ay dadweynuhu wanaag u maleeyaan oo iska caadaystaan iyaga oo maahmaahdan u daliilsanaya,
6. Waxay hor istaagaysaa dariiqada lagu noqdo dadka adduunka ugu wanaagsan oo ah in wanaaga la faro xumahana la reebo, iyada oo raacaysa wadadii ay raaceen kuwii hore ee lagu halaagay inay dadka xumaha ka reebi waayeen balse ay kala qayb galeen xumaan samayntii,
7. Haddaba maahmaahdani waxay maanta ka dib noo ahaanaysaa: **"Kolba carradii la joogo camalkaaga wanaagsan ayaa lagu soo bandhigaa".**

## XARAFKA (L)

B."La jiifiyaana baanaan, la joojiyaana banana". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Jid bannaan Jidna Xaaraamsan**", waayo:

1. Marka la raaco sababtii lagu soo weriyey in ay ku samaysantay maahmaahdani waxaa la ogaanayaa in ujeedadii lagu sameeyeyba ahayd dulmi iyo boob xoolo dadow. Waxaa la sheegay in sheekh magaalo loo keenay goynta xukun lo' beer cuntay, markaa ayuu xukmiyey in mulkiilaha Lo'da laga qaado badar (raashin) miisaankeedu dhan yahay joogga ul kor loo qotomiyey - istaajiyey, laakiin markuu xukunkii riday ayaa lagu war geliyey in Lo'da beerta daaqday tahay Lo'diisii oo mulkiilaha laga rabo in uu qaan dhawga ul joogeed badar ah bixiyo isaga qudhiisa yahay. Markaa ayuu Sheekhii bilaabay inuu xiiladaysto oo yiri in halki horay usha looga joojiyey hada ay tahay in la jiifiyo, halkaa oo uu badarkii ka yaraanayo sacab mugiis. Ka dib markii la weydiiyey sababta uu qaabkii hore ee xukunka u badelayna waxa uu ku jawaabay: "La jiifiyaana banaan La

joojiyaana banaan'. Sidaa awgeed maahmaahda ama oraahdu waxay ku samaysantay khayaano dulmi iyo boob xoolo dadow,

2. Waxay u eg tahay oraahdu hadal is burinaya oo aan qof maskaxdiisu miisaaman tahay ka soo yeerin,
3. Waxay iska noqotay kelmad qosol ama maadays oo lagu jikaaro qofka arimaha isku dhex qalda ee aan warkiisu biyo dhac lahayn,
4. Waxay buuxisay boos maahmaahooyin muhim u ah bulshada oo nuxur laga faa'iidaysan lahaa,
5. Waxaa haboon in badelkeeda la geliyo maahmaah bulshada nafci u leh oo u noqonaysa waxbarasho iyo wacyi gelin,
6. Waxaa haboon in isla maahmaahdaan dadweynuhu ay ku xusuustaan in ay xaaraanta iyo xalaashu kala duwan yihiin oo midba dawgiisa leeyahay,
7. Sidaan dambe een u qormaynay waxayna waafaqaysaa Xadiiska Nebiga NNKHA ee yiri; "Xalaashu way cadahay Xaaraamtuna way cadahay, dhexdoodana waxa ku jira waxyaalo is shabahaya",
8. Sidaa awgeed waxaa maahmaahdaan loo badelay **"Jid bannaan jidna Xaaraamsan"**.

T."**Laba Bidde uurkay iska ogyihiin"**. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey oo gebi ahaanba waa laga saaray qaamuuska maahmaahooyinka Soomaaliyeed, waayo:

1. Kelmadda bide ee gundhiga u ah maahmaahda waa mid ka soo jeeda fikradihii isgumaysiga iyo duudsiinta xuquuqda aadanaha ee beryo hore ka jiray dalkeena sida ay dunida inteeda kaleba uga jireen. Waxaa kelmada ama magacbixinta bidde laga isticmaalaa gobolada Puntland ee Soomaaliya, waxaana Bidde loola jeedaa qofka, siiba ninka, loogu shaqaysto si adoonsi ah ee u jooga qoys ama qof uu u adeego, iyada oo qofkaasi uu ruuxaas Biddaha ah isaga leeyahay sidii xoolihiisa. Laakin maanta waa la soo dhaafay

xilligaas is gumaysiga iyo kala saraynta xaq darada ku dhisnayd oo umadaha oo idil waxay isula jaanqadayaan si siman mar haduusan dhaqaalahoodu kala reebayn. Waxay dumarka deriska ihi is weydiin jireen "heedhe baayo Bidahaan yaa iska leh? Maad maanta I daymiso? Baayo odagayga awoowkii baa iska lahaa oon ka dhaxalnay",

2. Sababta lagu sameeyey waxay ahayd in la dareemay inay nimanka Bideyaalka ah ee cido deris ah xoolo ahaanta ugu kala xaraysan ay iska war qabaan oo sheeda iska ilaashadaan, taasoo keeni kartay inay mararka qaarkood intay fursad isku waraystaan helaan isla qorsheeyaan dariiqad ay ku wada baxsadaan ama xataa isaga ridaan reeryada gumaysi ee dusha ka saaran,
3. Maanta waa Allah mahadiise dadkii loo yiqiinay Bidaha qaarkood waa madax maamullo sare haya oo la hoos joogo,
4. Waxaa haboon in maadaama uu nuxurkii iyo macnihii maahmaahdani dhamaaday, baguu u dhamaadaye, laga masaxo quluubta da'yarta soo koraysa si aysan maahmaahdu u reebin utun iyo eel dambe, isla markaana si ay da'da jirtaa isaga illoobaan waayahaas madoobaa iyo falfal xumooyinkii la soo maray, illeen waa taa aanu arkayno ilmihii gumaystayaalkii hore ee aabayaalkood kaga tageen Afrika oo dadkii ay shalay gumaysanayeen ka guursanaya oo u shaqaynaya haday dhaqaalaha ku dhaamaan,
5. Sidaa awgeed waxaa lagama maarmaan noqotay in gebi ahaanba maahmaahdaan laga takhaluso oo la illowsiiyo dadweynaha u geediga ah sidii ay nolol cusub oo casriga waafqsan u bilaabi lahaayeen. Haddii kale caruurteenu facood bay ka harayaan.

J. "Laba bugta isma baaniyaan". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay; "**Laba kala bugta ihi waa is baaniyaan**", waayo:

1. Waxaa dhici karta in qof qaba cudur uu daaweeyo qof kale oo isagu la xanuunsan cudur kale oo aan la mid ahayn kan uu isagu qabo,
2. Marka aan raacno kelmada baanin macnaheedu waa nafaqayn iyo dhaqaalayn qof diifoobay, ha ahaato jirro heshay ama gaajo dilatay. Waxaa kale oo lahjad ahaan lagu yiraahdaa "xaraarsimo", sidaa awgeed macnaha kelmada ubucda u ah maahmaahda ee "baanin" ma ahan mid qusaysa caafimaad,
3. Dhanka kale hadaan u raacno ujeedada maahmaahda inay tahay is baanin, waxan garan karnaa in ay suurta gal tahay in qof diifaysani baanin karo mid kale oo la mid ah, tusaale haweeney iyo ilmaheeda oo isku xaalad caafimaad ama isku xaalad gaajo kuwada sugan waxaa la hubaa in ay hooyadu baaninta ku bilaabayso ilamaheeda intaysan iyadu nafteeda nafaqayn. Sidaa awgeed maahmaahdu meelna ma haysato ee waa hadal af ka baxay,
4. Mar hadaan ogaanay inay suurtagal tahay in ay laba baan u baahan uu midiba midka kale baanin karo, waxaa muhim ah in aan maahmaahda ku soo duwano wadadeeda tooska ah,
5. Haddaba anaga oo jidkii maahmaahda abbaarayna ayaan u qormaynaynaa: "**Laba kala bugta ihi waa is baaniyaan**"

X. "**Labo walaalo ah wad kala qaad".** Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, sababtoo ah:

1. Waa laga yaabaa inay berigii hore dadka walaalaha ihi ul iyo diirkeed weligood ahaan jireen oo aysan sinaba ku kala go'in, laakin iminka arinkii wuu is badelay,

2. Dhibaatooyinkii nolosha ee hore ayaa isku qasbayey labada walaalaha ah illeen markastaba dooni bay wada saarnaayeen oo markii uu midkood dambi galo waxaa loo qabsanayey kan kale,
3. Duruufaha nololeed ee maanta jiraa waxay soo gaabiyeen noloshaas isku xirnaanshaha ah iyo dambiyadaas iyo ciqaabahaas wadarta ah (*collective crime and collective punishment*)
4. Maanta labada walaalaha ah mid walba goonidiis ayuu mas'uuliyad iyo waajibaadyo u gaar ah oo uusan kan kale waxaba kala qaban karin u dareemayaa, sidaa awgeed isku tashanayaa,
5. Maanta ma badna isu hiillintii iyo is wada difaacii keeb la yuururka ahaa ee ay intii is xigtaaba gooni uwada taagnayd ee dunida ayaa la kala galayaa,
6. Haddaba marka aan waxyaalahaas oo dhan eegno waxaa nala qumanaanaysa in aan maahmaahdaan cimrigeedii dhamaaday ka takhalusno oo sheegitaankeeda soo af jarno.

KH. "Labaatan jir aan waran kaa reebin wacad kaama reebo". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Labaatan jir weyrax ah waran iyo wacad toona laguma aaminee waano iyo wacdaro ayaa wax lagu tusiyaa**", waayo:

1. Haddaan ku horaysiino kelmada Waran ee gunta u ah qormada maahmaahda waxan dareemaynaa in maanta laga baxay isticmaalkii waranka oo magiciisa ay xusuustaan oo keliya odayaashii soo gaaray, sidaa awgeed way suuban tahay in isticmaalka waran laga qaado meesha,
2. Marka aan eegno ujeedada maahmaahda waxaan helaynaa in labaatan jiradii hore ee ku korayey casriga jaahiliga ihi ay ahaayeen kuwa axmaqnimadoodu sarayso oo aan caqli celin ee waranka laga hor geyn jiray,
3. Marka aan ka eegno dhanka diinta waxaan aragnaa inay maahmaahdu yaraynayso awooda iyo adkaanta wacadka iyada oo heerkiisii geynaysa

waranka, sidaa darteed waa in wacadka la qiimeeyaa warankana la awood tiraa,

4. Haday dhalinyaradii hore ahaayeen kuwa u taagnaa dagaal iyo fidno waa in kuwa maanta jira oo iyagu heerkii hore ka wanaagsan loo jiheeyaa dhinaca kale ee samaha,
5. Maadaama aysan odaydii hore ku xeel dheerayn cilmiga nafsaaniga iyo tarbiyada da'yarta waxay ka baaqsadeen inay dhallinyarada kala saaraan oo ujeedadooda ku cadeeyaan kuwa fawdada noqda marka ay xilligaas joogaan, waxayna dusha eed ka wada saareen guud ahaanba dhallinyaro,
6. Waxaysan maahmaahdu markii hore qeexin sababta ku keenaysa qofka dhalinyarada ah in uu dagaal u taagnaado oo uusan wanaaga tixgelin, laakiin qormada dambe ee maahmaahda ayaa taas si toos ah looga dareemi karaa,
7. Si loo hirgeliyo isticmaal maahmaah cilmiyeysan oo waafaqsan habsami u socodka nolosha waa inay maahmaahdani ka tarjuntaa tusaalayn iyo tababarid dhalinyarta soo koraysa,
8. Qaabka dambe een u qormaynay maahmaahda waxay ku salaysan tahay tacliim isugu jirta diini iyo cilmi nafsi oo ah sida qofka dhallinyarada ah ee ku jira xilligiisii kacaanimada (*adolescent age – marxalatul maraahiqah*) loogala dagaallamo dhaqanka anshax xumada iyo fidno samaynta ah (*violence behaviour*),
9. Kelmadaha aan ku soo kordhinay maahmaahda oo ah " weyrax, wacdaro, waano, aamin, iwm) waxay kulligood soo jiidanayaan dadaal wacyigelin bulsho oo lama huraan ah,
10. Sidaa awgeed waxay qormada dambe ee maahmaahdu ku guulaysatay inay wax xumaaan ahna reebto wax samaan ahna farto fulintooda.
11. Taas ayaa keentay in maahmaahda loo qormeeyo: ""**Labaatan jir weyrax ah waran iyo wacad toona laguma aaminee waano iyo wacdaro ayaa wax lagu tusiyaa**"

D.”Libaax nin aan aqoon baa lax ka rita”. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: “**Xeer nimaan aqoon baa Xoolo ku dhacsada**”.

i. Libaaxa oo u badan maahmaahooyinka Soomaaliyeed waa bahal dilaa ah oo ay dadkeenu berigii hore la noolaan jireen oo ka mid ahaa waxyaalaha ay maalin walba la kulmayeen, laakin maanta waa laga koray la macaamilkiisa,
ii. Laxda qudheeda maanta in yar baa dadkeena la nool oo shacabkii waxa uu soo degay magaalooyinka hab dhaqandhaqaaleedkoodii awal ku salaysnaa laxda iyo libaaxa laga ilaalinayeyna waxa uu isu badelay shaqo xafiis ama ganacsi oo laga ilaalinayo dayac iyo waayitaan laguna ilaalinayo xeer iyo nidaam,
iii. Sababta loo yiri Libaaxa dad qaadka ah waxaa inta la dagaalamo lax uu ka qaatay ka ceshada nin aan ogeyn awoodiisa iyo heerkiisa waxyeelo oo kala hortaga indha adayg ku dhaliya in u Libaaxa qudhiisu naftiisa uga baqo. Laakin badelkeeda waxaan maanta ku sifayn karnaa qofka aan waxba kala socon sharci ama xeer wadan uyaalla oo isaga oon wax weyn u arkin isaga xad gudba, isla markaana ku dooda anigu waxaad sheegaysaan warba uma hayo,
iv. Sidaa darteed waxaa haboon in maahmaahdaan laga soo celiyo dadkii hore ee dejiyey loona soo celiyo dadka cusub ee hadda jira ama hadda ka dib imaan doona,
v. Haddaba marka intaas la eego waxaa la garan karaa in ay maahmaahdani ku quman tahay in loo qormeeyo: “**Xeer nimaan aqoon baa ku xad gudba”.**

R. “Lo’ uli ma arooriso ee oon baa arooriya”. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: “**Qoolleey qoor qabad biyo kuma cabto**”.

1. Isticmaalka Lo’du maanta waa yaraaday sidaa awgeed waa in maahmaahyada ka hadlana la yareeyaa oo loo qalloociyaa wixii baddelkeeda la isticmaalo,

2. Inta yar ee maanta Lo' isticmaashaa ceelba uma arooriyaan ee seero halkay degan yihiin ku dhaw bay ku ilaashaan kuna waraabiyaan,
3. Waxaa waayadaan isticmaalkeedu batay digaagad iyo shimbir qoolley oo u baahan in iyagana saaxada maahmaahyada Soomaaliyeed la soo geliyaa illeen waxay ka mid noqdeen xooleheena ana dhaqan ahaan u leenahaye,
4. Si aan u helno maahmaah toos u waafaqsan nuxuruka tii hore een masaxnay waa in aan ujeedada ku cadaynaa in aan waxna ama cidna wax aysan rabin lagu qasbi Karin,
5. Sidaa darteed waxaan maahmaahda u qormaynay "**Qoolleey qoor qabad biyo kuma cabto**" oo iyada qudheedu ah maahmaaho magaaleed uu istcimaalkeedu horay ubilaamay ee aanan anigu iminka soo bidcaynin.

## XARAFKA (M)

B. "Maaweelo ma bogsiiso meel ku bugta"**.** Maahmaahdaan waxaa lagu sii daray qayb kale waxaana laga dhigay: **"Maaweelo kuuma bogsiiso meel ku bugta waase ku moodsiisaa"**, waayo:

1. Sideeda hore waxay u ektahay in markii hore ay mid ka soo horjeedkeeda ah hirgeliyeen dad aan ahayn kuwa tan hirgeliyey, kuwaasina waxay u ekaayeen kuwo kuwaan dambe ka indheer garadsan,
2. Waxaa suurta gal ah in qof meel bugta uu ku hilmaamo ama ku illaawo maaweelo iyo madadaalo lagu mashquuliyey, sidaa awgeed maahmaahda maah maah kale ayaa ka horaysay ee ha la soo baaro,
3. 100% run ma ahan oo waxaa jirta in xataa daawooyinka la qaato intooda badani ay yihiin xanuun baabi'iye aan wax kale ahayn ee ah in uu qofka

maaweeliyo tiiyoo uu xanuunkiina iska sii socdo laakiin uusan dareemayn isagu,

4. Waxaa iska caadi ah in bukaanka lala joogo oo loo sheekeeyo si loo maaweeliyo iyada oo laga ilaalinayo inuu xanuunka dareemo ama is calool xumeeyo,
5. Dhabtii waxaa inoo cad in ay waxun dawr ah ku leedahay maaweeladu bogsiinta qof ay meeli xanuunayso xubintay doontaba ha ahaatee,
6. Si aan hadaba fikradaha isu waafajino waxaa nala gudboon in aan maahmaahda u qormayno: "**Maaweelo kuuma bogsiiso meel ku bugta waase ku moodsiisaa".**

T. "Maba dhalane dhawrtaysan okaa". Waxaa laga dhigay: "**Maba dhalane dhaqaaqi okaa**", waayo:

1. Kelmada dhawrtaysi waxaa lagu isticmaali jiray dhaqanka sanduuqa dhaqaalaha qabiilada ee baadiyaha oo shabahayey sida midka ay haweenka magaalooyinku maanta si gaar ah u isticmaalaan ee loo yaqaan " ayuuto". Laakiin maanta meelna lagama isticmaalo oo waa la wada illaaway. Sidaa darteed waxaa lagu badelay kelmada ah" "dhaqaaq' oo waxaa maahmaahdii loo baddelay: "**Maba dhalane Dhaqaaqi okaa**".

X. "Magac iyo lacag dadka waa dooriyaan". Maahmaahdaan waxaa laga badelay kelmadda ah "dadka" oo laga dhigay '**doqon**". Waxaana maahmaahda loo qormeeyey: "**Magac iyo lacag doqon waa dooriyaan**", waayo dadoo dhami isku mid kama ahan xaaladda doorsoonka duni raaca iyo calool la cayaarka ah.

KH. “Ma sugto meher ma leh ninkeedana marqaati ma galo”. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: “**Ma sugto meherkeeday isa seejisaa, ninkeedana magacay ka xumaysaa**”, waayo:

1. Inkastoo ay canaan u ektahay, maahmaahdu waxay labadeeda ujeedaaba uga soo hor imaanaysaa tacaaliimta iyo shariicada Diinta Islaamka,
2. Cidina ma dhaafin karto naagta meher ay xaq u yeelatay mar haddaan iyada ama weligeedu cafin. Ilaah baa yiri: “Hadaad furtaan Haweeney idinkoon u galmoon aadse waxun meher ah u goyseen waxay xaq u yeelanaysaa intaad u goyseen barkeeda in ay idinka cafiyaan mooyaane ama uu idinka cafiyo midka uu gacantiisa nikaaxu ku jiro (weligeeda)”: (Qur’anka: al-Baqara: 237),
3. Way jirtaa haday iyadu xad gudub la timaado oo iska tagto in la weydiisan karo “*khuluc*” (eeg axkaamta Shariicada”, laakin hadana lalama jahri karo in tii degdegtaaba meher laay noqonayso,
4. Qaybta labaad e emaahmaahda waxay tusinaysa axad gudub toos ah oo ka dhan ah ninka ay ku xumaatay naagta ma sugtada ihi. Ninkani marqaati wuu gala,
5. Nina martqaati fur looga reebi karo in ay naagtiisu xuntahay ama uu furay awgeed. Sidaa darteed maahmaahdu waxay gudbinaysaa farriin qalad ah oo aan loo baahnayn inay sii faafto,
6. Waxay u ekaanaysaa in la isku dhex qaldayo dhaqankii iyo diintii, ueejadad laga hadlayna waa mid diini ah ee ma ahan mid dhaqan keliya looga hari karo,
7. Sida dambe een u qormaynay waxay si dadban ula dagaalamaysaa
8. Sidaa awgeed waxaa haboon in maahmaahda dib loo habeeyo iyada oo la waafajinayo diinta iyo noqlosha casriga ah ee dhabta ah.
9. Haddaba iminka wixii ka dambeeya waxay noqonaysa maahmaahdani: “**Ma sugto meherkeeday isa seejisaa, ninkeedana magacay ka xumaysaa”**

6. **“Meel aan rag joogin Rabbi ma joogo”**. Maahmaahdaan waa la baabi’iyey, waayo:

    i. Waa dambi weyn in Rab iyo Rabbi inta meel la isugu keeno hadana Rag la hormariyo oo la qiimo geliyo,
    ii. Dambigu waxa uu gaarsiisan yahay in Rabbi laga dhigo mid raga ka dambeeya oo meeshay iyagu joogaan oo wax ka qabtaan keliya jooga sidii in uu kalkaaliye u yahay (bal dhab ugu fiirso maahmaahda)
    iii. Dambigeeda ka sokow wax macno ah oo ay soo kordhinaysaa ma jiraan ee waa hadal wedkii galay oo dambi iyo cadaab kuu soo jiidi kara hadaad ku dhawaaqdo.
    iv. Sidaa awgeed waxaan gartay in gebi ahaanba macno ahaan, nuxur ahaan, iyo jiritaan ahaan intaba loo baabi’iyo oo aan warkeeda dambe la maqal si aan umadda loogu fidnayn.

R. “**Meel boqor joogo gacantaadaa la ilaashadaa, meel caalin joogana carrabkaaga, meel weli joogana niyaddaada”**. Maahmaahdaan labadeeda qaybood ee hore waxaa lagu nasakhay: **“Hadaad Caqli yar tahayna aamuskaa lagu kaashadaa hadaad Cilmi yar tahayna cibaadadaa lagu kaashadaa**”, laakiin qaybta saddexaad ee ugu dambaysa gebi ahaanteedaba waa la baabi’iyey, waayo:

1. Saddexda ujeedo ee ay xambaarsan tahay maahmaahdani way wada qaldan yihiin, tan ugu dambaysaaba ha ugu sii darnaatee,
2. Haddii dadka lagu dhiiri geliyo inay meeshii Boqor joogo keliya isku dhawraan oo edeb ku yeeshaan, iyaga oo meelaha kalena gacantaa furan u dhaqmaya waxay noqonaysaa dambi iyo xasarad laga dhaxlo aakhiro iyo aduun beel labadaba,

3. Haddii la cabsi geliyo qofkii fikradiisa ku cadaysta meel uu mid ka tacliin badani joogo oo laga xishoodsiiyo, waxay dhaxlaysaa in uu inta qofku u arkayo mid ka tacliin rooni joogana aamusnaado markuu tagana uu kuwii isaga ka sii cilmiga hooseeyey kula dhex dhaco wax uusan aqoon ku hubsan,
4. Waxay diidan tahay in uu qofku aqoontiisa kororsado isaga oo soo bandhigaya inta uu yaqaan si uu kii ka badiyaana ugu sii daro in kale ama ugu saxo inta uu bawsaday ee sida qaladka ah u fahamsan yahay,
5. Marka aan u fiirsano qaybaha koowaad iyo labaad ee maahmaahda sida aan u badelnay waxaan arkaynaa in aan jid wanaagsna ku soo duwnay maahmaahda inaga oo barayna qaabka loo kordhisto caqliga iyo cibaadada labadaba,
6. Halkii boqorka iyo xukunkiisa waxan ku badelnay "caqli" oo aan dareemi karno in uu yahay mid ay maanta dadkeenu fahamkiisa uwada baahan yihiin. (faahfaahin dheeri oo caqliga ku saabsan waxan kaga hadlay Buugayga ah " Mushkiladeenu waa Caqliga iyo weliba faafinadaydii rasmiga ahaa ee aan ku qaybin jiray madashii shirkii Kenya ee 2002 –2005 oo aan ka mid ahaa Murashaxiintii madaxweynenimada",
7. Si uu qofku caqli badan u kororsado waxan ku dhiiri gelinay "aamusnaan iyo ka fiirsasho" ka ilaalinaysa hadfaanimada illeen soo boodka iyo fudaydku waa waxyaalaha ugu horeeya ee wax u dhima korriimada caqliga iyo barashada ama fahamka,
8. Si aan dadweynaha ugu dhiiri gelino cibaada Eebbe waxan garanay in qofkii ka masayrsan mid ka cilmi badan uu ku dadaalo siduu ugu hormari lahaa cibaadada, marba haddii looga hormaray barashadii cilmiga. Laakiin taas waxan ka sii digi lahaa in ay masayrahaas ujeedadiisu noqoto is tus tus iyo ha lagaa sheego,
9. Qaybta ugu dambaysa ee maahmaahda waan tir tiraynaa waayo waa dambi Ilaahay laga galo kan ugu weyn ee ugu khatarsan oo ah "SHIRKI" – Ilaahay oo cibaadadiisa cid kale lala wadaajiyo. Taas haddaan sii

bayaaniyo waa in niyada qofka uu Allasha awooda sare lihi keligiis daalacanayo oo ogyahay wax ku jira ee ku qarsoon, hadaadse cid kale u malayso in ay niyadaada ogaan karto waad gaaloobaysaa oo waxaad gelaysaa dambiga koowaad ee Ilaahay laga galo oo ah in cibaaddiisa wax kale lala wadaajiyo,

10. Haddaba maahmaahdaan qaybteeda saddexaad ee ugu dmabaysa waan ka takhalusnay, laakiin labada qaybood ee hore waxan u badelnay sidatan: **"Hadaad Caqli yar tahayna aamuskaa lagu kaashadaa hadaad Cilmi yar tahayna cibaadadaa lagu kaashadaa".**

S. "**Midgaan kabo tol, kana kabo la'aa"**. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey gebi ahaanteedaba. Waayo:

1. Midgaan waxaa la oran jiray waagii hore:
    - Dadyowga looga adkaaday dagaaladii axmaqnimada ahaa ee qabilaysiga ee ka socon jiray geyigeena ee maanta ka soo reebay Soomaaliya tira ka yar 4 malyan (inta dalka ku sugan). Bal eeg tira koobtii laga qaaday Kenya iyo Soomaaliya kolkii xornimada in la siiyo loo diyaarinayey. Kiiba waxa lagu qiyaasay 6 malyan laakiin maanta Soomaaliyana waxa lagu qiyaasi karaa 4 malyan Kenyana lixdan kii ayey afka la sii gelaysaa, taasna waxa u sabab ah dhimashada ku timaada xabada iyo gaajada oo Soomaaliya gumaaday.
    - Dadyowga iyaga oo ka soo cararay cadawgooda soo magan gala qabiilooyin kale oo xoog badan oo laga yaabay inay ciil hore u qabeen, deedna ay gumaystaan.
    - Dadyowgii isku dayey in ay farsamada gacanta ku shaqaystaan iyaga oo ka duulayey horumarkii bilowga ahaa ee ay waayahaas dunidu kuwada tillaabsatay, deedna inaty gumaysiyadii dawladaha reer Galbeedku yimaadeen ay dadkii ku direen oo midgaamo ugu yeera ku

qalqaaliyeen si ay u cuuryaamiyaan ama uga hortaagaan wax horumar farsamo (*technology*) ah oo ay gaaraan qawmiyadani.

2. Haddaba anaga oo ka duulayna qodobka ugu dambeeya ee ay ku baxday Midgaanimadu ayaan cadaynaynaa inay taasi ka mid ahayd qisooyinkii foosha xumaa ee la wadi jiray waagii casru-jaahiliga, maantana laga galti baxay, sidaa awgeed ay lagama maarmaan tahay in wixii maahmaaho ku soo arooray magacaas ama shaqadiisa laga takhaluso.
3. Maanta kabaha waxaa tola dadka lacagta badan leh ee taajirnimada shafka u tumay ee lama joogo xilligii ay toli jireen dhawr qof oo gacan ku gabad ah lana yaso. Waxaa xusid mudan in aan halkaan ku soo qaato qiso dhacday oo maadaysi noqon karta; oday ka yimid gobolada dhexe ee dalka ayaa akhriyey tabeelaha dukaan weyn oo ku yiilay Xamarweyne ayna ku xardhanayd "Kaba tolaha sare ee Xaaji Shariif". Wuu yaabay, deedna isa soo maqiiqay oo dukaankii soo galay, kuna qayliyey: "war Xaaji ciyaala suuq baa dukaanka kaaga qoray Kaba Tole ee bal kaalay eeg". Laakiin dukaanlihii intuu soo booday ayuu ku yiri; 'haa kabatolaha sare ani waaye, maxaan kaa gedaa?". Tan waxan usoo qaatay heerka la kala joogo oo ah in **wixii nin la tuur leh nin la toosan yihiin ama camalkiisaba yihiin**.
4. Maanta dadka kabaha tolaa kama kaba la'a haday taasi beri hore jiri jirtay ee waxay ku labistaan noocyada kabo ugu qaalisan illeen lacag badan bay ka sameeyaan kaba tolide.
5. Haddaba mar hadaan dhammaan kelmadihii ay ku qotontay maahmaahdani mid mid u duminay maxaan ka sugaynaa sii taagnideeda maan iyada oo dhan baabi'ino?.

T. "Meel walba ka muuqo muraad raagay ku gaarsiisaa'. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Meel walba ka muuqo waa lagu muunad beelaa"**, waayo:

1. Haddaad maalin walba meel iska timaado adiga oo aan wax dan ah ka lahayn, waxaa laguu arkayaa baagamuudo aan shaqo ka dhicin, waxaana daraadaa darbigaad soo istagato loogu qorayaa "fadlan hadaadan camal lahayn halkaan waqtiga ha ku lumen".
2. Inkastoo ay run tahay in marka ay arin culusi meel jiiro ah sida xaafiisyada dawladaha musuqmaasuqa ku dhaqda kaa gasho oo aadan ka soo saaran Karin ilaa aad maalin walba isa soo muujiso, hadana waxaad ogaataa in laguu arkayo qof liita oo dawarsanaya/ tuugsanaya. Dhibaatooyinkaas ka yimaada muraad ka dhamaysashada dunida seddexaad ee musuqmaasuqa caadaysatay waxaa iyadana laga sameeyey maahmaah kale oo ah "**Muraadka magaalo kaa gala muraayad baa kaa xigta**", taas oo tusinaysa in ay madaxda iyo shaqaalaha xaafiisyada ee aan haysan mushaaro ku filani kaaga dhigayaan muraadkaagii dhaan daba gaalle oo weligii kuu muuqda asaadan gaaraynin, inkasta oo beryahan la caadaystay meelaha qaarkoodna laba sharciyeystay wax loo bixiyey mukhalas.
3. Maahmaahda dambe waa mid la qabsan karta dhaqanka magaalada oo la wada fahmi karo, sidaa darteed waxan la tartansiinay ayna ka guulaysatay mid kale oo iyadu kaga dhaw dhaqanka baadiyaha ahna "**Meel Saantaadu ku badan tahay suuradaadaa ku lunta**".
4. Sidaa awgeed waxay xikamadani ku soo af jarantay in laga dhigo "**Meel walba ka muuqo waa lagu muunad beelaa".**

M1. "Marrey dumar meel ay ka talisay murrug maarug baa u dambaysa". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: "**is miidaamin marqaanle murrug maarug baa u dambaysa**"

**Misbaax minankeeda mugdi yahay minan dadow ma nuuriyo?**

**XARAFKA (N)**

B. “Naag ama ha ku dhasho ama ha kuu dhaxdo”. Maahmaahdan waxaa lagu nasakhay: “ **Naagi ama nin bay dhashay ama nin bay u dhaxday ama nin bay la dhalatay ama nin baa dhalay**”, waayo:

1. Asal ahaanba maahmaahdu waxay ka tarjumaysaa edeb daro iyo falfalxumo ku fir leh dhaqan jaahiliyeedkii hore.
2. Wuxuu qasadka maahmaahdu yahay in la dhibaateeyo guud ahaanba jinsiga dumarka, iyada oo laga reebayo tii ku dhashay iyo tii kuu dhaxday – aad qabto.
3. Waxay waafaqaysaa maahmaah gaaleedka ay Talyaanigu ku maahmaahaan; “*donna e danno anche sorella-tuoi*”, waayo labada maahmaahoodba waxay isku raaceen in dumarka la dhibaateeyo xataa walaashaa haday tahay, iyaga oo ka gaabsaday hooyada iyo xaaska oo keliya.
4. Waxay ka soo horjeedaa asal ahaanba diinta Islaamka oo caddaaladeeda ku gaarsiisan in markaste dumarka xaqooda laga dhigo kan horeeya (*ladies first*), taas oo caalamku uu oraah ahaan maanta gaaray laakiin ficil ahaan weli dhiman. Waatii markii Nabiga NNKHA tee Saxaabigu weydiiyey isaga oo uga dan leh in uu Muslimiinta baro: “Nabi Allahow, yaa xaq igu leh? Uu ku jawaabay; Hooyadaa. Suu waydiiyey Hadana yaa kale? Suuye: Hooyadaa. Markaa ayuu hadana mar sadexaad ku celiyey dabadeedna yaa kale? Suuye Hooyadaa. Markaasuu hadana ku sii celiyey dabadeedna? Markaa ayuu kolkii afraad ku jawaabay; Aabahaa”. Haddaba Hooyadu waxay Aabbaha dheer tahay xuquuq dhan saddex jibaar.
5. Waxay ka soo horjeedaa Xuquuqda aadanaha ee caalamku ku heshiiyey iyo ilbaxnimada cusub.
6. Sida dambe een u qormaynay waxay la dagaallamaysaa fikradaha qallafsan ee dulmiga dumarka ka dhanka ah lagu banaysto.

7. Halkay tii hore dulmi ka tilmaamaysay tan dambe waxay ka tilmaamaysaa ixtiraam iyo qadarin oo waxay xusaysaa in Naag kaste ay mudan tahay in loo ixtiraamo sidii hooyada iyo xaaska illeen kolley nin bay ama dhashay ama u dhaxdaye.
8. Qormada dambe waxay ku kordhisay maahmaahda qayb saddexaad iyo afraad oo sheegaysa inay Naag kaste nin uu la dhalatay ama ugu yaraan uu nin dhalay. Sidaa awgeed ay walaashuna ku jirto xushmad siinta hooyada iyo xaaska oo kale. Halkaana waxaa ka soo baxaya in Naag kaste looga xishoodo si loogu helo tixgelin iyo dhawritaan hooyada, xaaska iyo walaasha.
9. Qaybta saddexaad ee lagu soo kordhiyey waxay kale oo dhamaystiraysaa ka run sheegida maahmaahda oo haday jirto Haweeney aan nin iyadu dhalin uusan nina qabin, waxay noqonaysaa in uu nin la dhashay. Hadiise ay dhacdo in aan nina la dhalan waxaan cidina beenin Karin in nin dhalay iyada.
10. Sidaa darteed qaybta 3 aad way kordhisay run sheega xikmada qaybta 4 aadna wayba dhamaystirtay oo shaki bixisay.
11. Kelmada u dhaxday oo ah luuqaddii hore waxaan hadana usii isticmaalnay qurxinta oraahda iyo xikmadda laakiin waxan saarnay tafsiirkeeda oo ah "xaas".
12. Sidaa awgeed waxan maahmaahda u badelnay sidatan: "**Naagi ama nin bay dhashay ama nin bay u dhaxday ama nin bay la dhalatay ama nin baa dhalay".**

T. "Naag been baa lagu soo xera geliyaa runa waa lagu dhaqaa". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Naag run baa lagu soo xera geliyaa runa waa lagu dhaqaa**", waayo;

1. Waa been iyo khayaano la cadaystay iyadoo aan geedna loogu soo gaban,
2. Waa dambi iyo xasarad loo bareeray,

3. Waa aakhira beel qofkii u bareera ku hogaaminaysa cadaabtii Jahannama
4. Waa guri dumis iyo guur fasahaadin ku magac baxaysa ama ku dugaalaysa guri dhismo iyo guur abuur,
5. Waxay si toos ah u burburinaysaa dhaqaalaha, dhaqanka, iyo sharafta labada is guursanaysa illeen waa khayaano loo bareeray oo marka qofka la khayaanayaa uu dareemo uu ka gilgilan doone,
6. Sida dambe een uqormaynay waxaa lagu gaarayaa oo nafsada lagu barayaa run sheegid, run ku dhaqasho, run ku dhaadasho, iyo run isu dardaarmid abuuraysa samafal iyo niyad wanaag oo ah ka soo horjeedka sidii hore.
7. Tan dambe waxay si toos ah uga tarjumaysaa awaamirta iyo tacaaliimta Islamaka.
8. Tan dambe waxay ka run sheegaysaa xaqiiqada dhabta ah ee dhismaha reer midaysan.
9. Arimahaas oo dhan awgood waxaa lama huraan noqotay in maahmaahdaan loo badelo: "**Naag run baa lagu soo xera geliyaa runa waa lagu dhaqaa".**

J. "**Naag iyo xoolo hadba waa kii reerka u horeeya".** Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Waa edeb darro iyo aflagaado aan geedna loogu soo gabban oo ka dhan ah dumarka,
2. Waa dambi laga gelayo Allaha umadaha abuurtay oo lagu duudsiinayo xuquuq aadane,
3. Waxay xumaanta maahmaahdu gaarsiisan tahay heer ay dad iyo duunyo isla sinto,
4. Maadaama ay aflagaadadeedu aad u culus tahay waxaan si hal haleel ah uga saaraynaa maahmaahooyinka iyo xikmadaha Soomaaliyeed.

X. "Naag ninkii xariir u gogla xanan bay u gogoshaa", ninkii xanan ogoglana xariir bay u gogoshaa". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Qofkaad xariir u gogoshaa xariir buu kuu goglaa kaad xabaal ujiidaana xabaal buu kuu jiidaa"**, waayo:

1. Waa aflagaado iyo been abuur lagu been abuuranayo dumarka nooc kaste ooy yihiin,
2. Kolley waxay maahmaahdani baxday markii ay dumarka iyo ragu ku jireen colaadaha daaimiska ah ee ay dumarku ku jireen harjadka is xoreynta ah. Xilligaas ooy dhici jirtay inay nin kaste xumayso laakiin kii ay ka baqayso ka gaabsan jirtay si ay nafteeda iyo sharfteeda uga badbaadsato, laakiin maanta dumarku si toos ah bay dagaal ugu wajihi karaan qofkii gardaraysta,
3. Tafsiirka Xikmad ku sheegga oo ah "hadaad naag axsaan u gasho dhib bay kuugu abaal gudaa, hadiise aad dhib ugeysato axsaan bay kuugu badeshaa" waa mid qalad iyo been ah, ka dib markii tijaabooyin badan lagu eegay,
4. Nin iyo naag qofkii xun ee xarig lama sitaan ah labadaba way ka suurtowdaa in uu wanaagii loo galo xumaan uga jawaabo, xumaantii loo geystana wanaag uga jawaabo, laakiin way yaryihiin bani aadamka noocaas ihi, badanaaba wayna jiran yihin oo dad dhamaystiran ma ahan,
5. Si eedda dad xumayaashaas aan dumarka keligood looga dhigin waxaa habboon in maahmaahda lagu leexiyo labada jinsiba – lab iyo dhedig,
6. Si kelmada Xanan oo aysan dadku wada fahmayn maadaama isticmaalkeedii looga soo tagay baadiyaha oo ay ku egtahay jiilka iminka da'da weyn ku jira, waxaan ku badelnay kelmadda Xabaal oo iyaduna wax ka badelaysa qaabkii ay maahmaahdu u dhignayd, laakiin macnihii iyo nuxurkii ayaa isku si ku imaanaya. Sidaa awgeed waxaan dooranay kelmada Xabaal oo loola jeedo qofkaad xumaysaa wuu ku xumayn isna mar ay ahaataba,

7. Si maahmaahda looga dhigo mid sama ka talis ah oo aan wax xumaan ah dadweynaha xusuusinayn waxaa haboon in aan u badelno qaab ah in qof walba waxa uu mutaysto ay dadku kula dhaqmayaan,
8. Arimahaas dartood waxaa la gartay in maahmaahdaan loo qormeeyo: **"Qofkaad xariir u gogoshaa xariir buu kuu goglaa kaad xabaal ujiidaana xabaal buu kuu jiidaa".**

Kh. "**Naag waa balaayo loo baahan yahay"**. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Waxay baxday xilligii ay dumarka caalamku meel kaste oo ay joogaanba ku jireen halgankoodii xornimo doonka ahaa oo ay labaca ka qaniini jireen raga noocuu doonaba ha ahaadee,
2. Dhibaatooyinkii ay waayadaas dumarku samayn jireen, hadayba jireen, waxaa muuqata in aysan maanta u badnayn illeen wixii ku kallifayey waxay ahayd isku day xornimo doon, maantana waxay dareemayaan inay gaareen ugu yaraan qayb ka mid ah xornimadoodii oo waxaa soo baxay rag iyo dumar badan oo xaqooda u dagaallama,
3. Haddaan iska dhaafi lahayn maahmaah ku sheeggaan waxay keeni kartaa in ay dhiiri geliso colaad ay dumarku raga ay la noolaan lahaayeen u qaadaan, iyo colaad ay raga qudhoodu iyaga u qaadaan,
4. Waxay kale oo hirgelin kartaa yasmo iyo liiditaan ay raggu caadaystaan iyaga oo waliba dareemaya inay la noolaanshaha Naagta dhibaato uun kala kulmayaan,
5. Waxay ka soo horjeedaa asal ahaanba ujeedada iyo awaamirta Diinta Islaamka,
6. Waxay si toos ah gaar ahaan uga soo horjeedaa Xadiiska uu Nabigu NNKHA tee ku yiri: "Adduunyadu kulligeed waa Cagaar iyo Raaxo, Raaxadeedana waxaa ugu kheyr badan Haweeney wanaagsan".

7. Waxay toos uga soo hor jeedaa waaqica iyo ilbaxnimada casriga ah ee socota.
8. Waxyaalahaas awgood waxaa la gartay in maahmaahdaan la masaxo lagalana dagaallamo kuwa qaldan ee weli sii adeegsanaya.

E. **"Naag waa dhallaan raad weyn"**. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Waa been iyo xaqiraad ku dhisan gumaysi iyo doqonimo,
2. Waa dambi laga gelayo Xag Rabbi illeen waxaa lagu duudsiinayaa xuquuq aadane mar haddii la yasayo qof Aadane ah. Ilaahay baa Qura'ankiisa ku leh: "Kuwa Xaqa rumeeyow Ragna yuusan Rag yasin waaba intaasoo uu ka kheyr badan yahaye, Haweena yeysan Haween yasin waaba intaasoo ay ka kheyr badan tahaye, Hana ceebaynina naftiina, Hana isugu dhawaaqina Naynaaso xun, waxaa baas leh magaca faasiqnimada rumayn ka dib, Ciddaan Tawbad keenina waa daallimiin": (Qur'an: Al-Xujraat: 11)
3. Waa dambi iyo marin habaabis laga gelayo xaqiiqada dhabta ah ee jirta oo shacabka ayaa lagu faafinayaa wax aan sal iyo raad toona lahayn welibana aan shaqayn Karin,
4. Waa dhalanteed iyo maaweelo aan waxba tarayn balse qeexaysa nacasnimo iyo maangaabnimo,
5. Waa dambi laga gelayo dhawr qodob oo ka mid ah Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Caalamiga ah (*Human Rights Declaration",*
6. Waa ceeb ku noqonaysa qofka ay ka soo baxdo oo aan horay usii soconayn,
7. Waxay burinaysaa maahmaahyo kale oo Soomaaliyeed ayna ka mid tahay: "**Sir Naageed lagama sal gaaro**".

R. "Naagaha iyo caruurtaba sabo sabo ayaa lagu wadaa". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Hooyadu canugeeda sabo saba ayey ku wadaa",** waayo:

1. Waa been oo naagi ka weyn wax sabo sabo lagu sii wadi karo,
2. Haday horay u dhici jirtay iminka ma dhacado oo dumarkii way garteen in sabo sabo lagu wadi jiray,
3. Waa xaqiraad aan banaanayn oo aan ceebaha ka imaan kara oo dhan kor ku soo xusanay (maahmaahda tan ka koraysa),
4. Waa dambi aakhira iyo aduun labadaba sida aan kor ku soo xusnay,
5. Haddii ay hooyadu illeen waa Naag waana tan loola jeedo maahmaahda ay tahay mid sabo sabo lagu wado, sidee ayay iyaduna sabo sabo ugu sii wadi kartaa canugeeda oo isagu taas dhab ahaan ugu baahan, hadayse sabo sabo ka sii hoosaysa tan iyada lagu wado ilmaheeda ku koriso sidee ayey ilmuhu ugu soo baxaan caqli low karti badan oo wax garad ah?
6. Mar hadaan ka sal gaarnay in ay maahmaahdu ku qotontay been abuur iyo dulmi af lagaado lug ku leh waa in aan ka wareegsanaa isticmaalkeeda,
7. Sida aan haatan u qormaynay waa munaasib waayo waxan badelkii Naag ka dhignay Hooyo, si aan u cadayno xaq hooyada, taasna waxay ka timid in maahmaahdii hore isticmaalka Naag loola jeeday hooyada,
8. Waxan ognahay in hooyadu ilmaheeda ku koriso maaweelo iyo sabaal ayna kaga soo saarto wax tar qiimo weyn dunida ugu fadhiya,
9. Haddaba si aan halkii maahmaah edeb daro ah laga isticmaalayey ugu badelno maahmaah sama ka talis ah waa in aan u qormaynaa: "**"Hooyadu canugeeda sabo saba ayey ku wadaa".**

S. "Naagi nin ay taqaan nin ma moodo". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Mukulaal minkeedii joogta mici libaax leh**", waayo:

1. Waxay maahmaahdu ka tarjumaysaa in ay dumarku iska dedaan ama ka xishoodaan raga ajnabiga ah ee ku cusub iyaga oo dhanka kalena la qabsaday mid kale ee isga qudhiisuna ka ajnabi ah laakiin ay baratay oo mudo hor joogay.
2. waxaa muuqata in ay haweenku badanaaba kalsooni buuxda iska siiyaan qofka ay aad u bartaan oo aysan wax shaki ah ka qabaynin, laakiin way fiican tahay in ay markaste baraarugsanaadaan marka ay arintu taagan tahay fulinta waajibaadka Allah,
3. Inkastoo ay guubaabo u muuqato hadana maahmaahdu waxay ku asluubaysan tahay sida kale een u qormaynay si loo xushmeeyo dumarka,
4. Haddaba si sama ka talisnimo ah waxan garanay maahmaahda dambe oo awalba ayaantaan iska soo can baxsanayd in la geliyo badelkii mida hore ee aanu nasakhnay. Sidaa awgeed waxan u dhignay: "**Mukulaal minankeedii joogta mici libaax leh".**

SH. "Naagi nin qaawiyey kama quusato". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Gudayaal is bartay waa isu soo guuxaan", waayo:**

1. Anaga oon waxba eegin sax iyo qalad toona aan eegno asluubta kelmadaha loo adeegsaday maahmaahda.
2. Dhanka kale waxay maahmaahdu u muuqatay in ay wax guud si gaar ah u bayaaninayso oo xikmada oo dhedig iyo labood labadaba ku suurtoobaysa ay dhedig keliya ku astaysay,
3. Way badan tahay in ay dhacdo in ninku naagta uu mar la seexdo uusan ka samrin ee weligiis maanka ku hayo. Sidaa si la mid ahna naagta ayey uga suurtowdaa. Haddaba maahmaahdu waa inay caddaalad ahaataa.
4. Mar haddii la wada ogsoon yahay in maahmaahi asal ahaanba xikmad tahay, waa in aan ka dhawrnaa kelmadaha aan u wanaagsanayn in uu qof wayni afka ku ballaariyo. Sidaa awgeed waxaa haboon in afka intii la awoodo laga dadbo kelmadda Qaawinyey,

5. Haddaba si aan taas u gaarno isla markaana aan ujeedka maahmaahda naagaha keliya uga deyno oo rag iyo dumarba u gaarsiino waxaan garanay in erayada *lafthi* ahaan ee maahmaahda oo dhan la badelo iyada oo macnihii ay tusinaysay uu weli halkiisii yaallo,
**6.** Waxaanu hadda u qormaynay maahmaahdaas: "**Gudayaal is bartay waa isu soo guuxaan".**

DH. "Naagi waa miro geed saaran". Maahmaahdaan waxaa lagu badelay: **"Naagi suuradii lagu saxariirin lahaa iyadaa soo ban dhigata"**, waayo:

1. Hadaanu dhahno naag oo dhan waa iska miro geed saaran oo baylah ah waxaanu dambi ka galaynaa kuwa wanaagsan ee aan sinaba lagu fara xumayn Karin,
2. Hadaan ka aamusno maahmaahdana waxay noqonaysaa in ay ama sideeda ku sii socoto ama ceebo kale nagu jiido,
3. Waxay abuuraysa kalsooni daro joogto ah oo laga qabo haweenka nooc kaste ooy yihiin, taas oo keeni karta in ay ragu ku mashquulaan waardiyeynta xaasaskooda iyo gabdhaha la dhashay,
4. Waxay kale oo sababi kartaa cuqdad nafsi joogto ah oo ay hablaha qudhoodu iska qabaan ooy weligood isu arkaan mira basil oo geed saaran sida ay riwaayad kale oo maahmaahda ihiba sheegtay,
5. Inkasta ooy gabdhaha qudhoodu degsadeen maahmaah kale oo ay taas hordhigaan marka lagu soo leexiyo hadana waxan door bidnay in aan toodana ka leexano cillado jira awgood. Maahmaahda ay iyagu degsadeen waa: "Lax waliba shilalkay is dhigtaa lagu qalaa". Laakiin sababaha aan uga carra gedisnaay maahmaahdooda waxaa ka mid ah in ay noqotay gaashaan ay isku difaacaan oo marka gabar kaste lagu yiraahdo "Naa is deji rag baad beylah u tahaye, waxay isku difaacdaa; maye anigu waan

iska adagahay oo noocaad ii malaysay ma ihi; Lax waliba shillalkay is dhigtaa lagu qalaa". Sidaa awgeed toodana ha noo hayee, tan ay odayaashii hore dejiyeen ha noo joogto ee aan mid kale hadda allifno,

6. Sidaa awgeed waxan garanay in ay hirgasho maahmaahd ah: **"Naagi suuradii lagu saxariirin lahaa iyadaa soo ban dhigata"**.

C. "Naago abaal ha ugelin amaahse ha udiidin". Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Waxay baafinaysaa xumo iyo cadaawad ka dhan ah dumarka, taas oo u sii gudbi karta raga iyo caruurta ay qofka dumarka ihi ka mas'uulka tahay,
2. Waxay ka soo horjeedaa guud ahaanba awaamirta Diinta Islaamka

3.Waxay ka soo horjeedaa guud ahaanba nolosha iyo ilbaxnimada casriga ah,

4.Waase macquul in la yiraahdo naagi waxay mar walba jeceshahay inay sida geela laanta laamaha ugu dheer daaqdo, laakin taa qudheedu waxay ku xiran tahay hadba noocada haweeney ee lala kulmo ee kulli ma wada saamaynayso.

F. "Naag ama u sabir ama ka sabir". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Jaahil ama u sabir ama ka sabir"**, waayo:

1. Waxay qeexaysaa fikrad been huwan oo aan dumarka oo dhan lagu wada sifayn Karin,
2. Waxay si sharci darro ah uga soo hor jeedaa guud ahaan xuquuqda haweenka,
3. Waxay abuuraysaa eedo iyo ceebo aan geed adag haysan ee daciif ah,
4. Waxaysan maahmaahdu eegin dhanka kale fikradda ay haweenku qabaan sidaa darteed waa eex (*bias*),
5. Marka lala akhriyo maahmaahdaan mid kale oo la macno ah oo oranaysa: "**Naag nimaan u sabrin kama ilmo dhalo**", waxaa la dareemayaa in

ay haweenku dhib badan yihin, laakiin weli waxaa dhab ahaan u jirta in aan haweenkana la waraysan oon la ogaan waxa ay iyaguna tirsanayaan dhibaato,

6. Waxay xaqiiqadu tahay in Aadanuhu is qabsigooda kala kulmaan dhib illeen waa laba fikradood oo la rabo in la mideeyee, sidaa awgeed laba kaste oo macaamil waara iyo wada noolaan iska doonaysaa waa in uu midiba midka kale ama u sabraa ama ka sabraa ee arintu kuma koobna dumarka oo keliya,
7. Haddaba waxan gartay in ay haboon tahay in eedaan laga wareejiyo haweenka oo si loogu cadeeyo inay taasi ku sifaysmayso qof kaste oo qalad badan rag ahaayaa iyo dumar ahaayaaba waxaan eeda dusha ka saarnay qofka jaahilka ah ee madaxa adag ee la dhaqmaya qof aqoon leh, waxanan u qormaynay sidatan: **"Jaahil ama u sabir ama ka sabir".**
8. Hadaad tahay mid ku nool goblada dhexe ee dalka ooy kugu adagtahay qabashada maahmaahdani sabab jirta awgeed waxada badelkeeda dhahan kartaa: **"Sawir ama u sabir ama ka sabir",** illeen kelmada sawir ayaa halkaa laga isticmaalaa dalka intiisa kalena aan laga qoone.

Q. "Naago geel ka baxsaday nabastooday ka dayaan". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Gaarigoo kaa dhuma gurigaad ka dhex baartaa"**, waayo:

1. Macanaha iyo ujeedada maahmaahda lama fahmayo oo waayaheedii ayaa la soo dhaafay,
2. Kelamadda "**Nabas**" waxay ila tahay inuusan qof ka da' yar 50 jir uusan maanta fahmi Karin, marka laga reebo qof cilmi baaristan oo kale sameeyey, sababtuna waa inaysan meelna ka shaqayn maanta. Berigii hore dumarka Soomaalidu waxay ku labisan jireen hal maro oo qayd ama go' ah waxayna u xiran jireen garaar. Haddaba halka caloosha ku began ayaa iska banaanaan jirtay iyada oo u samaysmaysa sidii qandil (weel wax lagu shuban karo) illeen kor iyo hoosba way ka xiran tahaye. Halkaa

jeebka ama weel ahaanta u eg oo loo yiqiin (Nabas) ayay hadaba ku guran jireen alaabta ay sitaan oo badanaaba ahaan jirtay Qabada (mayrax ama qolof laga diiro geed la gubay oo laga samaynayo Haan ama weel kale), Cawda ama Xargaha geela lagu dabro. Laakiin taasi maanta way dhamaatay oo xataa baadiyihii qaawanaantii dhar baa laga xirtay. Waxaa xusid mudan in ay taasi la meel tahay kelmadda kale ee iyaduna maanta luntay ee ah: "Dhiidhiibsi". Dhiidhiibsina waxay ahayd; berigii hore gabdhaha yar yar dhar looma heli jirin, ama haday cid taajir ka dhalatay qayd yar baa dhexda loogu xiri jiray. Sidaa awgeed marka ay soo fariisato dadka hortooda illeen qolal lagu kala asturnaadaana ma jirine ayaa lagu canaana jiray: "**Naa dhiidhiibso**" oo macneheedu yahay "labada lugood isku qabso si aan qalabkaaga loo arag". Waxaa kaloo iyana sheegis mudan in ay raguna lahaayeen jeeb nooc kale ah oo aan ahayn kan ay maanta leeyihiin. Waxay wax ku ridan jireen duubka u dhexeeya marada ay labisan yihiin iyo jirkooda oo loo yaqaanay "**guntiga**", illeen maradooda ayaa iyagan ahayd go' dhexda loogu xirto qaab u eg kan maanta loo xirto macawista. Mid sidaa u qaab eg oo maanta ay dumarka ama gabdhuhu isticmaalaan, laakiin aysan duruufi keeni ee falfalxumo keentay ayaa ah inay wax ku ritaan inta u dhexaysa googaradooda iyo diracooda oo ku beegan gumaarkooda.

3. Maanta dumarku waxay leeyihiin jeebado iyo boorsooyin ay isku badeshaan oo dhawr ah waxayna ku gurtaan qalab aan ahayn kii hore oo u badan dukumiinti – waraaqo wax muhim ihi ugu qoran yihiin, lacag, waarqadaha la isku tir tiro (*tissue*), qalin, nuurad bashimaha ama dibnaha la marsado si qurux looga dhigo (*lib stick*),
4. Waxaa hadal aan meel qabsanayn oo dawgiisii ka lumay ah in tan oo kale Naag uun lagu eedeeyo, waayo waxaa jirta in qof kaste marka uu waayo wax uu aad u jecel yahay uu meel walba ka dayo xataa meel uusan sheygaasi geliba Karin. Sidaa awgeed maahmaahdu waxay xubintaas ku noqotay "**Maahmaah marinkeedii aan helin",**

5. Waxaa sifadaan qaadan kara qof kaste oo waaya wax uu si xad dhaaf ah u jeclaa nin ahaayaa ama naag ahaayaa,
6. Waxaa laga soo gudbay xilligii uu Geelu dahabka aduunka ahaa oo waxaa badelkii Geela la isticmaalaa wax la yiraahdo "Gaari ama Baabuur", sidaa awgeed waa in guud ahaanba maahmaahooyinkii geela ku soo arooray oo dhan loo badelaa Gaari,
7. Haddaba waxaan ku badelnay in ay dhici karto in marka qof baabuurkiisa uu jeclaa xataa laga xado ay ka suurtowdo in uu gurigiisa oo laga yaabo in uu ka xajmi yaryahay baabuurka oo dhan uu ka dhex baar baaro,
8. Sidaa ayaan maahmaahdii ugu badelnay: "**Gaarigoo kaa dhuma gurigaad ka dhex baartaa".**

K. **"Naago hiil ha ka sugin"**. Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo;

1. Waa been ku timid ka fiirsi la'aan iyo cuqdad la iska qabay intaan hadalkuba imaanin (*preassumption*),
2. Waa hadal ama xikmad ku sheeg aan ujeedadiisu waafaqsanayn dhabta,
3. Lama kala cadayn hiillada lag sugayo naag nooca ay tahay; ma mid Af baa mise waa mid addin. Hadday tahay mid Af ma waxa a laga wadaa kuuma jixin jixayaan oo dabiici ahaan bay cadaw u yihiin, mise waxaa loola jeedaa ma garan karana in aad hiillo uga baahan tahay?,
4. Hadday berigii hore hiiladu ku ekayd xoog io muruq oo Haweenku aysan tabar haynin, maanta xaaladu way is badeshay oo dumarku waxay kugu difaaci karaan si ka kulul sida ragu kugu difaaci karo,
5. Maanta dagaalada weerar iyo difaac kuwooda ugu khatarsani waxay ku dhacaan nidaam afka ah oo waxaa la adeegsadaa qalin iyo warbaahin,
6. Naagtu maanta waxay awoodaa in ay qaylo dhaan kugu difaacdo, in ay qoraal iyo dacwad kugu difaacdo, inay warbaahin iyo warfaafin kugu difaacdo, inay talo bixin iyo fikrad xiiladeede kugu difaacdo, inay dhaqaale

kugu difaacdo, iyo weliba inay muruq kugu difaacdo. Hadiise loola jeedo waa cadaw oo xaasidnimo awgeed baysan kuu difaacayn waa arin ku xiran hadaba xiriirka adiga iyo qofkaa idinka dhexeeya iyo marba intii qofkaa caqli ilaahay geliyo,

7. Sidaa awgeed waxan arkaynaa in ay maahmaahdani tahay mid aan marinkeedi haysan oo loo baahan yahay in laga takhaluso gebi ahaanteedaba.

L. "Naago iyo riyo toona looma dhutiyo". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Naag la'aan waa naf la'aan**", waayo:

1. Waa been aan sal iyo raad toona lahayn oo waxaa qiimaha naag sheegi kara dadyowga beeraleyda ah, arileyda ah, lo'leyda ah, xaasleyda bah weynta ah, iyo kuwa maanta ku tusaale qaatay dagaalladii sokeeye iyo kaalintay Naagi ka qaadatay harjadkii nolosha,
2. Haddaan maahmaahdaan qaadano xagee baanu geynaynaa mid kale oo oranaysa "Raggu riyaha ma liso reerkiisana waa ku ogyahay". Sow maahan naagta la qabaa mida baadiyaha ka qabata dhammaan shaqooyinka daruuriga ah ee loo baahan yahay halka uusan ninku wax shaqo ah oo heer qoys ah qabanin. Haweeneyda la qabaa waxay samaysaa aqalka lagu hoydo, maacuunta la isticmaalo, gogosha lagu seexdo, raacitaanka xoolaha, maalitaanka ama lisitaanka xoolaha, dhammaanba hawlaha caruurta oo foolashadooda iyo calool ku qaadkooduna usii dheer yahay, beerta ooy ka soo qabato shaqooyinka kala duwan ee looga baahan yahay, iyo hawlo kale. Laakiin ninku muxuu qabtaa? Waxba. Lacalla cadaw cidda soo weeraro ama ceelka biyo loo doonayo oo keliya ayaa dawrkiisa la arkaa. Haddii kale magaalada ayuu tamashle ugu maqan yahay,

3. Riyaha qudhooda waa loo gefay oo ma ahan xoolo sidaa looga maarmo illeen iyaga yaa ilmaha loo lisaa, iyaga ayaa oonka kaga adkaysi badan idaha, iyaga ayaa ka wasaq yar idaha, iyaga ayaa ariga ka qurxin og idaha, iwm.
4. Intaa markaan raacno waxan ogaanaynaa in maahmaah kusheegani ay u geftay laba xuquuqood oo kala ah xuquuqda dumarka iyo xuquuqda xoolaha riyaha ah,
5. Sidaa awgeed waxaan maahmaahdaan ku adkaynay qiimaha iyo waxtarka ay leeyihiin Haweenku oo waxaan u badelnay: **"Naag la'aan waa naf la'aan**".

M. "Naag galow Naar galow waaye"**.** Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Naagi ama waa jabane kabto ama kabane jebiso"**, waayo:

1. Waa xikmad lala ilduufay una muuqata in uu sameeyey nin xanaaqsan oo guur ka xumaaday,
2. Waa run in ay jirto naag xun oo naar lagu tilmaami karo, laakiin waxay la mid tahay in uu dhanka kalena jiro nin xun oo jahanama lagu tilmaami karo, sidaa darteed iyada oo nasiib ah ayay hadana ku xirnaan kartaa xulshada ninka,
3. Waa dambi in sidaa lagu dhawaaqo illeen waxay ka soo horjeedaa sunada Rabbaaniga ehe,
4. Waa fulinimo iyo doqonimo in lagu guubaabiyo raga in ay baqdin awgeed uga joogsadaan guurka oo ka fariistaan ujeedadii adduunyadu ku socotay oo dhan,
5. Waxaa ka haboon in la isticmaalo xikmado kale oo quseeya arinta kana macna tusin og. Sida: "**Raggu waa nin naag guursaday iyo nin naa iyo naa kororsaday**" oo loola jeedo qeexitaanka dabeecada qallafsan ee

qaylo badnida ahee ay haweenku la soo baxaan ka dib markay ilmo dhalaan, IWM.,

6. Haddaba anaga oo isku dayeyno sugitaanka caddaaladda ayaan haweenkii u kala saaraynaa mid lagu baraaro iyo mid lagu basanbaaso,
7. Sidaa awgeed waxaan maahmaahdaan ku badelaynaa midaan dambe oo horayna u jirtay laakiin isticmaalkeedu yaraa oo aan hadda boorrinayno hirgelinteeda, waana: "**Naagi ama waa jabane kabto ama kabana jebiso".**

N. "Nabad la tuugay Nabad maahan". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Nabad doone Nacab la'aan buu Najaxaa**", waayo:

1. Waa dulmi ka bilaabanaya macangagnimo iyo dabbaalnimo oo la yiraahdo maslaxa diid,
2. Waxay ka hor imaanaysaa maahmaahda kale ee ah; "**Maslaxa diid Munaafaq waaye**", waana ceeb inay maahmaahyada iyo xikmadaha Soomaaliyeed is buriyaan,
3. Waxay ka tarjumaysaa dhaqan jaahiliyeedkii hore ee laga galti baxay,
4. Waxay ka soo horjeedaa diinta Islaamka oo faraysa in mar kaste maslaxa doon iyo nabadoon la ahaado, haday tahay naftaada iyo naf kale iyo haday tahay laba nafood oo kale dhexdhexaadintooda intaba,
2. Sida dambe een u qormaynay waxay la macno tahay maahmaahda kale ee oranaysa; "**Sir ma qabe saab baa biyo u celiya**", illeen waxay tilmaamaysaa in qofka nabadoonka ihi uu guul ku dambaynayo,
3. Tan dambe waa wacdi iyo waano loo xikmadeeyey heer qaran oo hoose,
4. Sidaa awgeed waxan maahmaahdaan u qormaynay; **"Nabad doone Nacab la'aan buu Najaxaa".**

W. “Nin aad dhashay kuma dhalin”. Maahmaahdaan waxa alagu nasakahy: “W**iil iyo aabihii horay iga kori aan dib kaa koriyee kuma ballamaan wayse noqotaa”**, waayo:

Y. Koox maahmaahooyin ah oo isku wada macno ah kalana ah:

- Nin aan shantu kaa celin sharci kaama celiyo,
- Nin aan aarsan waa ibtiloobaa,
- Nin aan aarsan uurka hooyadii buu ku jiraa,
- Nin aan waran kaa reebin weeri kaama reebto,
- Nin aan warankaagu gelin warkaagu ma galo,
- Nin aan aarsan aabihii ma dhalin,
- Iyo kuwa kale oo la mid ah waxaa dhamaantood isku fuuqsaday hal maahmaah oo ah: **“Nin aan baqin waa loo baqaa**”.

Y1. “Nin aan tashan looma tasho”.maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **“Ninkaan tashan waa loo taliyaa”** oo kaashanaysa **“ama talo raac noqo ama talo keen noqo”.**

Y2. Nin doqon wax taray wa anin dambas haraatiyey

Y3. Nin dumaashidii ari la raacay daniba waa u geyn.

Y4. Nin gaabani oraahdiisa la gaaban. Alqasiir basiir..

Y5. nin gabari ujoogto guunyo kama maqna. Waxay u qaldan tahay sida maahmaahda hindida ee ah “Gabdhaada kori waa geed talaalka deriskaaga iska waraabi”.

Y6. Nin geel leh ba agabar la siiyaa. Waxay ka soo horjeedaa; " haduu idiin yimaado mid aad ka raalli noqotaan diintiisa iyo dabeecadiisa u guuriya haddii kale fasaad iyo fidno weynba dhullka ak dhici"

Y7. nin gu' kaa weyn garaadna kaa weyn. Maahmaahdaan waxa alagu nasakhay: " Nin akhris ku dheer garaadna ku dheer", waayo:
Waxay burinaysa maahmaah kale oo dhahaysa: ' nin gu' kaa weyn waa nin gu' baas kaa weyn".

Y8. nin Ilaah meel tiray wuxuu utiray buu qabaa. -=wax kale maahan ee wa cibro qadashoi.

Y9. Nin is faanshay wa ri' is nuugtay. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: " Haddii lagu sheego waa la isa sheelaa haddii lagu sheelana wa ala isa sheegaa", waayo:

Y10. nin iyo naagtii colna ma ahan nabadna ma ahan. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "Nin iyo naagtii waa Nabad joogto ah", waayo:

H1. Ninkaa weyn lama wacdiyo nin kaa dheerna wax lama tuso. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakahy: "dhirir iyo dhug la isku waa"..????

H2. Nin kaa sii socda halna wana kuu qali lahaabaa la yiraahda. Maahmaahdaan wa qalad iyo munaafaqnimo…

H3. Nin salaam badan ama waa sabool, ama waa sir doon, ama waa wadaad, ama wa abeenaale. Maahmaah ku sheegaan wa ala baabi'iyey, waayo;
1.

H4. Nin weyni wedkii waa yaqaanaa.

H5. Nin xoog leh ayey xaajo utoostaa.  – sidoo kale ninkii xoog leh ayaa xaq leh..

H6. Nin xoolo dhaqay waraabana u dhaq. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: Nin hanti badan haadkuna bar ka cun", waayo:

1. Way dhacday oo taariikhdeedii ayaa dhamaatay, illeen waagii ariga la raaci jiray oo dhurwaga laga ilaalin jiray lama

H7. Ninba coodkuu dhaqduu caanihiisa dhamaa.

H8. Nin kaan jeclahay meygaag baan mayrax uga diiraa.

H9. Koox halkudhegyo xikmadeedyo ah oo laga kala isticmaalo degmooyin iyo gobollo kala duwan dalka oo isku wada cayn ah ayaan qodobkaan ku wada baabi'inaynaa, waayo qaabkii ay ku bilowdeen ayaa ku salaysnaa falfalxumooyin isugu jira, midab takoor, gumaysi, dhac, xaqirid, af lagaado, kajan, IWM. Waxaana kuwaa ka mid ah kuwa hoos ku taxan oon mid waba horudhac siday ku timid ah ku sii lifaaqayno:

- Qof waliba wuxuu qabo Qardhuu geyn
- War jiraaba Cakaaruu imaan,
- Ma magtii Maxamed Daud baa?
- Ma siilkii Axado Gabay baa?
- Mashaqo waa Midgo Lo' leh,
- Xamiido wasmo waa rabtaa ashqaalkeediina ma hayso,
- Qardhoo ladan baan ka tagaye ma hadaan galay qaaba qawsa,
- Dibiga Doolood dhegihiisu wax san waa maqlaan mase arkaan,
- Baxdo waa Laas, miney Laas tahay waa kor rorogtaa,

- iyo kuwa kale.

Haddaan kuwaan aan ku keenay sharraxaada mid walba qeexitaan dulmar ah ka bixino inaga oo ku dhaqmayna Halkudhegga kale ee ah: **"Sheekaba Sheekay keentaa**" waxay ku kala baxeen sidatan:

- **Qof waliba wuxuu qabo Qardhuu geyn**

Waxay xikmadaan la isku dayey laakiin tabarta yari ku timid in waagii xukunkii Madaxweyne Dr. Cabdirashiid ayey dhacday in Maxkamadda sare ee dalka xarunteeda laga dhigay magaalada Qardho oo ah halka uu ka soo jeeday madaxweyne Cabdirashiid. Markaa ayey dadkii iyaga oo xukunka qabiilaysi ku eedaynaya soo dhejiyeen halkudheg maahmaaheedkaan "Nin waliaba wuxuu qabo Qardhuu la imaan",

2. Waa sheeko mar dhacday oo gef ahayd, baahi loo sii joogteeyaana meesha ma taallo ee waa laga maarmaa,
3. Xikmad wqeyn oo la taaban karo ma samaynayso haddii aan u adeegsano hawlaha kale ee caynkeeda oo kale u dhaca, illeen kuma haboonaanaysee,
4. Sii sheeg sheegeedu waxay abuuraysaa cuqdad iyo colaad sokeeye oo waxa uu akhristuhu ku soo xasuusan karaa dhacdooyin dhacay waayadii Jaahiliyada,
5. Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmake oo ahaa ninka ugu dhawaa xagga Diinta iyo akhyaarnimada intii ilaa hadda madaxweyne soo martay dalka ayey ku noqonaysaa dhibic ceebeed, taasina waa mid aan la dhiiri gelin Karin, waayo waxaa habboon in laga fogaado xumaan qod qodka madaxda intii suurta gal ah mar haduusan cadaysan xumihiisa, lana helayo dhinacyo badan oo uu hogaamiyahaasi ku wanaagsan yahay,
6. Sidaa awgeed waxaa haboon in sheeg sheega hal qabsigaas la illoobo oo meeshiisa lagu xiro.

- **War jiraaba Cakaaruu imaan**

Hal qabsigaan oo xilliyadii dambe aad usoo karaar qaatay waxa uu ku baxay sidatan:

Gelinkii dambe ee Qarnigii 18 aad ayaa waxaa gobolada dhexe ee dalka ka talin jiray Boqor Keenadiid oo xaruntiisu ahayd magaalada Hobyo. Haddaba Boqor Keenadiid oo aan awoodin in uu mushaar u qoro ciidamo sirdoon oo xogta deegaanka u keena ayaa la yimid xiilad kale oo ahayd; in uu jelemad ama kirli weyn oo shaah ah ku kariyo duleedka magaalada halka ay dadka magaalada imaanaya ee socotada ihi ka soo gelayaan. Shaahaas ayey bilaash ku cabbi jireen dhammaan dadka reer baadiyaha ah ee safareyda ah marka ay magaalada soo gelayaan. Inta uu nin walba shaaha cabayo ayaa laga waraysan jiray waxa ku soo cusboonaaday geyiga uu ka soo jarmaaday saaka iyo nawaaxigiisa, iyaguna si farxad ah ku bixn jireen war bixin buuxda. Sidaa ayuu Boqor Keenadiid ku heli jiray akhbaarta dalka uu xukumo. Markaa ayaa jelamadii loo bixiyey " Cakaaro", marka uu Boqorku war u baahadana uu hal qabsi ka dhigtay "**ii daa war jiraaba Cakaaruu imaane**". Laakiin wayahan waxaa soo kordhay isticmaalka Halkudhegaan oo dhinacyo badan loo adeegsanayo. Hase ahaatee waxaan ku talin lahaa in sida ugu dhaqsaha badan loo joojiyo isticmaalka Mahmaahdaan ama xikmadaan halkudhagga ah, waayo sababtii ay ku timid ayaa ahayd weji foolxun sidaa awgeed waxaa laga yaabaa in ay eel hor leh ku kiciso soo xusuusashada.

- **Ma magtii Maxamed Daud baa?**

Halkudhegaanu waxa uu ku yimid sidatan:

Beri hore ayaa waxaa jiray Boqor xukumayey beel Soomaaliyeed oo aad loo jeclaa. Maalintii dambe ayaa waxaa dilay dhallinyaro isla beeshii ka mid ah. Laakiin waxaa ka dhacday tii dheerayd. Tobanaan sano ayay socotay magtiisii oo mar walba la lahaa waxan yari mag ma ahane celiya oo mag u qalanta Boqorkii keena. Ugu dambaystiina

waxaa la dulmiyey dhammaan jifadii ay wiilasha odayga dilay ka dhasheen oo waxaa lagu camirtay in ay Midgo yihiin. Haddaba waxaa haboon in ay maanta sida ugu dhaqsaha badan loo illoobo sheekadaas ficil ahaan iyo qawl ahaanba oo halkudhegaasi baaba'o oo noqdo "**war xumow lagu waa"**.

H10. **"Ninkii diin diin kale fuulaya arkaa xoolo badan buu helaa".** Oraahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Waa shirki illeen xoolaha Ilaah baa bixiya ee Diin diin wax ma taree
2. Waa jaahilnimo oo waa lagula yaabayaa hadaad maanta ku dhawaaqdo dunidan casriga ah,
3. Waa axmaqnimo iyo waalli aan wax caddayn ah cuskanayn,
4. Sidaa awgeed waa dambi iyo ceeb wada socda ee yaan maanta ka dib lagaa maqlin.

W1. Ninkii kir ku yiraahda kir iska dheh. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Ninkii afxumo kugu dila aamuskaa lagu dilaa**", waayo:

1. Waa gef gef ku gud iyo dagaal hurin bilowgeed in lagu wada hadaaqo **"Sal sal ku gud saxan saxan ku gud**",
2. Waxay ka soo horjeedaa Diinta Islaamka iyo xataa Diinta Kiristaanka oo nuxurkoodu yahay miyir iyo nabad raadin,
3. Waxay ka soo horjeedaa xikmadaha iyo maahmaahoyinka kale ee Soomaaliyeed sida: **"Ninkii sun ku siiya subag baa la siiyaa**",
4. Waxay ka soo horjeedaa macaamilka casriga ah ee adduunyadu hadda isla garatay si loo kala ammaan helo,
5. Waxay ka soo hor jeeddaa guud ahaanba qawaaniinta iyo xeerarka adduunka ka jira oo kugu dhiiri gelinaya in haddii gardarro laguula

yimaado aad maamulka jira u dacwooto adiga oon wax dagaal ama xumaan ah ku jawaabin,

6. Waa axmaqnimo iyo waalli in aad qofkii hadal xun ku yiraahdaba kala daba qayliso mid la mid ah ama mid ka sii xun,
7. Sida dambe een u qormaynay waxay waafaqsan tahay Aayaad Qur'an ah oo badan ayna ka mid tahay tan suuradda Al-Furqaan oo na baraysa sida loola macaamilo marka ay dad ciyaala suuq ihi na gardaraystaan: "Addoomada Eebbaha Raxmaanka ihina waa kuwa u socda Dhulka Xasilooni, oo hadday la hadlaan Jaahiliintu (af lagaadeeyaan) ku yiraahda Nabadgelyo" (Qur'an: Al-Furqaan: 63),
8. Sidaa awgeed waxay ku habboon tahay in maahmaahdaan loo qormeeyo sidtan: **"Ninkii afxumo kugu dila aamuskaa lagu dilaa".**

W2. **"Ninkii reerkiisa kaa soora waa nin, Ninkii reer kale kaa soorana nimanyaal (ama nin ka roone**)". Maahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Qaybta hore waa saxsan tahaye, laakiin qaybta dambe waa xikmad qalloocatay oo aan ka fiirsi loo dhihin,
2. Nin kaa sooray reer uusan lahayn wuxuu u dhawaaday in uu xoolo xaaraan ah ku siiyo oo si aan xalaal waafaqsanayn ku soo qaaday,
3. Hadduu si xalaal ah kaaga sooray reer dadow waxa uusan hadana ka aamin ahayn ceeb iyo weji xumo uu adiga kuu soo gudbiyo,
4. Waxay ka soo horjeedaa ilbaxnimada hadda socota oo ah inuusan qofna arimo qof kale fara gashan,
5. Way haboonaan lahayd haddii la dhiiri gelinayo in uu ninkaasi talo ku siinayo mar haduusan reerkiisii kaa soori Karin duruuf jirta awgeed, laakiin sidaas looma dhigin maahmaahda,
6. Isa sooridii ayaaba dariiqii ay ku socotay beryahan soo xirmanayaa oo waxaa lagu socdaa casri aan la isa soorin oo qof waliba isku tashado,

7. Sidaa awgeed waxaa haboon in isticmaalka maahmaahdaan laga gaabsado oo aan loo noqon illeen lagama aamin aha qalad ay sababtee.

W4. Nin gu' kaa weyn il guruxeed ku dheer. Maahmaadaan waxa alagu nasakhay: " Nin akhris ku dheer il guruxeed ku dheer". Sabatuna waa:
1.

"Nin is faanshay waa Ri' is nuugtay". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: **"Hadii lagu sheego waa la isa sheelaa, hadii lagu sheelana wa ala isa sheegaa**". Sababtuna waa sidatan:

# XARAFKA (W)

B. Waa Dhallaankii hooyadii dhalmada baray". Maahmaahdaan wa

T. Wadar iyo waaxid yaa waalan.

T. wadada Naarta wa acarrabka dumarka.

X. Wadaad iyo Dhurwaa iyaga yaa kaa og meesha dheeftu ku jirto.

D.”Wax ma kase wax maan u sheegaa, mise biyo maanyaan kurbin ku guraa”. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: “**Nin hurdaa la kiciyaaye ninka kula hadlaayee hadana maqan maxaad oran**”? waayo:

1. Ujeedada maahmaahda dhaqso lama fahmayo oo waxaa ka faaiidaysan kara dadka waa weyn ee khibrada kaashanaya iyo kuwa uu faahamkoodu deg degta ku yimaado oo keliya,
2. Qaab dhismaha warinteeda, gudbinteeda, iyo isa saarka kelmadaheeda intuba waxay u baahan yihiin dib u habayn iyo sixitaan,
3. Kelmadaha ubucda u ah sida; kurbin iyo biyo maanyo waa lahjad gaar ah oo aysan Soomaalidu badankeedu garan kairn,
4. Waxaa laga yaabaa in uu isticmaalkeedu ku koobnaado gobolada xeebaha koonfureed oo keliya illeen fahamkeeda iyo sharaxeeduba waa mid u furan xeeb joogta reer koonfurka ah oo keliya, sidaa awgeed waxay noqonaysaa maahmaah heer degmo ee ma noqon karto maahmaah heer Qaran,
5. Tafsiirka maahmaahda oo ah haddii uu qof damiin wax ma garte ah yahay sidee baan wax ugu sheegaa, mise biyaha carra maanyada ayaan qaado ku beegaa,
6. Mar haddaan sugnay in ay maahmaahdu tahay mid carrab daalis uun ah ee aan wax xikmad ah soo kordhinayn, waxaan garanay in badelkeeda la keeno mid isla ujeedada lala damacsanaa qeexaysa oo ah: “**Nin hurdaa la kiciyaaye ninka kula hadlaayee hadana maqan maxaad oran**”?

R. “Wixii xunba Xaawaa leh”. Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: “**Wixii xunba Sheydaan baa leh”**, waayo:

1. Ujeedad maahmaahdu waa mid qota dheer oo ka soo fir jeeda aaminaad been ah oo ka timid khuraafaadka yuhuudda. Fikradaha yuhuudda ayaa

na soo geliyey oo naga dhaadhiciyey in ay Hooyadii Bani Aadamku ka soo farcamay ee Xaawo ahayd ay iyadu keligeed noogu sabab ahayd ka soo bixitaanka Jannada uu Alle naga soo saaray. Inkastoo ay Soomaali badankeedu aaminsan yihiin in ay Xaawo kalliftay cunitaankii geedka la xaaraantimeeyey hadana hadalkaasi waa been abuur loola jeedo in dumarka eed aysan lahayn loo saariyo ama la xaqiro oo xuquuqdooda la duudsiiyo. Qisadaasi waxay ahayd in Aadan iyo Xaawo labaduba ay isku mar cuneen geedka wax masayr la yiraahdaan meeshaba ma oollin (Bal eeg Aayadaha badan ee Qur'anka ah ee ka hadlaya arinta). Halkaa ayeyna maahmaahdu ku qotontaa in wax kaste oo xun Xaawo oo loola jeedo abkey dumar loo saariyo,

2. Waa Dambi adduun iyo mid aakhira labadaba,
3. Waa dulmi iyo gardaraysi ku salaysan hagag iyo masabid,
4. Waa doqonimo iyo ilbaxnimo la'aan in uu qof maanta jooga Qarnigan 21 aad ku hadlo waxaas oo kale,
5. Si runta loo waafajiyo waxaan gartay in sheydaanka oo dhab ahaan loo saarin karo isaga lagu badelo Xaawo,
6. Sidaa awgeed waxaan maahmaahda u badelnay: "**Wixii xunba Sheydaan baa leh".**

S. **"Wixii tegay Khadarna ma haleelo". M**aahmaahdaan waa la baabi'iyey, waayo:

1. Waa dambi weyn oo ah nooca koowaad ee faldambiyeedyada Allaha weyn laga galo oo ah "Shirki",
2. Waa been abuur oo waxay ku hal qabsanaysaa wax aan jirin oo sal iyo raad toona aan lahayn,
3. Waxaa sii hayey jaahilnimada dadkeena maantase Aqoon li'iyeey cilmi baa lagaa bartay oo waa Allaah mahaddiis,

4. Dad aan Diinta wax weyn ka aqoon baa iska alliftay inuu jiro nin Khadar la yiraahdo oo dunida wareega oo dadka wax u tara hadday baryaan ama ay dhici karto in uu mar inta u yimaado isaga oo iskaga soo dhigaya qof ama wax kale imtixaamaya si uu u hubsado, iwm, taa waxaa ka sii daran in ay habeenka barakaysan ee uu Ilaahay Qur'anka soo dejiyey oon la hubin habeenka ay ka tahay 10 ka habeen ee ugu dambaysa bisha Ramadaan ay u astaysteen munaasabadii Khadar iyaga oo malaha ka tixraacaya kelmada uu Ilaahay leeyahay "*Laylatul qadri.* . .),
5. Habowsanayaashaas ayaa haddaba u maleeya in ninkaa ma awaalka ah ee Khadar uu soo qaban karo ama gaarayo wax kaste ee Bani Aadamku haleeli waayo. Nasiib darro waxaa looga baahnaa in ay sidaa u arkeen kii iyaga qudhooda abuuray ee Allah wax walba awoode ah,
6. Haddaba si shirkigaas loo joojiyo waa in maahmaah ku sheegan meesha laga tuuraa oo gebigeedaba la waayaa.

## XARAFKA (H)

H1. "Hadal waa margoo kale oo marba meel ujiidma". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay. "**Hadal waa mindi marin leh**". Sababtuna waa:

1. Hadaan maahmaahdaan sideeda u dhaafno waxay ceeb usoo jiidi kartaa luuqada Soomaaliga oo ay ka dhigayso wax marba sidii la doono loo isticmaalo (*ambigious*).
2. Waxa kale oo ay dhiiri gelinaysaa in uu qof inta erayo af lagaado iyo qadaf ah geysto uu hadana xujo ka dhigto sidaas ayaan ula jeeday ee idinkaa qalad iga fahmay. Tiiyo laga yaabo in uu horey ugu soo talo galay farsamadaas khatarta ah.
3. Maahmaahdani ma ahan mid run la xaqiijiyey oo la isku raacay ku qotonta ee waa oraah uu iskala soo booday qof mar un la kulmay erayo macnayaal kala

duwan yeelan kara oo marba si loo qaadan karo. Taasina waxay arinta ka dhigaysaa in uu qofka qalbiga fayowna dareemayo in uu hadalku toosan yahay laakiin fahamka maqluhu dhan kale u gadoomi karo isaga oo tix raacaya qiyaastii wax hore qalbigiisa ugu keydsanaa, qofka qalbigiisa qallooc ku jiraana daba raacayo boogaha fahamkooda la wareejin karo.

4. Si aan maahmaahda runteeda u cadayno waxa nala gudboonaatay in aan qormayno: **"Hadal waa mindi marin leh**".

## XARAFKA SHAQALKA AH EE (A)

**A1**. "Aan karsano iyo aan dubano dhexdooda fuudkaa ku luma". Maahmaahdaan waxa lagu badelay: "**Aan dubano iyo aan shiilano dhexdooda maraqaa ku luma**". Sababtuna waa:

1. Asal ahaanba maahmaahdu waa qaldan tahay oo waa lagu ilduufay e lagama fiirsan. Bal eeg marka aad tiraahdo "aan karsano iyo aan dubano dhexdooda fuud ba aku luma", sow ma qiyaasi kartid in hadii labada dariiqo ee hilib diyaarin lagu murmo in mid uun la qadan doono marka laga eego dhadhanka weedha? Haddaba hadii la qaato fikrada sheegaysa in la dubto fuud waa ku daayey laakiin haddii la qaato fikrada taageeraysa in la karsado hade markaa fuud waa la helay ee ma lumin. Sidaa awgeed labada xaalo midood ayaa suurta gelinaysa helitaanka fuud ee lagama fahmayo oraahda in koleyba meesha fuud lagu waayayo.
2. Kelmada fuud laguma wada fahmo lahjadaha dalka, waana kelmada duqowday oo isticmaalkeedu sii soconayo. Odayaasha iyo jiilka ku dhaw unbay ku hartay.
3. Kelmada maraq waa mid lagu wada fahmaya lahjadaha dalka oo dhan isticmaalkeeduna ku badan yahay jiilalka soo koraya. Sidaa darteed waa tan u eg inay geli doonto qaamuuska adeegsiga rasmiga ah.
4. Kelmada maraq waa mid asalkeedu yahay luuqada dhashay AfSoomaaliga ee Carabiga, sidaa awgeed waa tan mudan in isticmaalkeeda la hirgeliyo. Ogow maanta weerarada lagu hayo AfCarabiga waxa ugu weyn in laga sifaynayo luuqadihii uu isagu u badnaa sida Af Sawaaxilka, Af Soomaaliga, Af

Xabashiga, iwm. Ogowna inaysan ujeedadaasi ahayn Carab nacayb oo keliya balse Islaam nacayb.

5. Sababhaas awgood waxan dooranay in aan mahmaahdan u qormayno sida ah "**Aan dubano iyo aan shiilno dhexdooda maraqaa ku luma**".

**A2**. "Abaal nin gala waa la arkaa nin gudase lama arko". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: "**Abaal nin galaa barakaysan nin gudaase ka sii barakaysan**". Sababtuna waa:

1. In sideedii hore loo daayo maahmaahda waxay keenaysaa dayro laga dayrinayo abaal gelitaanka iyo samafalka oo waxay soo jiidaysaa dariiqad lagu reebayo is kaalmaynta iyo isu ixsaan samynta.
2. Qofkii diidan ficilka wanaag samaynta ee ka meermeeranayaa waxa uu daliil ka dhiganayaa maahmaahdaan. Sidaa darteed waxaa haboon in iyada meesha laga saaro.
3. Sida ay hada u qoran tahay maahmaahdu waa huf iyo been oo waxaa jirta inta abaal gasha in la eg oo iyana abaal guda.
4. Kelamdaha "gala" iyo "guda" waa kuwa uusan macnahoodu u wada iftiimayn dadka si dhaqso ah oo ubaahan in maskaxda lagu dhalaaliyo si loo fahmo, sidaa awgeed kuma haboona in bulshada maanta iska wada mashquulka ah lagu wareeriyo eray bixintooda iyo ka fiirsigooda.
5. Labada kelmadood een soo qabanay waa kuwo uu isticmaalkoodu sii daba jarmayo oo dhawaan la waayi doono.
6. Kelmada "barako" waa kelmada laga dhadhaminayo macna diineed oo ku haboon in la qabatimo lana baro bulshada. Sidaa awgeed waxaa haboon in la hirgeliyo oo maahmaahda loo qormeeyo: "**Abaal nin galaa barakaysan nin gudaase ka sii barakaysan**".

**A3**. "Abaal nin gudi karaa loo galaa". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Abaal qof gudi kara iyo qof aan gudi karinba waa loo galaa"**. Sababtuna waa:

1. Siday u qoran tahay waa qaab ku salaysan xaasidnimo iyo sama-reebnimo oo ah in xumaha la is faro wanaagana la iska reebo.
2. Siday u qoran tahay waa si ku fir leh burjuwaasinimo iyo keli noolaansho, waayo waxay faraysaa in loo ixsaan sameeyo qofka tabarta leh ee isna hadhow laga filanayo in intaa oo kale laga helo.
3. Laakiin qaabka cusub ee aan u qormaynay waa mid ku salaysan samafalka iyo samafarka aadaminimo, tacliinta diiniga ah, dhaqan wanaaga, iyo aaya-dhigashada intaba.
4. Haddaba si aan u dhiiri gelino samafalka guud ayaan maahmahada u dhignay: **"Abaal qof gudi kara iyo qof aan gudi karinba waa loo galaa**".

**A4**. "**Abeesadii farta loo taagay fanaxay ubooday"**. Maahmaahdaan waa la tuuray gebi ahaanba waayo:

1. Si kasta oo la isugu dayo in eray bixinteeda la helo ama macanaheeda dhabta ah la fahmo waa la garan waayey waxa loola jeedo. Waxaa ugu dhaw in lagu macneeyo garshada ah in loogu maahmaaho qof inta si qabow loola cayaaray ama loola kaftamay is kibrin awgeeed arinta meel kale geeya. Laakiin taasi kama dhigi karto maahmaah xikmadaysan oo lagu sii dhex deyn karo bulshada. Sidaa awgeed waxaa haboonaatay in culaabteeda laga reebo qaamuuska maahmaahooyinka, maadaam aysan wax la taaban karo soo kordhinayn.

**A5**. **"Abtigaa waa hooyadaa oon naaso lahayn"**. Maahmaahdaan waa la tuuray gebi ahaanba waayo:

1. Abtigu waa midba sidii Alle garaad usiiyo ee isku mid ma ahan. Waxa dhacda in abtiyaalka qaarkood ka xumaayeen guurkii walaashooda ah hooyada ilmahay abtiga u yihiin sida awgeedna aysan arki karin iyada iyo waxay dhashaba. Dhanka kalena way dhici kartaa in ay u jecelaadaan sida walaashiisii dhashay oo kale. Sidaa awgeed maahmaahdu ma ahan murti lagu tiirsanaan karo oo ballan

qaadaysa in abti oo dhami wanaagsanaado. Haddaba tani waxay ku wanaagsna tahay in laga aamuso nuxur yaraanteeda awgeed.

**A6**. "**Adduun waa rag iyo rabbi"**. Maahmaahdaan waa laga saaray qaamuuska maahmaahooyika Soomalaiyeed dambi ay gashay awgeed.

1. Rabbi isaga yaa keligiis u taliya adduunka sida uu Aakhiraba ugu talinayo.
2. Raggu waa la abuure aan waxna iskii ugu soo biirin karin dunida, laakiin hawlaha uu Allaha weyni ku hago ayunbay fal fulin ahaan u qabtaan. Sidaa darteed in rag iyo rabbi la simo waa dambi shirki ah – Ilaah oo cid kale lala simo.

**A7.** "Adduun waa sac iyo sabuul". Maahmahadaan waxaa lagu nasakhay: "**Adduun waa Bir iyo Batrool**". Sababtuna waa:

1. Beri hore ayaa u dambaysay waagii dunida lagaga noolaa in sac oo loola jeedo xoolo la dhaqdo, ama in sabuul oo beer loola jeedo lagu manaafacaadsado. Sidaa awgeed maahmaahdani waa duqowday oo maanta meelna ma buuxiso.
2. Isticmaalka kelmadaha ay maahmahadu ku qotonto oo la illaway awgood, wey adag tahay in ay dadku dhaqso u fahmaan macnaheeda.
3. Hadaan sideeda uga tagno cidina ku dhaqmi mayso oo dadkii maanta way ka soo qaxayaan beerihii iyo xoolihiiba, haba ahaadeen manfac lagu kalsoon yahaye. Sidaa awgeed dhihitaankeedu waa hadal meel waayey.
4. Dunida maanta ee casriga ah waxaa lagu mashquulsan yahay isticmaalka iyo ka manaafacaadsiga birta noocay doontaba ha ahaatee; wershad, computer, baabuur, baaruud, buundo, guri iyo guud ahaanba qalabka la dhigo.
5. Waxa soo raaca bir ee manata dhaqaale laga sameeyaa waa batroolka oo isna soo saaridiisa iyo meel marintiisaba loo isticmaalo birta. Sidaa awgeed wax kaste maanta waxay isugu soo aruureen birta iyo batroolka.
6. Taasi waxay keentay in ana maahmahadan u qormayno sidatan: **"Adduun waa Bir iyo Batrool**".

**A8**. "Adduun waxaa laga waraystaa ninkii kaa weyn aakhirana ninkii kaa cilmi badan". Maahmahadaan waxa lagu nasakhay: "**Adduun waxaa laga waraystaa qofkii kaa waaya aragsan Aakhirana kii kaa diin badan**". Sababtuna waa:

1. Isticmaalka kelmada nin oo la joogtaystaa wxaay meesha ka saaraysaa dawrka ay dumarku ku leeyihiin war murtiyeedyada bulshada sidaa awgeed waa in lagu simaa isticmaalka oo la adeegsadaa kelmada qof mar hadaan laga hadlayn wax u gaar ah jinsi gaar ah – rag ama dumar. Sida awgeed waxan kelmadii "ninkii' ku badelnay "qofkii", halka hore halka dambana waxaan u qadarnay isla kelmadda.
2. Fikrada sheegaysa in kii weyn wax lag weydiiyo adduunka waa mid manata soocn weyday oo waxaa soo if baxday in qof aad u da'yar uu boqol jibaar ka aqoon og yahay dunida mid awoowe u noqon kara, waayo maanta aduunka waxa aqoon iyo garaad lagu kororsadaa wax barasho iyo safar. Labadaas oo horay addunka ku cuslaa ayaa labadaba lagu gaari karaa maalmo iyo saacado. Sida awgeed maanta waxan waaya arag dhihi karnaa qof kasta oo mutaysta intay doonto da'diisu ha la ekaatee.
3. Markii maahmaahda la dejiyey dadkeenu waxay cilmi u yaqaaneen barashada axkaamta Islaamka, laakin maanta kelmadii macno kale ayey yeelatay oo waxaa cilmi la dhahaa wax kasta oo la barto; wax xun iyo wax san intaba. Sidaa awgeed halkii cilmi waxan ku badelnay cilmi diini ah, laakin si aan maahmaahda u qotomino waxan u qormaynay: **"Adduun waxaa laga waraystaa qofkii kaa waaya aragsan Aakhirana kii kaa diin badan".**

**A9**. "Ammaan midgood waa inta afku qoyan yahay". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: "**Ammaan munaafaq waa inta afku qoyan yahay**". Sababtuna waa:

1. Midgo waxa waayadii jaahilayada lagu oran jiray dadka farsama yaqaanka ama ugaar dabatada ah, waxaana af-lagaadadaas buunbuuninteeda ka

dambeeyey gumaystayaashii, inkastoo hortoodna ay jirtay. Laakiin maanta dadka badankiisu waa ogaaday inay edeb darro ahayd oo waxaa lagu socdaa dariiqadii looga waantoobi lahaa.

2. In lagu eedeeyo inay dadka ammaanaan inta uu qofku ka soo horjeedo deedna dib ka xantaan way dhici kartay waayadii ay gumaysiga xoolaleyda ku jireen oo ku beegan qiyaastii xilligay maahmaahdu soo degtay. Laakiin hubaal maanta xaalku sidaas waa ka gedisan yahay, waayo waxay gaareen xornimo ay bareerahooda ku cadaysan karaan oo cid walba iskala doodi karaan. Si ahaana midgaanimadii maanta ceeb iyo dambi toona maahan.
3. Sida ay maahmaahdu u dhacayso waa si waafaqsan tabarta iyo dhaqanka munaafaqiinta. Sidaa awgeed tilmaanta midgaanka lagula qaldamay waxaa iska leh munaafaqa ee waa in maahmahada loo qoraa: **"Ammaan munaafaq waa inta afku qoyan yahay**".

**A10.** "Af habeen nin buuray buu dhibaa". Maahmahadaan waxa lagu nasakhay**: "Af tuur habeen kii tuurayna waa u bariido la'aan kii loo tuurayna waa u dhito –keyd**". Sababtuna waa:

1. Siday hadda u taalay maahmaahdu waxay ka boodsan tahay xaqiiqada oo ah in nin habeen ciil kaambi ku seexday aan subaxdii laga aamin ahayn inuu dhib geysto.
2. Dhanka kale waxay tusinaysaa caddalad daro la caadaystay, taas oo ah in kii xanaaqaba la leeyahay geedkaad gaarto mira ka soo guro.
3. Laakiin habkaan ana u qormaynay waxay tusinaysaa in ana la yaraysan qof dambi laga galay oo habeen ama dharaar qamuunyooday, waayo ciilkiisa mar unbuu cid kula duufin.
4. Qormadeena dambe waxay kaloo daawaynaysaa boogta uur kutaalada ku noqonaysa qofka ciilaysna ee dambiga laga galay oo hadana marka maahmaahdan la xusuusiyo sii qaracmaya, laakiin markuu maqlo ama xusuusto maahmaahda sida cusub loo qormeeyey wuxuu ku qalbi qabowsanayaa in kuu uciilaysnaa qudhiisu uusan hurda nabadeed ladaynin.

5. Qormadeena cusub waxay toosinaysaa qiyamka cadalaadeed iyada oo tusinaysa in uusan qofna ku naaloonaynin eed uu qof kale ka galay.
6. Asbaabtaas awgood waxan maahmaahdan u badelnay sidatan: **"Af tuur habeen kii tuurayna waa u bariido la'aan kii loo tuurayna waa u dhito**".

**A11**. "Ama beec baro ama been baro". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay. "**Beec buunbuuniye been kaaga dhaw**". Sababtuna waa:

1. Maahmaahdani waxay qiyaastii soo baxday xilliyadii ay reer magaalnimadu ku soo bilaabanaysay dalkeena. Markaa ayey dadkii beecsharada ka aqoon ogaa kuwa baadiyaha ka soo galay waxay kula dhaqmi jireen wax xoogaa ka mid ah noocyada fanka dacaayadaha beeca oo aan u bixinay "beec buunbuunin" (*advertisement*). Laakiin kuwii gatayaalka (*buyers*) ahaa markay dareemeen inay beecleyda ama gadayaalku (*salesmen*) kula dhaqmeen qaab yara khayaano ah ayey u qaateen in dulaaleyda iyo kuwa kale ee gadayaalka ihi beenlowyaal yihiin oo weliba ay usoo tababarteen ama dugsiyo u galeen sida beenta loo sheego. Markaa ayey dejiyeen maahmaahda ah "waxaa la yiri: ama beec baro (yacni si xalaal ah wax u beecso) ama been baro (oo noqo nah nahle beeca dadka caasha ka soo geliya turifonimana uga gada).

Laakiin maanta waxay u egtahay in la soo wada ilbaxayo oo dad badani ay ku biireen meherada badeeco dilaalka iyo fanka gadista (*marketting system*" oo shahaadooyin ka soo qaatay dugsiyada ganacsiga (*business school*). Sidaa awgeed dadkaas suuq geynta iyo gadista soo bartay oo dhan lama dhihi karo waxay soo barteen been. Sidaa darteed waa in aan si af gobaadsi ah maahmaahda u qormaynaa. Qaabkaas af gobaadsi waxa uu ila noqday in qofka marka u ku dhex jiro xirfadda suuq geynta been ku sii maceeya lagu tilmaamo mid been-low ah ama been soo bartay, laakiin midka sida tooska ah wax u gata isaga oo aan hadal badni iyo turifo ku walaaqayn iibsadaha aan kelmad xalaal quutenimo ku sheegno. Haddaba si aan taas u asiibno waxa quman in qolada

badanaaba hadal boobtaamis awgiis ay kelamadaha beenta ah een laga firsan ka dhacaan aan si ke digitaan ahaan ah ugu bidhaamino inay khatar u yiihiin been sheegid. Kuwaasi badanaaba waa kuwa beecsharada xayeysiiya oo dal dalanka badan. Sidaas ayaan maahmaahda ugu qormaynay; "Beec buunbuuniye been kaaga dhaw".

**A12**. "**Ama leg hay, ama lug hay, ama laan hay**". Halku dheggaan waxaa laga saaray liiska maahmaahooyinka, halku dhegyada iyo guud ahaanba noocyada xikamadaha sababta oo ah:

1. Oraahdaan waxay soo baxday sanadihii 1970s (todobaatameeyadii) oo ahayd markii ay Soomaalidu badaha fisqiga aad u dhex muquurayeen. Waxaana loo dejiyey in lagu hal qabsado waqtiyada qaboobaha oo uu badanaaba roobku da'ayo si lagula dagaalamo qabowga. Waagaas waxaa la isugu faani jiray barjeynta – qaad cunista wadata geerasheynta, sinaysiga, iyo noocyo kale oo fasahaad. Sidaa darteed waxa la dareemi karaa in waxa loola jeedo laan iyo lug ay yihiin dhaqanka tumashada iyo geerasheynta. Kelmada leg waxa loola jeedaa hilib cunis oo iyadu dhib ma leh laakiin labada (L) oo kale waa in laga suuliyaa dhaqanka iyo maanka dadka. Weliba kelmada (laan) waxay u fasirmi kartaa labada dhaqan fasahaad ee tumasho iyo qayilaad hadba kii la doono oo marka qaab dhedig loo akhriyana waa qaadka marka qaab lab loo akhriyana waa tumashad.
2. Haddaab si loola dagaalamo kelmadaha dhiiri gelinaya dhaqan xumada iyo akhlaaq darada waa in laga soo galaa xaga kuwa dhaqsaha ku faafa ee xikmad ahaanta ugu soo gabada dadka siiba da'yarta soo koraysa ee ku jirta xilliga kacaanka (*adolescent or teen age*)
3. Maanta bulshadu waxay joogtaa xilligii ay ka toosi lahayd hurdada oo ka tawbad keeni lahayd wixii xumaan ah. Dhanka kale is fari lahayd wixiin samo ah iskana reebi lahayd wixii xumo ah.
4. Sidaa awgeed waxan garanay in halhayskaan isticmaalkiisa la joojiyo asal ahaanba.

**A13**. "**Ama rag la kaadi ama riyo la kaadi**". Maahmaahdaan waa laga saaray qaamuuska xikmadaha Soomaaliyeed sababo akhlaaq dari iyo macna la'aan la xiriira awgood.

1. lama garan karo waxa dhabta ah ee loola jeedo iyo waxay faaiidaynayso toona
2. Isticmaalka kelmada kaadi waxay u egtahay in laga keenay waayadii badawnimada culusi jirtay ee ay dadku baadiyaha iyaga oo iska soo horjeeda wada kaadshi jireen, isla markaana riyaha ay dhaqdaani ay hortooda saf mar ugu wada kaadshi jireen. Sidaa awgeed, maanta sii hadal haynteedu ma soo kordhinayso wax xikmad iyo caqli ah.
3. Isticmaalka kelmada kaadi waa eray aan asluubaysneyn oon ku haboonayn isticmaalka. Maahmaahda ama hal hayska noocan oo kale ah marka la sheegayo waxa laga hor mariyaa cudurdaar loo jeedinayo qofka loo hayo oo waxaa la yiraahdaa; " wax rag loogu maahmaaho ma ahane. . . ".
4. Intaas oo cadayn ah awgood waxaa haboon in aan dib loogu noqon isticmaalkeeda oo aan caruurteenana waqti looga lumin iyada iyo kuwii la mid ah.

**A14**. **"Adduunyada madi iyo macallin ayaa ugu maan yar"**. Maahmaahdaan waxaa laga saaray qaamuuska maahmaahooyinka Soomaaliyeed ka dib markii lagu soo eedeeyey ugu yaraan saddex dambi oo kala ah:

1. Horta waa mid been ah oon la hayn wax lagu xaqiijiyo iyo cilmi baaris loo cuskado ama caqiido laga tixraaco
2. Ka soo horjeedka taas waxa uu caqliga saliimka ah iyo cilmiguba cadaynayaa in ay labada; macallin iyo madi yihiin kuwa aad u caqli badan. Tusaale macallin waxa laga faaiidaystaaba waa caqli oo isaga yaaba caqli bare ah. Madina sida qaalibka ah waxa uu noqdaa nin caqli badan waayo waxa ku koraya maskaxdiisa dareen weyn oo ah in uu dareemo xilka culus ee saaran, maadaama uu yahay kan keliya ee mas'uuliyada reerku dushiisa saaran tahay

aabihiis ka dib, illeen waxaa iska caado noqotay in gabdhaha aan xagood ala isku hallayne.

3. Waa af-lagaado aan geed loogu soo gaban oo loola bareeray qof kasta oo madi ah – keligii wiil laga dhalay lana dhashay gabdho. Sidoo kale qof kasta oo macallin ah oo isugu jira kuwa bara cilmiga diiniga ah iyo kuwa dhiga cilmiyada aan diiniga ahayn intaba,
4. Wax macno iyo xikmad ah oo ay soo kordhinaysaa ma ay jiraan,
5. Sidaa darteed waxaa la gartay in maahmaah ku sheegan isticmaalkeeda la joojiyo oo qofkii laga maqlo lagu eedeeyo badawnimo iyo dib udhac ama xataa dib u socodnimo.

**A16**. **"Ayaxaan dilaa layga asiibay – la iga raacay"**. Halqabsigaan waa laga saaray liiska erayada lagu hal qabsado ama lagu celceliyo warsheegooda, ka dib markii la xaqiiqsaday in isticmaalkiisu dambi aad u weyn oo Ilaahay laga gelayo yahay. Waxay noqonaysa ain shirkun billahi oo ah dambiga ugu culus ee la galo, waayo waa in Muslimku ogaada ain wax kasta oo ku dhacaa ay yihiin qadar Allah oo xaga Rabbi ka timid laakiin aan wax kale laga raaci karin. Sidaa awgeed fadlan akhristow hadada maanta ka dib qof afkiisa ka soo bixinaya tan ama tu la macno ah uga dig oo ka waani adoo usheegaya inay cadaab u horseedi karto.

**XAEAFKA (I)**

F. "Il ribix arkaysaa rixin ma daydo". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Ileey ribix aragtaye bal rixina arag**". Sababta oo ah:

   1. Hadaan sideeda u dayno waxay tusinaysaa naxariis daro iyo cadawtinimo ku salaysan dhaqaale aruursi iyo sed buursi ka dhex dhacda dadka qaraabada iyo xigaalada ah.
   2. Waxay dhiiri gelinaysaa isu naxariiso la'aanta iyo hunguri weyninda qofka ka eryaysa naxariista qaraabada iyo rixinka,

3. Waxay waafaqaysaa nolosha nooceeda wuxuushnimada ah ee maanta lagu aqdaanto oo la miciinsaday ka dib markii la yara xakameeyey boobkii iyo dhicii qayaxnaa lana dhiiri geliyey lacag badsiga, iyada oo la isugu faanayo "imisaa bangiga kuugu jirta aan wada hadalnee",
4. Waxay ka hor imaanaysaa Diinta Islaamka Aayado Qur'an ah iyo Axaadiis intaba. Bal eeg guud ahaanba aayadaha quseeya guubaabada qaraaba xiriirinta iyo isu naxariisashada dadka dhexdooda,
5. Laakiin qaabka dambe een u qormaynay waxay dhiiri gelinaysaa qaraabo iyo rixin xiriirinta iyo is walaalaysiga la isugu naxariisanayo,
6. Sida dmabe waxay ka tarjumaysaa Aayado iyo Axaadiis halka ay tii hore ka inkiraysay,
7. Haddaba maahmaahdu waxay ku qurxoon tahay sida ah: ""**Ileey ribix aragtaye bal rixina arag".**

T. "Ilaah intaan ka barto waan hoos joogay". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: " **Ilaah intaan ku ogaado wuu i tusay**". Sababta oo ah:

1. Sida ay u taallo waxay tusinaysaa af xumo iyo af lagaado loo geysanayo Ilaaha awooda sare leh,
2. Ilaahay loogama hadlo sida Aadanaha looga hadlo mana ahan ruux Aadami ah ood is baranaysaan ee waxaad kala tihiin mid isagu keligiis dunida oo dhan iyo waxa ku jiraba iska leh sida uu doonana ka yeeli kara iyo mid ka mid ah noolayaasha aadka u tabarta yar ee uu abuurtay,
3. Ilaahay isaga unbaa dadka yaqaana laakiin iyagu ma yaqaanaan dhab ahaana uma fahmi karaan waxa uu maagan yahay iyo sida uu hawlihiisa u kala wado. Waa tuu Nebi Ciise NNKHA cadeeyey in uu

Allah isagu uun dadkiisa yaqaano oo marka uu Allah weydiiyo bal inuu isagu ka dambeeyey ku sheegashada Ilaahnimada ee ay Kiristaanka habawsani isaga iyo hooyadiiba ku sheegaan, wuxuu Ilaah yiri; "(xusuuso) Markuu yiri Allah, Ciise Inankii Maryamow ma adaa ku yiri dadka ka dhigta aniga iyo hooyaday Ilaahyo Allah ka sokow, ee uu yiri: waad nastahan tahay iguma haboona in aan dhaho waxaanan xaq ulahayn, haddaan irina waad ogtahay waxaadna ogtahay waxa naftayda ku sugan Aniguse kuma ogi Adiga unbaa ah kan waxa maqan og.": (Qur'an: Al-Ma'iddah: 116).

4. Siday horay ugu qormaysnayd waxay tusinaysay in qofku uu leeyahay xad uu ku baran karo waxa uu yahay Ilaahay deedna uu go'aan ka gaari karo oo ka tashan karo isaga oo ka maarmaya,
5. Waxa kale ooy tusinaysay in qofku uu la xisaabtami karo Ilaahay oo haduu waxa uu rabo ka waayo faraha kala bixi karo,
6. Qormada dambase waxay tusinaysaa in qof kastaba uu Ilaahay hortiisa iyo dhinacyadiisa dhigay wax tusinaya jiritaanka iyo awoodda Illaahay oo uu ku cibra qaadan karo. Tusaale in uu qofku Allah ku garan karo marka uu naftiisa iyo jirkiisa is eego oo isu fiirsado sida uu u dhisan yahay una nidaamsan yahay. Sidaa si la mid ahna marka uu eego dunida ku hareersan ee isugu jirta cir, dhul, bad, barri, buuro, webiyo, bahalo, dhir, iwm.
7. Qormada dambe waxay waafaqaysaa aayadaha Qur'anka ee quseeya sida Aayadda uu Ilaah ku leeyahay: "Waan ka tusin doonnaa Aayaadkeena waxyaalaha ku meegaarsan iyo Naftooda dhexdeeda ilaa ay kaga cadaanayso in uu Qur'anku xaq yahay: "Waxaanu ka tusin Aayaadkanaga Jihooyinka (deegaankooda) iyo naftooda ilaa intay uga cadaato in uu Qur'anku xaq yahay, miyuunan ku filneyn Rabbigaagu in uu wax kaste og yahay" (Qur'anka: Suuradda Fusilat: Aayadda: 53 aad).

8. Waxay maahmaahdani baraysaa qofka in uu ku baraarugo in ay meel walba kaga muuqdaan wax uu Allah ku aqoonsado, iyada oo u dhaqan gelaysa sida ah: "**Ilaah intaan ku ogaado wuu i tusay"**.

J. "Ilaahay eray gef ah waa kaa yeeriyaa kugumase dhaafo". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay "**Eray gef ihi waa kaa soo yeeraa Ilaahse waa kuu xisaabiyaa**". Sababtuna waa;

1. Hadaan dhahno ilaahaybaa kaa yeersiiya eray gef ah oo hadana aan kuu dhaafine kugu ciqaaba waxay u ekaanaysaa inuu Illaahay adoomadiisa ka gar daran yahay oo intuu eray gef ah ka yeeriyo hadana ku qabsada oon weliba u dhaafin. Taasina waa mid khilaafsan tacaaliimta Diinta Islaamka iyo xaqiiqada Ilaahay kula macaamilo adoomadiisa,
2. Waa macquul in ay ujeedada maahmaahdu tahay in qofka laga ilaaliyo ku dhawaaqida hadal gef ah, laakin hadana dhan kale ayey ka dheeliday maahmaahdu marka Allah eed uusan lahayn dusha loo saaray ee loo ekaysiiyey qabiid ma naxe ah oo hadana gardarroole ah Ilaahna wuu ka sharaf weyn yahay sidaas,
3. Waxay ka soo hor jeesanaysaa aayadaha Qur'anka ee faraha badan ee sheegaya in uu Allah yahay Dambi dhaafe Naxariista uuna umadiisa u dhaafo dambiyada ay galaan, marka laga reebo shirkiga lagu dhinto iyada oon laga tawbad keenin oon dib looga Muslimin,
4. Waxay ku ridaysaa dadka qalbiga jilicsan argagax iyo jiha wareer laga yaabo inuu gaarsiiyo heer ay ka quustaan naxariista Eebbe ama ay wax qaldan Allah ka sawirtaan,
5. Sida dambe een hada uqormaynay waxay cadaynaysaa in ruuxa Bani Aadamka ihi uu gefo oo hadal aan munaasib ku ahayni ka soo yeero laakiin hadana uu Allah eraygaas ku darayo xisaabtiisa gefafka ka dhaca,

dhanka kalena waxay muujinaysaa in weli Allaah yahay dambi dhaafe naxariista.

6. Waxay qormada dambe waafaqaysaa xadiiska Nebiga (NNKHA) ee dhahaya: "Bani'Aadamka kulligood way gefaan waxaase ugu kheyr badan kuwa gefkooda ka tawbad keena",
7. Haddaba maahmaahdu waa; ""**Eray gef ihi waa kaa soo yeeraa Ilaahse waa kuu xisaabiyaa"**.

X. 'Ilaahow saaxiibaday iga ilaali, cadawgayga anigaa iska ilaalinayee". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Ilaahow iga ilaali shirqoolka saxiibaday iyo kan cadawgayga**". Sababtuna waa:

1. Waa dhab in ay maahmaahdu tusinayso xaqiiqo jirta oo ah in aysan saaxiibadu ka aamin ahayn dhibaataynta qofka aamina ee la saaxiiba oo lagaba yaabo in ay gaarsiiyaan dhib uusan ka filanayn oo ka daran kan uu ka filanayo cadawgiisa, laakiin hadana waxay u muuqataa mid lagu dejiyey caro iyo ciil kaambi dheeraad ah. Sidaa darteed ka fogaatay cadaaladda, illeen saaxiib kaste ma ahan mid xumaan maleega oo cadawga ka darane,
2. Waxay u muuqataa in uu qofku waxa uu doono qabsan karo ama cida uu doono iska dhicin karo isaga oo aan wax kaalmo ah ka helin Allah. Taasina waa gef.
3. Waxay dhiiri gelinaysaa colaad iyo kala shaki weligii ku dhex jira dadka saaxiibada ah ee isu calool fayow,
4. Siday hada u dhigan tahay maahmaahdu waa mid ka dhar la' asluubka hadalka qofka Allah rumaysan ee caqli leh, waxayna u muuqataa hadal uu leeyahay qof adduun iyo aakhiro toona dhur iyo dhaqan ka lahayn oo quustay,

5. Waxay diidan tahay in ay dadku noqdaan saaxiibo isku kalsoon oo is xigsada, taasina waa mid soo af jaraysa nolosha Aadanaha ee dunida ka jirta,
6. Sida dambe een u qormaynay waxay waafaqsan tahay ducooyinka laga soo gaaray Nebiga (NNKHA) iyo asxaabtiisa iyo weliba kuwii wanaaga ku raacay ee dambe.

KH. "Ilmo geed muuqdaa lagu geedi geliyaa". Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: "**Ilmo Alaabo alaabey baa lagu aamusiyaa odayana sheeko waayo waayo**". Sababtuna waa;

1. Waxay ka tarjumaysaa xilli baadiyoodkii la soo dhaafay oo laga soo degay magaalooyinka,
2. Waxay ka tarjumaysaa noloshii silica iyo rafaadka ahayd ee lagu guuri jiray awrta, halka maanta xataa baadiyaha lagu guurayo baabuurta dheeraysa. Sidaa darteed way qiimo dhacday maahmaahdu,
3. Macnaheeda dhab ahaan uma fahmi karo qof aan oday ama habar baadiyood ahayn oo waxay u baahan tahay in la qeexo waxa loola jeedo 'lagu geedi geliyaa', taas oo macnaha ku jiraa yahay si ay u socdaan markay daalaan ayaa caruurta been loogu sheegaa; "geed kaas muuqda ayaan gaaraynaa ee adkayso", taasina waxay u ektahay mid xataa dadka maanta baadiyaha joogaa aysna dhaqso fahmi Karin,
4. Waxay ka soo horjeedaa Diinta Islaamka mar haday been sheegid ku qotonto, gaar ahaan Axaadiis dhab ahaan u taabanaysa in aan caruurta la sirin oo been loo sheegin, illeen beenta ilma saqiir ah loo sheegay way ka xun tahay mida qof weyn oo isagu maskaxdiisa wax ku kala saaran kara loo sheegaye. Waxa uu Nebigu (NNKHA) yiri: "Qofkii intuu ilma yar wax u taaga ku yiraahda Hoo ee aan siinin, wuu been sheegay",

5. Wax baahi ah oo maanta maahmaahda noocan ah loo qabaa ma jirto oo waa laga kaaftoomaa,
6. Waxaa badelkii ilma socodsiinta iyo geediga maanta jooga waxyaalo kale oo caruurta lagula harjado ayna ka mid yihiin ka dhawrida ficilada qaldan iyo boohinta macna darada ah, kuwaasna waxa loogala dagaalami karaa qalabyada caruurta loogu tala galay in lagu sab sabo ee lagu mashquuliyo loona yaqaan *dolls* ama Af Carabi ahaan *lucba.* Haddaba qalabkaas oo af Soomaali ahaan noocyadiisa kala duwan lagu macnayn karo "Alaabo alaabeey' ayaa maanta lagu maaweeliyaa ilmaha si looga mashquuliya wax dhibaya naftooda ama nafta waalidkooda,
7. Si aan maahmaahda nuxur iyo nafaqo ugu yeelno waxan ku kordhinay qayb labaad oo kobcinaysa ahna ". . . Odayana Sheeko waayo waayo".
8. Sida aan hada u qormaynay waxaa loogu adeegsan karaa baraarujinta ama dareensiinta qof weyn oo wax lagu maaweelinayo si wax kale sida fikirka IWM looga jeediyo,
9. Sidaan hada u qormaynay waxay waafaqsan tahay nolosha casriga ah ee la joogo iyo weliba dhaqanka Islaamka.
10. Qaybta dambe ee khusaysa odayada waxay ujeedaa labada jinsiba (lab iyo dhedig) qofkii gabooba oo baaritaanada cilmiga nafsaaniga la xiriira lagu ogaaday in ay si ka badan sida caruurtu maaweelada ugu baahan yihiin ay iyaguna ugu baahan yihiin in laga dhegaysto ama la soo xusuusiyo sheekooyinka looga hadlayo waayahoodii beri samaadka ahaa,
11. Hadaan waayeelka sidaa lagu maaweelin waxa ku imaan kara jirooyin badan oo ay ugu daran tahay isla hadal iyo waalli. Sidaa awgeed waxan garanay in maahmaahdaan la dhaqan geliyo si loo xanaaneeyo da' weynta,
12. Sidaa darteed waxaa dantu ku jirtaa in maahmaahdaan qormaynteeda oo weliba dhaqankeedana la hirgelinayo la yiraahdo: "**Ilmo Alaabo alaabey baa lagu aamusiyaa odayana sheeko waayo waayo".**

G. "Imaamka ina adeerkiisaa run usheega". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay:

"**Imaamka Ardaygii ka Aflaxaa runta usheega**".

1. Hadaan dhahno qofka ina adeerka ama ehelada u ah oo keliya ayaa wax ushegei kara ama sixi kara imaamka oo qormada maahmaahda loola jeedo wadaadka diinta ugu sareeya qoladaas waxay noqonaysaa in Imaamku uu siduu rabo ugu takri falo qolada uu Imaamka u yahay oo waxa uu rabo ka dhaadhiciyo waxa uu rabana ku sameeyo qoonka isaga oo ku sifoobaya oraahada kale ee ah: "**lama caanaantaan baa caanihii daadshay**", taasina waa mid ka soo hor jeeda barbaarinta Diinta Islaamka iyo caqliga casriga ah ee fayow,
2. Waxay ka soo hor jeedaa barashada Diinta Islaamka oo ku salaysan xoriyad iyo is toosin. Tusaale; markii uu Amiirkii Mu'miniinta Cumar Bin Khadhaab isaga oo khudabadii Salaada Jimcaha jeedinaya yiri; "waa in intaas lagu qoondeeyaa meherka la siinayo naagta la guursanayo", waxaa ku qabsatay gabar ka mid ah dadkii dhegaysanayey khudbadaas jimacaha oo tiri: "cumarow ma intuu ilaahay noo yiri: ". . . Ood siiseen Buuro waa weyn (aad meher uga dhigteen wax ka weyn buuraha waa weyn)": Qur'anka: Al-Nisa: ayaad adigu maanta noo xadidaysaa iyadoon Ilaahay noo xadidin?. Markii uu intaa maqlay ayuu Amiirkii Cumar soo xusuustay aayadaas oo intuu isku naxay ku dhawaaqay: "Alleylehe Cumar waa gefay gabadhaasina way asiibtay xaqii". Haddaba qof kaste oo qaldama waxaa qaladkiisa, haduu yahay mid diini ah iyo haduu yahay mid aduunyo macaamilkeed ah labada, usheegi kara oo toosin kara qofka ugu horeeya ee Allah garansiiyo gefkaas kuu doono ha ahaadee,

3. Waxay dhiiri gelinaysaa is cabsi gelin iyo isa saraysiin la isugu dhuumanayo aqoonta diinta, taas oo si aad ah uga soo horjeeda ujeedadii ay diinta Islaamku usoo degtay,
4. Sidaana hadda u qormaynay waxay hirgelinaysaa sinaan iyo cadaalad ku salaysan in loo siman yahay xaq iyo diinta, taas oo dhanka kalena ka waafaqsan barnaamijka dimoqraadiyada ee maanta la xiiseeyo,
5. Waxay dhiir gelinaysaa inay ardayda cilmiga baranaysaa layli ahaan u muujiyaan aqoontooda oo aysan kala xishoon xataa macallinkii baray si ay ugaaraan xaqiiqada cilmiga, illeen cilmi mid la xishooday iyo mid la baqay toona kama aflaxaane,
6. Haddaba waxaa haboon in maahmaahdaan loo qormeeyaa "**Imaamka Ardaygii ka aflaxaa runta u sheegaa**".

R. "Inan Sabool siil ma leh". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Guu**r **saboolnimo ma leh**". Sababtuna waa:

1. Waxaa markii horeba maahmaahdaan lagu saleeyey dulmi iyo weliba af lagaado loo geysanayo qoysaska saboolka ah. Taasina waa mid ka soo hor jeeda diinta, bani aadanimada, ilbaxnimada, xaqiiqada, iyo fahamka nolosha casriga ah intaba.
2. Ujeedka maahmaahda oo ah in aan la guursan gabadha ka dhalatay qoys faqiir ah xataa haday qurux badan tahay waa mid ay ku dhaqmi jireen dadyowgii hore ee burjuwaasiyinta ahaa ee qofba qofka kale ku gumaysan jiray dhaqaale iyo awood cudud (inkasta oo ay weli taasi maanta muuqato). Laakin waxaa dib laga ogaaday inay tahay fikrad qaldan oo dhaxalsiisa faqiirka iyo taajirkaba cawaaqib xumo daran,

3. Dhaqankaas jaahiliga ihi waxa uu ka hor imaanayaa rumaysadka diinta Islaamka sida uu uga hor imaanayaba ilbaxnimada casriga ah,
4. Inkasta oo adeegsiga kelmada "siil" u muuqdo mid cay iyo faduul ah hadana waxay malaha dadkii hore u doorteen qeexitaanka ujeedada oo ay dhab u taabanayso, laakiin waxaa hadana dhanka kale laga dareemayaa in kolkii maahmaahda la dejinayey ay dadku u badnaayeen qaar xishoodka aan ku aqdaamanayn. Haddaba waxan garanay in laga af gobaadsado kelmada "siil" oo badelkeeda la isticmaalo ujeedada dhabta ah ee loo dan leeyahay oo ah "guur",
5. Maanta markii la ilbaxay oo dadyowgii kala qoqobnaa la isku siidaayey waxaa beenoobay isticmaalka iyo ku dhaqanka maahmaahdaas oo isu badelay ka soo hor jeedka. Waxaa had iyo jeer filimada iyo sheekooyinka lagu sheegaa qisooyin jacayl oo dhex maray wiil taajir ah iyo gabar faqiirad ah, ugu dambystiina is hantay oo ku guulaystay ka run sheegida jacaylkoodii, bal u fiirso filimada Hindida. Sidaa awgeed tirtiritaanka maahmaahdaan waxa loo soo maray halgan dheer oo hada mirihiisii la guranayo ee halaga takhaluso maahmaahda keligeed soo hartay,
6. Si hadaba maahmaahda loo waafajiyo doonta dunida aan maanta saaranahay waa in ay wada khusaysaa wiilka iyo gabadha oo aysan gabadh keliya ku ekaan, illeen waxaaba laga yaabaa in maanta gabdhahu iyadu ku horeeyso ama ku daran tahay nin doonka,
7. Waxaa kale oo jirta in ay maanta gabdhuhu yihiin kuwa aadka u daneeya maalka ninka ay guursanayaan oo u isticmaala maahmaahda dhanka kale ee raga "Nin sabool ihi nin ma ahan". Haddaba waa in la wadaajiyaa labada dhanba lab iyo dhedig,
8. Si loo xaqiijiyo in waxa runta sheegaa uu yahayn jacaylka iyo is rabitaanka labada ruux ee is guursanaysa ayaan u badelnay maahmaahda "**Guur saboolnimo ma leh**".

S. "Indha adayg waa Sed", Halku-dheggaan waa la baabi'iyey, ka dib markii la ogaaday in uu ku qotomo dulmi, dhac, boob, handadaad, is maqiiqnimo, kulalihinimo baad doon ah, iyo eray biixno kale oo soo if baxay waayadan dambe ee hororka iyo handadku batay oo ay ka mid yihiin "ku qabso ku qadi mayside".

SH. "In-dheer aragto rag waa ku yar tahay dumarna kuma jirto'. Maahmaahdaan waxa lagu nasakhay: " **In-dheer aragto rag iyo dumarba waa ku yar tahay**". Sabatuna waa;

2. Rag iyo dumar marba waa kii Allah wax garansiiyo ee noocna gooni uma lahan garaadka ama garaad laawenimda,
3. Waxay niyad jebinaysaa fikirka iyo wax tarka dumarka oo isu qaadanaya inaysan weligood wax weyn fahmi Karin,
4. Waxay marin habaabinaysaa Raga oo isu arkaya inay mar walba iyagu ka aragti dheer yihiin dumarka sidaa awgeed aysan u baahnayn isku dhib fakir iyo dadaal hor leh,
5. Waxay ka soo hor jeedaa Aayad Qur'an ah oo ilaahy uu kaga shekeeyey Haweeneydii Balkhiisa ahayd ee iyada oo xukunta dalka Yeman uu soo fara geliyey Nebi Suleymaan (NNKHA). Waa tay Haweeneydaan oo ka aragti dheerayd madaxdii kale ee ka hoos shaqaynaysay (Goleheedii Shacabka ama Baarlamaanka) oo markay ku tiri; war qoladani way naga xoog badan yihiin haday na qabsadaana kuwa dhulka ugu sareeya ee cisada leh bay ka dhigayaan kuwa ugu hooseeya, ee ay ku adkaysteen mayee yaanaan baqin anagu rag ballo ayanaanu nahay oo waan bubursanaynaa iyaga oo hadalkooda u dhigaya: "Anagu waxaanu nahay kuwa xoog badan oo hadana balaayo badan, hade amarkuna adiga unbuu kaa go'aa ee waxaad rabto noogu tali" (aqri; suuradda Al-Naml: 16-44). Markaa ay ku go'aamisay in colka la iska maslaxo oo bal wax laaluush iyo

cilaaqad wanaag ah lagu dayo, taas oo waafaqsan sida maanta la isaga laaluusho wadamada xooga ku faana.

6. Maanta duruufaha dhibka badan ee jira waxay rag badan ka dhigeen ma fikirayaal iska daman oo ragu ragii hore ma ahan. Ka soo horjeedka taasna waxaa la arkay dumar badan oo ay hawlahooda maalinlaha ihi bareen fikir iyo xisaabtan aan horay dumarka looga baran. Sida aawgeed xaalku xaalkii hore ma ahan ee aan hada maahmahadaan badelno oo wejigeeda shaqayn kara ku leexino,
7. Qaabka qormada dambe waxay tusinaysaa in Aadanuhu dabiici ahaan ku gaabiyo xaga ku fikirka waxyaalaha qarsoon ee mustaqbalka la saadaalin karo,
8. Haddaba waxaa la door bidayaa in aragtiyada fogaan ahaan iyo dhawaan ahaan labadaba la wadaago oo aan loo qabirnaan mida raga oo keliya ee dumarkana laga qayb geliyo. Sidaa awgeed in maahmaahda loo qormeeyaa: "**In-dheer aragto rag iyo dumarba waa ku yar tahay**".

DH. "Ishii Sariiri u muuqataa seexata". Maahmaahdaan waxaa lagu nasakhay: "**Hurda Saxariir lagu bartay Sariir looma raadasado**". Sababtuna waa;

1. Asalba maahmaahdu waa mid u muuqata in aan laga fiirsan ee la iska yiri, waayo kolkii horeba Soomaalidu sariiro kuma seexan jirin,
2. Qofka sidaa u fikiray waa mid aan dhadhamin silica iyo saxariirta ay leedahay hurda la'aanta ama hurada yaridu.
3. Waxaa dhab iyo xaqiiqo ah in marka ay hurdadu qofka soo ridato aysan ku simaynin sariir iyo meel qurxoon toona ee meel walba ku qabanayso, waxaa la arkaa qof musqul ku hurday iyo qof biyo dhiiqo ah dhexdood ku hurday ka dib markii daalkii iyo qaadiradii hurdadu ka tan badiyeen,
4. Waxay dhiiri gelinaysaa in qof walba uu isku taxalujiyo wax uusan haaban Karin, marka uu waayana uu isu dareemo sidii qof dhiman oo noloshiisa bar ka maqan yahay,

5. Waxay diidan tahay tawaaduca oo ah aqbalitaanka nolosha teeda hoosaysa ee ay dadka intiisa badani ku jiraan,
6. Waxay ka soo hor jeedaa run sheegnimada oo waxay noqonaysaa mid ka mid ah maahmaahooyinka Soomaaliyed ee beenta lagu sheegay kana hor imaanaya maahmaahda caanka ah ee "**Soomaali been waa sheegtaa beense kuma maahmaahdo**".
7. Waxaa la xaqiijiyey in qofka ku hurda bartay meel burbursan iyo meel aan raaxo lahayni uusan qaban Karin meesha raaxada leh marka la siiyo oo laga yaabo in uu u arko in dambi laga galay oo sharaftiisii iyo raaxadiisii meel looga dhacay. Tusaale; hadaad qof aan weligii sariir ku seexan habeen sariir seexiso waxaad arkaysaa marka uu aroortii hurdada ka tooso isaga oo intuu istaagay horay ka dhaqaaqay oo sariirtii ka dhacay illeen waxa uu u bartay inuu markuu tooso horay ka dhaqaaqo isaga oon meelna ka soo deigne.
8. Si aan runta u waafaqno waxan maahmaahdaan u qormaynay "**Hurdo saxariir lagu bartay Sariir looma raadsado**".

## XARAFKA (O)

B. Oodo dhacmeed siday ukala sareeyaan baa loo kala qaadaa. Maah maahdaan waxa alagu naakhay: **"Canjeelo siday u kala koraysaa loo kala qaadaa"**.

## CAYAARAHA HIDAHA IYO DHAQANKA IYO HEESAHA OO AH ILAHA MAAHMAAHOOYINKA

Ilaha ugu horeeya ee lagu sameeyo maahmaahooyinka Soomaalida waxaa ka mid ah kulamada cayaaraha hidaha iyo dhaqanka ee laga kala dheelo gobolada dalka ee kala duwan. Haddaba maadaama ay cayaarahaas iyo cawaysyadaasi qayb libaax ka qaataan abuuritaanka xikmadaha waxaa nala gudboon in aan halkaan ku xusno wax ku saabsan cayaarahaas.

Xilliyada uu roobku da'o oo xooluhu dhalaan ama ay beeruhu baxaan ayey ka siman yihiin Soomaalidu in ay isugu soo baxaan cayaaro iyo cawaysyo ay ku daahaan habeenkii. Goobaha lagu qabsado cayaarahaasi ma ahan dhismayaal dedan oo lacag lagu galo sida cawaysyada habeenkii (*night clubs*) ee casriga ah. Hase ahaatee waa bilaash oo wax lacag ah la iskuma xujeeyo inkasta oo mararka qaarkood aan cod la siinin dhalinyarada ay da'doodu yar tahay iyo odayaasha waa weyn oo aan iyagu marnaba haysan wax soo dhawayn ah. Nooca dad ee la jecel yahay inay ka soo qayb galaan cawaysyada waa gabdhaha dhalinyarada ah ee aan la qabin. Taasina waa mid dunida oo dhan laga siman yahay, sidaa darteed dunidan cusub waxaa la siiyaa habeen u gaar ah dumarka oo la yiraahdo "habeenka dumarka" (*ladies night*). Habeenka dumarka lagama wado in uu u gaar yahay dumarka habeenkaas laakiin waxaa laga wadaa in ay dumarku lacag la'aan ku geli karaan cawayska si loogu soo jiito dhaqankaas.

Cawaysyada Soomaalidu guud ahaanba wax weyn kama duwana kuwa gaalada ama reer Galbeedku ay ka duntaan oo ah qoob ka cayaar iyo labo labo lamaaneyn, inkasta oo meelaha badankooda ay gabdhaha Soomaalidu si koox koox ah ama jamac ah uga soo jeestaan saf gooni ah raguna safka kale, deedna oraahyada la is weydaarsado.

Gobolada dalka Soomaaliyeed aad bay ugu kala duwan yihiin noocyada cayaaro ee ay kala cayaaraan xilliyada barwaaqada iyo rayska, sida ay duniduba deegaan ahaan ugu kala duwan tahay. Haddaan qormadaan tusaale ahaan wax uga tilmaano cayaarahaas waxaa ka mid ah:

a. Gobolka Gedo iyo nawaaxigiisa waxaa laga cayaaraa "Saar"
b. Gobolada Bay iyo bakool waxaa laga cayaaraa "Beereey iyo Kabeebey"
c. Gobolka Shabeelada Hoose/Dhexe waxaa ku can ah "Kabeebey", laakiin magaalada Afgooye waxaa laga cayaaraa "Is tun". Is tun waa in markii xilliga sanadkiisan la gaaro uu qof walba soo gurto ulo dhenkedo ah ama ka waaweyn oo inta saf iyo saf la noqdo bashta la iska geliyo iyada oo si kas ah la isu garaacayo oo dhiig la iska daadinayo dhimashana way dhacdaa badanaaba. Haddaan sidaa la yeelina waxaa laga baqayaa in ay sanadkaa beeruhuna bixi waayana wiilalna dhalan waayaan, arintaasina waa Shirki oo ah dambiga ugu weyn ee Ilaahay laga galo.
d. Gobolka Banaadir iyo nawaaxigiisa waxaa laga cayaaraa: "Shirib, Caways, Suurow, iyo kuwa kale",
e. Gobolka Beled Weyne iyo nawaaxigiisa waxaa laga cayaaraa "Bullo iyo Beerrey",
f. Gobolka Galgaduud iyo Mudug waxaa laga cayaaraa dhawr cayaarood oo kala ah: "Dhaanto, Wilisiqo, Waalo, Suurow, iyo Sacab",
g. Goblka Garoowe iyo nawaaxigiisa waxaa laga cayaaraa "Jaan, shimbir, iyo kuwa kale"
h. Gobolka Bari ma jiraan wax cayaaro rasmi ah oo laga cayaaro oo dadkoodu way mashquulsan yihiin, noloshooduna badanaaba kuma xirna beer iyo xoolo toona ee Bad iyo Xabag oo aan iyagu xilliyo u gaar ah oo dabaal deg lahayn,

i. Gobolada Sool iyo sanaag waxaa laga cayaaraa "Heello, Jaan iyo kuwa kale"
j. Gobolada Waqooyi Galbeed waxaa laga cayaaraa "Batar iyo Heello"

Xilliga Roobabka ayey Soomaalidu cayaar iyo kulan hawaystaan inta kalena waxay ku jiraan harjad iyo naf la dagaallan culus oo isugu jira hayaan iyo haraad. Laakiin marka barwaaqada waxaa laga bilaabaa is guursi iyo haasaawe ama shukaansi. Waxaase badanaaba arintaas carqaladeeya oo kala daadiya colaado iyaga qudhoodana lala beegsado xilli roobaadka. Xilligaas oo ah marka ay dadka iyo duunyaduba qooqaan ayaa ah marka loo tiriyo dadkeena ku nool baadiyaha.

Dhanka kale dadka Soomaalid aoo ah kuwa aad u faan jecel weliba rag iyo dumar midba midka kale ayuu isaka dhisaa oo ku dadaalaa sidii uu been ugu soo xera gelin lahaa. Sidaa darteed waxaa dhacda in qof waliba uu goobta cayaarta cawayska ku soo bandhigo intii uu wax lagu faano ama lagu amaano soo sameeyey xilliyadii abaaraha iyo kala hantaawilifka oo uu doonayo in xiligaan beri samaadka uu ku helo lamaane rasmi ah. Markaa ayuu qof waliba is faanis guda galayaa, waxaana dhacda in qofkii intuu dambi galay la raadinayey uu halkaa isagu isku kashifo isaga oo ku faanaya dambigii uu galay. Tusaale ahaan waxaa dhacday in xilligii gumaysiga Ingiriisku jiray uu nin dilay gaal ku hawlanaa gumaysiga dadka uuna dhuuntay. Markii baadi goobkiisii laga quustay ayaa la go'aamiyey in marka la gaaro xilli roobaadka laga soo dhegaysto goobaha cayaaraha oo dhan bal nin ku faana dilkaas. Mise goobtii ugu horaysay ayuu wiil isag oo cayaartii ka soo boodaya ku dhawaaqay " geesinimana ninkii gaalkii dilay baan ahaye. .."

Sidaa si la mid ah ayuu nin faantamaya oo cayaarta Batarka ka soo boodayaa ku hal qabsaday erayo ay ka mid ahaayeen: "Inanyahay xaga aqoonta wax aan la iidhigin oonan baran Baasaboor baa ka jira isna waxaan bawsi ku hayaa in aan Nina Berbera xagaa usii dhaafi Karin kol hadduusan Baasaboor

sidane. Baabuurna wax badan la iigama dhigin waxaanse ogahay mar Haddaan Biyaha iyo Batroolka loogu roonaan Banjar in uu khatar u yahaye...".
Sidaas oo kale ayey Soomaalidu cawaysyada uga gabyaan ama uga heesaan oraahyo aan sixadoodu ama dhadhankoodu wanaagsanayn. Dabadeedna waxa alaga yaaba ain ay qaar erayadaas ka mid ihi si tartiib tartiib ah u galaan diiwaanka maahmaahyada iyo xikmadaha. Haddaba si looga soo kabto amrin habaabiskaas ayaan gartay in dib u habayn lagu sameeyo guud ahaanba Maahmaahooyinkii iyo xikmadihii Soomaaliyeed iyada oo lagu eegayo il ka duulaysa cilmi, caqli, caddaalad, iyo nolosha casriga ah intaba.

Haddaan u dhaadhacno xaga heesaha, waxaan shaki ku jirin in ay heesuhu dawr muhim ah ka cayaaraan dhaqanka bulshada, iyaga oo haday doonaana horumar ku kordhin kara, haday doonaan dib udhac ku keeni kara ama hallayn kara. Haddaba nasiib darro waxaa Soomaaliya soo maray xilli dheer oo guud ahaanba laga dhaxlay dhaqan rog sababo badan oo is daba jiitamay awgood.

Waxaa dalka aad ugu faafay fan iyo suugaan badankeedu ka soo fulayey maskaxyo aan ku hubaysnayn tacliin iyo khibrad ku filan. Haba ka soo fuleene maysan helin maskax la soo mariyo si ay u faaf reebto oo kaga reebto inta qaladka ah ee xad gudbka ku noqon karta Diinta, danta, cilmiga, caqli, caddaalada, IWM. Waxaa keliya oo uu Kacaankii 21 Oktoobar 1969 kii dhashay sameeyey xaafiis lagu magcaabi jiray "Jasuura" ama " Faaf reeb" oo ka dhawri jiray heesaha iyo wixii kale ee war faafin ahba inta dhibaysa ama lidka ku ah ujeedooyinkii Kacaankaas isaga oon xaafiiskaasi wax dan ah ka lahayn wixii dhibaya diinta, dhaqanka, caadada, dhaqaalaha, caqliga, sharafta, sumcadda IWM ee dadka Soomaaliyeed. Halkaana waxaa fursad ka helay boqolaal heesood oo ku salaysan jaahilnimo, diin laawenimo, akhlaaq xumo, iyo fasahaad kale oo kala nooc ah illeen waxaa loo hadlayey afkaa furane.

Waxayse nasiib darada ugu weyni sii noqotay markay heesaha noocaas ihi qaarkood dhaxal gal u noqdeen Soomaalidii oo gaareen heer loo istcimaalo

erayadooda xikmad ahaan. Bal dib u eeg riwaayadihii dalkeena ka can baxay iyo erayada ay heesahoodu xambaarsan yihiin sida heesaha ku jira "Doob qalanjadiisii gabay", "Hablayohow hadmaad guursan doontaan", iyo kuwa kale. Waxaana laga yaabaa in kuwa noocaas oo kale ihi berri ka maalin galaan Qaamuuska maahmaahooyinka Soomaaliyeed. Sidaa awgeed waxaa lagama maarmaan ah in laga hor tago inta ay goori goor tahay.

Si aan ujeedadaas uga daba tago waxan kale oo garab socodka Buuggaan diyaariyey koox fanaaniin ah oo cuskanaysa cilmi, caqli, casrinimo, ilbaxnimo, waaya aragnimo, firfircooni, iyo belwad la'aan. Waxaan taas abuuray ka dib markii aan arkay heerka ay fanaaniintu ka joogaan bulshada dhexdeeda oo liidnimo ah, heerka ay iyagu isla joogaan oo naftooda liidnimo ah, nooca dad ooy yihiin, baahida loo qabo, fikirka diineed ee laga qabo, iyo dhibaatooyin kale oo isa soo taray. Kooxdaan oo aan u bixiyey "Ilays" waxay ilaa hadda ku jirtaa heer dhismo iyo is aruursi, maadaama shuruudaha lagu gelayaa aad u adag yihiin ayaa laga yaaba ain dhismaheedu waqti dheer qaato.

Dhab ahaantii meelaha ilaha xikmadaha loo istcimaalo ee jiraa kuma koobna cayaaraha iyo heesaha oo keliya ee waxaa jira Gabayada oo iyagau ah kuwa si aad u weyn loo qadariyo. Sidoo kale sheekooyinka odayaasha iyada oo aan loo aabbayeelayn wixii uu odaygaasi aqoon iyo waayaargnimo leeyahay ee lagu ekaysanyo da'diisa oo weynaatay.

## SHEEKO XARIIRTA CARUURTA OO KA BIYO CABTA ILAHA MAAHMAAHEED

Waxaa kale oo iyaduna hadalada Soomaalida ee guud dawr weyn ka cayaarta sheekooyinka hallaasiga ah ee ay caruuruhu ku maaweelaan. Sheekooyinkaas waxay kala yihiin qaar looga sheekeeyo si iyaga garaadkooda kor loogu soo qaado iyo qaar ay iyagu dhexdooda isla dhex maraan oo ama hal abuurtaan ama soo min guuriyaan.

Nasiib daro waxaa ayaamahan aad u muuqda dayac weyn oo ku yimid sheekooyinkaas, kaas oo ah in aan wax horumarin ah lagu samayn haba yaraatee. Kaba sii darane weli ma arag ruux dareensan in horumarintaas is casriyeyntaas loo baahan yahay ama ay dhici karto. Waxaan aad uga xumaadaa marka aan arko caruur magaalo ku dhashay oo ana weligood baadiye arag oo barnaamijooda caruureed looga sheekaynayo sheekooyin ku saabsan baadiyaha aadka uga for magaalooyinka iyo wax ku saabsan bahalada ay garashadoodu xataa dadka waa weyn ku adag tahay.

Intaa keliya maahan ee waxaa jirta in caruurta looga sheekooyo qisooyin ku salaysan dhaqamadii baadiyaha oo aysan fahmi karin sida in dhaanka iyo xarkaha lagu guuro ama haamaha lagu xirto. Waxaa taa ka sii daran in caruurta looga sheekeeyo sheekooyin aan wax faaiido ah u lahayn iyaga sida kuwa aan ku qotomin waano iyo caqli celin, tusaaleyn iyo digitaan, iwm. Waxaaba laga yaabaa in sheekeeyuhu u qisaynayo ka helitaan ama ugu yaraan si loogu qoslo.

Haddaba mawduucani waa mid u baahan in isna wax laga qoro oo la dejiyo cutubyo sheekooyin ah oo la qabsan kara nolosha cusub ee caruurteena waxna ku kordhinaya maskaxdooda iyo fikirkooda. Sidaa awgeed fadlan qofkii takhasuska hawshan lahow naga xil furo oo taas wax ka qor. Anigu qof ahaan waxan ku mashquulsanahay mawduucyo kale oo muhim u wada ah bulshada, laakiin haddii aan waayo cid igala wareegta hadde daniba tiri.

# TUSMO

1. Hordhac
2. Mahad naq, Raalli gelin iyo Hibayn
3. Waa Maxay Nasakh Maxaase u doortay Kelmad ahaan
4. Maxaa igu kallifay Qoraalkaan
5. Hadal Murtiyeed
6. Meeqaanka Maahmaahda
7. Qaabka Qoraalkaan
8. Xarafka B – Y, A-U
9. Cayaaraha Hidaha iyo Dhaqanka iyo Heesaha oo ah ilaha Maahmaahooyinka
10. Sheeko Xariirta Caruurta oo ka biyo cabaysa Maahmaahooyinka
11. Tusmo

***WAXAA QORAY, ALLIFAY OO SOO BAN DHIGAY:***

***DR. QAASIM XIRSI FAARAX***